
# Ku soo dhawoow Dowladaha Maraykan

*Hagaha Soc'daalka Cusub*







U.S. Citizenship and Immigration Services

M-618-SOM (rev. 09/15)

# Ku soo dhawoow Dowladaha Maraykan

*Hagaha Soc'daalka Cusub*

U.S. Citizenship and Immigration Services

# U.S. GOVERNMENT OFFICIAL EDITION NOTICE

AUTHENTICATED
U.S. GOVERNMENT
INFORMATION
GPO

**Use of ISBN Prefix**

This is the Official U.S. Government edition of this publication and is herein identified to certify its authenticity. Use of the 0-16 ISBN prefix is for U.S. Government Publishing Office Official Editions only. The Superintendent of Documents of the U.S. Government Publishing Office requests that any reprinted edition clearly be labeled as a copy of the authentic work with a new ISBN.

The information presented in *Welcome to the United States: A Guide for New Immigrants* is considered public information and may be distributed or copied without alteration unless otherwise specified. The citation should be:

U.S. Department of Homeland Security, U.S. Citizenship and Immigration Services, Office of Citizenship, *Welcome to the United States: A Guide for New Immigrants*, Washington, DC, 2015.

U.S. Citizenship and Immigration Services (USCIS) has purchased the right to use many of the images in *Welcome to the United States: A Guide for New Immigrants*. USCIS is licensed to use these images on a non-exclusive and non-transferable basis. All other rights to the images, including without limitation and copyright, are retained by the owner of the images. These images are not in the public domain and may not be used except as they appear as part of this guide.

This guide contains information on a variety of topics that are not within the jurisdiction of U.S. Department of Homeland Security (DHS)/USCIS. If you have a question about a non-DHS/USCIS issue, please refer directly to the responsible agency or organization for the most current information. This information is correct at the time of printing, however, it may change in the future.

# Shaxda Tusmadda


**Ku soo dhawoow Midowga Dowladaha Hagaha Soo galootiga Cusub . . . . . 1**
- Waaxyahay Federaalka iyo Wakaaladdaha . . . . . 2
- Dowlada Mareykanka Maanta . . . . . 3
- Ciidaha Federaalka . . . . . 4
- Xiriirka USCIS. . . . . 5

**Waxyaabaha ku Saabsan Hagahaan . . . . . 7**
- Xagee ka Heleysaa Kaalmo . . . . . 8
- Leynka Furan ee Macluumaadka . . . . . 10

**Xuquuqdaada iyo Mas'uuliyaddaada Deegaanle Joogto ah . . . . . 13**
- Xuquuqdaada iyo Mas'uuliyaddaada . . . . . 14
- Ku sugnaantaada Xaaladaha Degenaantaada Joogtada ah. . . . . 16
- Haddii aad Tahay Degeenle Degenaansho Joogto ah . . . . . 19
- Helitaanka Kaalmo Sharci . . . . . 21
- Dhaxalka Dabci Dambiile ee Deegaanle Joogto ah . . . . . 24

**Helitaanka Degenaanta Maraykanka. . . . . 27**
- Helitaanka Lambarka Shooshalka . . . . . 28
- Hel Goob Aad ku Noolaato . . . . . 30
- Raadi Shaqo . . . . . 35
- Daryeelka Caruurta . . . . . 41
- Gaadiidka . . . . . 43

**Daryeelidda Lacagtaada . . . . . 47**
- Dhaqaale Shaqsiyeedka . . . . . 48
- Bixinta Canshuurta . . . . . 51
- Ilaalinta Lacagtaada iyo Naftaada. . . . . 53

**Fahmidda Waxbarashadda iyo Daryeelka Caafimaad . . . . . 57**
- Waxbarshadda Dalka Maraykan. . . . . 58
- Waxbarshadda sare: Kuliyadaha iyo Jaamacadaha . . . . . 65
- Waxbarshadda Dadka Waaweyn . . . . . 67
- Barashadda Ingiriiska . . . . . 68
- Daryeelka Caafimaadka . . . . . 69
- Mashaariicyadda Kale ee Faa'idooyinka Federaalka . . . . . 72

**Xafiddida Gurigaaga iyo Qoyska . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 75**
Diyaargarowga . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 76
Ogoow . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 78
Masiibooyinka Ficil ka geyso . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 79

**Baro Waxyaalaha ku Saabsan Dowlada Maraykanka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 83**
Anaga dadka: Kaalinta Muwaadinka Midowga Dowladaha Dhexdeeda . . . . . 84
Sideey ku Bilaabatay Midowga Dowladaha . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 85
Abuuridda "Urur Aad Sax u ah" . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 87
Sideey u Shaqeysaa Dowladda Federaalka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 90
Laanta Xeer-dejinta: Golaha . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 91
Qeybta Go'aan Gaarista: Madaxweynaha . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 93
Qeybta Sharciga: Maxkamadda Sare . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 93
Dowladda iyo Ismaamul Goboleedka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 94
Waayo-aragnimadda Midowga Dowladaha . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 95

**Noqoshada Muwaadin Maraykan . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 97**
Maxaad u Noqoneysaa Muwaadin Maraykan? . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 98
Noqosho Dabeecadeed: Noqoshada Muwaadin Maraykan . . . . . . . . . . . . . 100
Waa Kugu Kaligaa . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 107

# Ku-soo-dhawoow Midowga Dowladaha

## *Hagaha Soo galootiga Cusub*

Hambalyo noqotay dagane joogto ah ee Maraykanka ee America! Anigoo ku hadlaya magaca madaxweynaha Maraykanka iyo dadka Ameerikaanka ah, waan idin soo dhoweynaynaa waxaana kuu rajeynayaa guul kasta oo halkan.

Waddanka Maraykanku wuxuu leeyahay taariikh dheer oo soo galootiga ka soo dhammaan qaybaha caalamka soo dhoweynta. Dowlada Maraykanka waxaa qiimo kordhiyey muhaajiriinta, kuwaas oo weli sii wada kobcinta dalkan iyo dhawrista hiddaha iyo dhulkii xoriyada iyo fursadaha.

Sida qof dagane joogto ah ee dowlada Maraykanka, waxaad gaarta go'aan aad ugu yeerto dalkaan dalkaagi. Inta aad ka hawlgaleyso si aad u gaarto hadafkaaga, waqti sii si aad u ogaato dalkaan, taariikhdiisa iyo dadkiisaba. Waxaa hadda labada waa xaq iyo mas'uuliyadi ku saraan qaabeynta mustaqbalka dalka Mareykanka iyo in hubinta sii wadida guushiisa.

Fursado Farxad leh ayaa ku sugaya markaad noloshaada ka bilowdid sidi qof dagane joogto ah dalkaan weyn. Ku soo dhawoow dalka Maraykanka!

Hey'adda Adeegyadda Muwaadinka iyo Socdaalka

# Waaxyahay Federaalka iyo Wakaaladdaha

Haddii aad qabto su'aal aadna ogeyn waaxda kaaga jawaabeyto, wac 1-800-FED-INFO (ama 1-800-333-4636). Haddii aad maqliweysana, wac 1-800-326-2996.

Sido kale waxaad booqan kartaa **www.usa.gov** macluumaad guud oo ku saabsan wakaaladdaha iyo waaxyada federaalka.

**Wasaarada Mareykan ee Waxbarashadda (ED)**

Taleefoon: 1-800-USA-LEARN
Taleefoon: 1-800-872-5327
Haddii uu codka xumaada: 1-800-437-0833
**www.ed.gov**

**Maamulka Maraykanka ee Fursadaha Siman ee Shaqaaleynta (EEOC)**

Taleefoon: 1-800-669-4000
Haddii uu codka xumaada: 1-800-669-6820
**www.eeoc.gov**

**Wasaarda Caafimaadka iyo Adeegyadda Dadka Maraykanka (HHS)**

Taleefoon: 1-877-696-6775
**www.hhs.gov**

**Wasaarada Amniga Gudaha Dalka Mareykanka (DHS)**

Taleefoon: 202-282-8000
**www.dhs.gov**

**Hey'adda Adeegyadda Muwaadinka iyo Socdaalka (USCIS)**

Taleefoon: 1-800-375-5283
Haddii uu codka xumaada: 1-800-767-1833
**www.uscis.gov**

**Hey'adda Canshuurta iyo Illaalinta Xuduudka Maraykan (CBP)**

Taleefoon: 202-354-1000
**www.cbp.gov**

**Socdaalka iyo Xoojinta Anshaxa (ICE)**
**www.ice.gov**

**Waaxda Guriyeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka Maraykanka (HUD)**

Taleefoon: 202-708-1112
Haddii uu codka xumaada: 202-708-1455
**www.hud.gov**

**Waaxda Cadaalada ii sinaanta Mareykanka (DOJ)**

Taleefoon: 202-514-2000
**www.justice.gov**

**Waaxda Maaliyadda**

Adeega Daqliga Gudaha (IRS)
Taleefoon: 1-800-829-1040
Haddii uu codka xumaada: 1-800-829-4059
**www.irs.gov**

**Nidaamka Xulashadda Adeegyadda (SSS)**

Taleefoon: 1-888-655-1825
Taleefoon: 847-688-6888
Haddii uu codka xumaada: 847-688-2567
**www.sss.gov**


**Maamulka Nabadsugida Bulshada (SSA)**

Taleefoon: 1-800-772-1213
Haddii uu codka xumaada: 1-800-325-0778
**www.socialsecurity.gov** ama **www.segurosocial.gov/espanol**

**Wasaarada Arrimaha Dibada (DOS)**

Taleefoon: 202-647-4000
Haddii uu codka xumaada: 1-800-877-8339
**www.state.gov**

# Dowlada Mareykanka Maanta




Maraykanka ayaa sidoo kale waxaa ka mid ah dhulalka ee Guam, American Samoa, Virgin Islands iyo wadamada barawaaqo sooranta ee mareykanka iyo Puerto Rico, taas oo aanay u muuqan khariiradda.

# Ciidaha Federaalka

Xafiisyada federaalka badankooda way xiran yihiin ciidaha. Haddii ay ciid ku soo aado maalinta Sabtida, waxaa loo qoondeeyaa Jimcaha lagu jiro. Haddii ay ciidu ku soo aado Axadda, waxaa loo qoondeeyaa Isniinta xigta. Kuwo badana aan dowli aheyn sido kale waxay shaqaalahooda siiyaan fasax maalmahaan. Dowladda federaalka waxay u qoondeysay ciidaha rasmiga ah ee soo socda.

| | |
|---|---|
| Maalinta Sannadka Cusub | 1da Janaayo |
| Maalinta Dhalashada ee Martin Luther King, Jr. | Isniinta 3aad ee Janaayo |
| Maalinta Madaxweynaha | Isniinta 3aad ee Febraayo |
| Maalinta Xuska ciidanka | Isniinta ugu dambeysa ee Maajo |
| Maalinta Xoriyadda | 4ta Juulaay |
| Maalinta Shaqaalaha | Isniinta 1aad ee Sebteembar |
| Maalinta Columbus | Isniinta 2aad ee Oktoobar |
| Maalinta Halgamayaasha | 11 Nofembar |
| Maalinta Mahad celinta | Khamiista 4aad ee Nofembar |
| Maalinta Kirismaska | 25 Disembar |

# Xiriirka USCIS

Booqo shabakadda USCIS ee **www.uscis.gov** iyo **www.welcometousa.gov**, waa macluumad soo galootiga cusub.

Wac adeega macaamiilka ee 1-800-375-5283 ama 1-800-767-1833 (haddii codka xumaado).

Si aad u hesho foom, booqo shabakadda USCIS ama wac qadka Foomamka ee 1-800-870-3676.



# Waxyaabaha ku Saabsan Hagahaan

Hagahaan wuxuu xanbaarsan yahay macluumaad aasaasi ah ee kaa caawinaayo sidaad u degi laheyd mareykan una heli laheyd adiga iyo qoyskaaga nolol maalmeedka maalin kasta.  Xitaa waxay soo koobeysaa macluumaad ku saabsan xaaladahaaga sharci iyo wakaaladaha iyo ururadda bixiya nuqulladda ama adeegyadda muhiinka ah ee aad u baahan karto.

Maadaama aad tahay qof sharciga deganaanshaha rasmiga ah leh, waa in aad biloowdid barashada waddankan, dadkiisa iyo hababka ay dowladoodu u shaqayso.  Isticmaal hagahaan si aad u hesho waxyaabaha ku saabsan xuquuqdaada iyo masuuliyaddaada soo galooti ahaan iyo si aad u fahanto sida federaalka, dowladda, iyo dowlad deegaanadda u shaqeeyaan. Xitaa waxaad ka baran kartaa waxyaabaha ku saabsan dhacdooyinka muhiimka ah ee u qaabeysan mareykanka, sidoo kale muhiimadda ay leedahay ku luglahaanshaha bulshaddaada iyo tallooyin sidii loo sameyn lahaa arrimahaasi.

Hagahan wuxuu guud marayaa xuquuqaha, mas'uuliyadaha iyo qaynuunada la xiriira sharciga deganaanshaha rasmiga ah. Si aad u hesho faahfaahin gaar ah oo intaa ka badan waa in aad baratаа sharciyada, foomamka ama nidaamyadda qaadashada shahaadada dhalashada iyo Adeegyada Hey'adda Adeegyadda Muwaadinka iyo Socdaalka (USCIS). Waa inaad mar kasta kaashataa macluumaadka ama goraalada dheeraadka su'aalahaaga gaarka ee socdaalka ama dacwooyinka. Macluumaadka intaa ka badan waxaad ka oggaan kartaa Barta-shabakada USCIS **www.uscis.gov**. Waxaad ka heli kartaa foomamka USCIS shabakadda ama adigoo wacaya USCIS Qadka Foomamka ee 1-800-870-3676. Macluumaad dheeri ah, wac Adeegga Macaamiisha ee 1-800-375-5283 ama 1-800-767-1833 (haddii maqalka xumaado).

# Xagee ka Heleysaa Kaalmo

Hagahan ayaa kaa caawinidoona sidaad wax u bilaabeyso, laakiin kama jawaabi karto dhammaan su'aalaha aad ka qabtid nolosha Waddanka Maraykanka. Si aad u heshid macluumaad intaa ka badan, waxaad la xiriiri kartaa gobolka, degmada ama maamulka magaalada si aad u ogaatid adeegyada aad u baahan tahay, ama kala tasho ururada caawiya muhaajiriinta cusub ee waddanka soo dega. Waxaad ka heli kartaa xafiisyadan iyo ururadan isticmaalka macluumaadka bilaashka ah oo hoos ku qoran.

## Maktabada Dadweynaha

Maktabadaha dadweynaha ee Waddanka Maraykanaka waa bilaash u furan qof kasta. Maktabaduhu inta badan waxay ku yaalaan xaafadaha bulshada. Shaqaalaha Maktabada waxay kugu caawin karaan helitanka macluumaadka maado kasta iyo qaadashada aqoonsiga maktabada kaas oo aad alaab ku amaahan kartid, sida buuggag iyo cajaladaha oo bilaash ah. Sidoo kale maktabadaha intoodda badan waxay hayaan wargaysyo aad akhrisan kartid iyo kombiyuutarka aad internetka ka isticmaali kartid. Weydii shaqaalaha maktabada in ay ku tusaan sida loo isticmaalo kombiyuutarka iyo internetka.



Maktabadaha qaar ayaa waxay bixiyaan casharo kumbiyuutar oo lacag la'aan ah, Baris luqadda Ingiriisiga, iyo qorshooyin kale ee caruurta iyo dadka waaweyn. Weydii shaqaalaha maktabadda adeegyadda ay helayaan bulshadaada. Si aad u hesho maktabad kuu dhaw, ka eeg buugga taleefoonadda **www.nces.ed.gov**.

## Buugga Taleefoonnadda

Buugga liiska Telefoonadu wuxuu ka kooban yahay lambarada telefoonada iyo macluumaadka muhiimka ah oo ku saabsan dowladda sare, gobolka iyo adeegyada bulshada. Buugga Telefoonka wuxuu leeyahay macluumaadka xaalada degdegga ah, khariidada magaalada iyo warbixin ku saabsan sida loo helo adeegyada telefoonka. Bogagga cad cad ee taxanaha nambaradda taleefoon ee shaqsiyaadka iyo bogagga jaalaha ee taxanaha nambaradda taleefoon iyo cinwaannadda ee ganacsatada iyo ururadda. Sidoo kale waxaad wici kartaa lambarka 411 si aad u hesho telefoonada nambarda khaaska ah oo aad raadinaysid Maraykanka gudihiisa. Laga yaabee in aad kharsh bixiso marka aad waceyso 411.




## Shabakada Internetka

Internetku wuxuu kugu xiriirin karaa meelo badan oo aad macluumaada ka heli kartid, kuwaas oo ay ka mid yihiin shebekada internetka ee dowladda sare, gobolka iyo hay'adaha dowladda hoose. Internetyada dawlada intooda badan waxa ciwaankoodu ku dhammaadaa ".gov". Haddii uusan guriga kuu oolin kumbiyuutar, waxaad isticmaali kartaa mid ka mid ah kuwa maktabadda dadweynaha. Waxaad internetka ka raadsan kartaa shaqooyin, guri helis, iskuulaadka caruurtu kuu dhigan karaan, ururada bulshadda iyo meelaha ku caawimi kara. Sidoo kale waxaad internetka ka heli kartaa akhbaaraha muhiimka ah, dhacdooyinka, ogaanshaha waxyaabaha ku saabsan nolosha Ameerika, taariikhda Waddanka Maraykanka iyo dowladda ama bulshada. Booqo **www.welcometousa.gov** si aad u heshid dhammaan ilaha dowladu ugu talagashay muhaajiriinta cusub.






Muhaajir ahaan waa in aad ka taxadirtid waxyaabaha dadka khaayimiinta ee samaystay internet kuwa dowlada u eg, si ay kuu khaldaan oo kaaga faa'iideystaan Xusuunoow, shabakadda rasmiga ah ee Hey'adda Adeegyadda Muwaadinka iyo Socdaalka **www.uscis.gov**.

## Bulshada iyo Ururadda ku Salaysan Diimaha ee Caawiya Soo Galootiga

Waxaa jira ururo ku yaal Bulshooyin badan oo siiya muhaajiriinta kaalmooyin bilaash ah ama qiime jaban. Ururadaani waxay kaa caawinayaan barashadda bulshadaada iyo adeegyada aad heli karto soo galooti ahaan. Waxaad ururadan ka raadin kartaa shabekada internetka, ka eegi kartaa buuga talafoobada degmada, weydiin kartaa maktabada dadweynaha iyo hay'ada adeegyada bulshada ee degmada aad ku nooshahay

# Leynka Furan ee Macluumaadka

USCIS waxay leedahay keydka qadka furan ee aad kuu caawini karo. Keydkani wuxuu ku siinayaan macluumaad ku saabsan arrimaha soo-galootiga, waqtiga hawl galka, xaaladda dacwo, kharashka, iyo faa'idooyin kale.

| KEYDKA QADKA FURAN | |
|---|---|
| **Haddii aad dooneyso:** | **Booqo:** |
| Fiiri xaaladda dacwaddaada, eeg waqtiga hawl galka, is diiwaan geli la socodka xaaladda, ama raadi xafiiska kuugu dhaw ee USCIS | **www.uscis.gov** |
| Fiiri kharashka hadda la bixinaayo | **www.uscis.gov/fees** |
| Shaxda ballan MACLUUMAAD-GUDBIN lacag la'aan Ee shaqaalaha USCIS | **http://infopass.uscis.gov** |

## Macluumaad Dheeri ah ee Soo Galootiga Cusub

*Ku soo Dhawoow Dalka Mareykanka: Hagaha soo Galootiga* waxaad ka heli kartaa luqado dheeri ah ee **www.uscis.gov/newimmigrants**.



# Xuquuqdaada iyo Mas'uuliyaddaada Deegaanle Joogto ah

Deegaanle joogto ahaan, waxaa lagaa filaayaa inaad Maraykanka ka dhigato gurigaaga iyo adeecdid sharciyada dalkaan. Noqoshada Deegaanle joogto waxaa sido kale loola jeedaa inaad qabtid xuquuqo iyo mas'uuliyado cusub.

Noqoshada Deegaanle joogto waa mudnaan gaar ah, ma ahan xuquuq. Waxaa jiro xaalado gaar ah uu Dowladda Maraykanka la noqon karaan Heerkaaga Degenaanshaha Joogtada ah. Waa inaad ilaaliso Heerkaaga Degenaanshaha Joogtada ah haddii aad rabtid inaad ka shaqeyso iyo ku noolaato Maraykanka iyo maalin ka noqoto muwaadin.

Qaybtaan, waxaad ka baran doontaa macnaha noqoshada Degaanle joogto ah iyo wixii lagaa rabo inaad sameyso si aad u ilaaliso Heerkaaga Degenaanshaha Joogtada ah.

# Xuquuqdaada iyo Mas'uuliyaddaada

Dhaqankaaga Degaanle joogto ahaan wuxuu saamayn karaa awoodda aad goor dambe ku noqoto muwaadin Maraykan ah. Hab-socodka lagu noqdo Muwaadin Maraykan ah waxaa loogu yeeraa waddaniyeynta ("naturalization").

Degaanle Joogto ahaan, waxaad xaq u leedahay:

- Deganaanta joogtada ah ee meel kasta ka mid ah Maraykanka.
- Ka shaqeynta Maraykanka.
- Ka iibsasho hanti Maraykanka.
- Inaad gasho iskuulka dowladda.
- Inaad gobolkaaga ama deegaankaaga ka codsato ruqsada baabuurka lagu wado.
- Inaad ku biirto laamaha ciidamada qalabka sida qaarkood ee Maraykanka.
- Inaad qaadato Sooshal Sakuuratiga, Dakhliga Taakuleyta Nabadsugida (SSI), iyo manfacyada daryeelka caafimaadka (Medicare), haddii aad u qalantid.
- Inaad codsato dhalashada Maraykanka markaad u qalantid.
- Inaad ninkaaga ama xaaskaaga iyo carruurtaada aan xaasleeyda u codsato fiise si ay kula noolaadaan Maraykanka.
- Inaad ka baxdo ama ku soo noqoto Maraykanka xaalado gaar ah.

Deegaanle joogto ahaan, waa inaad:



- In aad dhawrtid dhammaan sharciyada dowladda sare, gobolka iyo gudahaba.
- Inaad bixisid dakhliga canshuurta federaalka, gobolka iyo degmadaba.
- Inaad iska diiwaangeliso Adeegga Ciidan Qorida (Ciidamadda qalabka sidda ee Maraykanka) haddii aad lab tahay oo ay da'daadu u dhaxeyso 18 ilaa 26 jir. Eeg bogga 18 si aad sharraxaad u hesho.
- In aad ilaalisid ama haysatid sharcigaaga socdaalka.
- In aad markasta qaadato wax caddaynaya Heerkaga Degenaanshaha Joogtada ah.
- Markasta oo aad guurtid internetka ka bedel ciwaankaaga ama qoraal u dir Waaxda USCIS 10 maalmood gudahood. Eeg bogga 19 si aad sharraxaad u hesho.

## Waxaad Qaban Karto

Deegaanle joogto ahaan, waxaad leedahay xuquuqyo iyo xoriyado badan. Sidoo kaleba, waxaa ku saaran mas'uuliyado. Hal mas'uuliyad muhiim ah waxaa weeye in aad ka qaybqaadato bulshaddaada. Waxaa sido kale fiican inaad wax ka barato Dhaqanka, taariikhda iyo dawladda Maraykanka. Waxaad sidan ku baran kartaa markaad qaadatid casharada waxbarashada dadka waawayn iyo akhriso wargeysyada deegaanka.

Dadka haysta Degenaashaha Joogtada ah, waxaa la siiyaa Kaarka Degenaanshaha Joogtada ah oo ah (Foomka I-551) kaas oo caddaynaya sharciga ay Waddanka Maraykanka ku joogaan. Dadka qaarkood waxay ugu yeeraan "Giriin Kaar". Haddii aad u soo hajiireyso Maraykanka iyo ku soo geli doonto sida Deegaanle Joogto ah, waa inaad USCIS siido kharashka muhaajirka. Kharashkaan waxaa lagu baxshaa internetka ayadoo loo maraayo Habka Muhaajiriinta Elektaroonikada USCIS (USCIS ELIS) ka gal **www.uscis.gov/uscis-elis**. Fadlan ogow inaad heli doonin Kaarkaaga Degenaanshaha Joogtada ah ilaa aad USCIS siido kharashka Muhaajirka. Haddii aad noqoto Deegaanle joogto ah iyo heerkaaga muhaajirnimo ku beddeshey Maraykanka gudahiisa, waxaad bixin doontaa oo kaliya Kharashka gudbinta Foomka I-485, Codsiga Degenaashaha Joogtada ah ama Haagajinta Heerkaaga ee ma bixin doontid kharashka muhaajirka USCIS.




Haddii aad tahay Deegaanle joogto ah oo jira ama ka weyn 18 jir, waa inaad qaadatid wax caddaynaya heerka muhaajirnimo. Waa inaad tustid sarkaal laanta socdaalka ama booliiska haddii uu ku weydiiyo. Kaarkaaga degenaanshaha Joogtada ah wuxuu socon doonaa ilaa 10 sanno, iyo waa inaad cusbooneysiido ka hor intuu dhicin ama haddii magacaada beddesho. Si aad u beddesho ama u cusbooneysiido Kaarkaaga degenaanshaha Joogtada ah, waa inaad xareysataa Foomka I-90, Codsiga Bedelidda Kaarka Degenaanshaha Joogtada ah. Waxaa jirta lacag la bixiyo marka la xareynaayo foomka I-90. Waxaad ka heli kartaa foomkan shabaakada internetka **www.uscis.gov** ama waxaad wacdaa khadka foomamka USCIS oo ah 1-800-870-3676. Haddii aad qabtid Degenaansho joogta ah oo shuruud ku xiran (CR) sabab guur ama ganacsi awgeed, waxaa lagu siin doonaa kaar labo sanno ah. Ha isticmaalin Form I-90 si aad u codsato kordhin ama cusbooneysiinta xaaladdaada. Beddelkeedi, waa inaad codsato in shuruudaha ku xiran Xaaladaha muhajirnimo la baxsho ka hor intuu kaarkaaga dhicin. Eeg bogga 19 si aad u hesho sharraxaad ku saabsan ka bixinta shuruudaha ku xidhan xaaladaha degenaanshaha joogtada ah.

Kaarkaaga Degenaanshaha Joogtada ah wuxuu muujinayaa in laguu oggolyahay inaad ku noolaatid kana shaqaysid Maraykanka. Waxaad sido kale isticmaali kartaa Kaarkaaga Degenaanshaha Joogtada ah si aad dib u soo gasho Maraykanka markaad dibedda u safartid. Haddii aad Maraykanka ka maqnaatid muddo ka badan 12 bilood, waxaad u baahan tahay inaad wadatid waraaqo dheeraad ah, si aad dib ugu soo noqotid Maraykanka Deegaanle joogto ahaan. Macluumaad intaa ka badan oo ku saabsan arrimahaan, ka eeg bogga 17.


# Ku sugnaantaada Xaaladaha Degenaantaada Joogtada ah

Markaad hesho heerka degenaanshaha joogtada ah, waxaad sii wadi doontaa inaad ahaato Deegaanle joogto ah, aysan ka eheen haddii uu isbeddelo heerkaaga sida nuu qabo sharciga muhaajirka Maraykanka. Hal si aad ku lumin karti Heerkaaga Degenaanshaha Joogtada ah waa haddii aad dalka ka tegto. Waxaad joojin kartaa Heerkaaga Degenaanshaha Joogtada ah markaad ka baxdo Maraykanka si aad so joogto ah dibedda ku noolaato adigoo *ujeeddadaadu* tahay inaad iska dhaafto Heerkaaga Degenaanshaha Joogtada ah. Dhaqankaaga ayaa muujin doono ujeeddadaada. Waxaa jiro dhowr walxood aad sameyn kartid si aad u yareyso fursadda in Dowladda Maraykanka u ogaado in aad iska dhaaftey heerkaaga:



- Ha ka tegin Maraykanka waqti dheer aysan ka eheen haddii ay jiraan xaalado ku meel gaar ah (tusaale ahaan si aad dugsi u soo dhigato, shaqo waqti gaaban soo qabto, ama soo xannaaneyso xubin ka mid ah qoyskaaga). Haddii aad dalka ka maqan tahay hal sanno ama waqti ka dheer, ma isticmaali kartid Kaarka Degenaanshaha Joogtada ah si aad Maraykanka ku soo gasho.
- Haddii ay jiraan waxyaabo daahinaayo soo laabashadaada, isku diyaari inaad sharaxdo sababta aad u soo daahdey.
- Xareey canshuur celinta federaalka, gobolka iyo tan degmada haddii ay jiraan.
- Iska Diiwaangeli Adeega Ciidan Qorida, haddii aad tahay lab oo da'daadu u dhexeyso 18 ilaa 26.
- Cinwaankaga cusub sii USCIS 10 maalmood kadib markaad guurto.

## Si Fiican u Ilaali Dokumentiyada Muhiimka



Meel ammaan ah ku hayso waraaqahaaga muhiimka ah oo aad waddankaagii kala timid. Tusaale dukumentiyada muhiimka ah waxaa ka mid ah baasaboorka, warqada dhalashada, warqada Nikaaxa, warqada furniinka iyo shahaadada dugsiga sare ama tan jaamacada iyo/ama shahaadooyinka kale oo muujinaya inaad qaadatay tababar ama xirfadooyin gaar ah.

## Ilaasho Xaaladahaaga Muhaajirnimo

Qaar ka mid ah muhaajiriinta waxay u maleeyaan inay dibedda ku noolaan karaan iyo hayn karaan Heerkooda Degenaanshaha Joogtada ah marba haddii ay ku soo laabtaan Maraykanka ugu yaraan hal mar sannadikiiba, laakiin taasi waa qalad. U soo safarka Maraykanka hal mar sannadkiiba waxaa suurtogal ah inuusan ku filneyn haysashada heerkaaga. Deegaanle joogtada ah way u safri karaan dibedda Maraykanka , iyo safarada gaaban iyo kuwa waqti yar saamayn kuma yeelan doonaan xaaladdaha Degenaanshaha Joogtada ah. Haddii aad dalka ka maqnaato waqti dheer ama haddii aad si kale ku muujiso in Maraykanka uusan eheen gurigaaga joogtada ah, Dowladda Maraykanka wuxuu go'aamin karaa inaad iska dhaaftey ama ka tegtay xaaladaha Degenaanshaha Joogtada ah. Kani wuxuu sido kale dhici karaa haddii aad tagto safar waqtigiisa u dhexeeyo lix bilood ilaa hal sanno, iyo jiro wax caddeynaayo in aadan rabin in Maraykanka ka dhigato gurigaaga joogtada ah.

Dokumenti socdaal ayuu kuu noqon karaa Kaarkaaaga Degenaanshaha Joogtada ah markaad u soo laabaneyso dalka Maraykanka haddii aadan dibedda ku maqneen hal sano ama ka badan. Haddii aad u maleyso inaad ka maqnaan doontid Maraykanka in ka badan 12 bilood, waa inaad codsatid oggolaanshaha dib u soo gelida intaadan bixin **ka hor** adigoo xareeynaayo Foomka I-131, Codsiga Warqaddo lagu Safro. Waa in aad bixisid lacag si aad u xareeyso foomka I-131. Waxaad Foomka I-131 ka heli kartaa shabakada internetka **www.uscis.gov** ama waxaad wacdaa Khadka Foomamka USCIS oo ah 1-800-870-3676.

Ogolaashaha dib u soo Gelida waqtigiisu waa ilaa labo sannadood. Waxaad tusi kartaa oggolaashaha dib u soo gelida, intii aad isticmaali lahayd fiise ama Ogolaashaha Dib u Soogelida. Haysashada oggolaashaha dib u soo gelida ma ahan ballan in laguu soo deynayo gudaha Waddanka Maraykanka markaad soo noqotid, laakiin waxay si sahlan u muujineysaa inaad ka soo noqotay dhoof ku meelgaadh ah. Haddii aad rabtid macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan u socdaalka caalamka Deegaanle joogto ahaan, fadlan u booqo **www.uscis.gov**.

Waa inaad sido kale ogaato in - ayadoo la eegin haddii aad iska dhaaftay Heerkaaga Degenaanshaha Joogtada ah iyo inkale - waxaad hoos imaan doontaa baaritaanka laanta socdaalka markaad soo galeyso dalka iyo aad maqneed ugu yaraan 181 malmood, ama xaalado kale ee lagu cayimey sharciga socdaalka.

## Xareynta Celinta Canshuurta

Markaad tahay Deegaanle joogto ah, waa inaad xareysaa canshuur celinta dakhliga oo u sheegtid dakhliga ku soo gala Adeega Daqliga Gudaha (IRS) iyo sidoo kaleba gobolkaaga, magaalada ama waaxda xisaabaatka haddii loo baahdo. Haddii aad xareyn weyso canshuur celinta dakhliga intii aad ku maqan tahay Maraykanka dibadiisa waqti kasta ha ahaatee, ama haddii aad foomkaaga canshuur-celinta ku qorto inaad tahay qof aan "muhaajir ahayn", waxaaa laga yaabaa in Dowladda Maraykanka go'aansato inaad iska dhaaftey Heerkaaga Degenaanshaha Joogtada ah.



## Iska Diiwaangeli Adeegga Ciidan Qorida

Dhammaan dadka lab ah ay da'doodu u dhexeyo 18 ilaa 26 waa inay iska Diiwaangeliyaan Adeegga Ciidan Qorida. Dadka labka ah ee helay Fiisaha Muhaajirka ama beddeley heerkooda markii ay gaareen da'daas si otomatik ah ayaa lagu diiwaan geliyey Adeegga Ciidan Qorida. Haddii uu sidaa yahay, waa inaad boostada ku heshey macluumaad lagugu ogeysiinaayo in lagu diiwangeliyey. Haddii aadan hubin in aad diiwaangashan tahay, la hadal qof ka socda Adeegga Ciidan Qorida oo baari karo diiwaankaaga. Waxaad sido kale Adeegga Ciidan Qorida ka eegi kartaa **www.sss.gov**. Markaad is diiwaangelisid, u sheeg dowladda inaad diyaar u tahay ku biirida Ciidamada Qalabka Sida ee Maraykanka. Dalka Maraykanka iminka ma lahan qabyo militari, laakiin ragga da'dooda u dhexeeyo 18 iyo 26 jir waxaa weli laga rabaa inay isku soo qoraan. Deganayaasha joogtada ah iyo muwaadiniinta Maraykanka qasab kuma ahan in loo qoro ciidamada qalabka sida haddi aanay iyagu doonayn.

Waxaad iska diiwaangelin kartaa xafiiska boostada Maraykanka ama internetka. Si aad isku diiwaangeliso Adeegga Ciidan Qorida internetka u booqo shabakada Nidaamka Xulashadda Adeegyadda **www.sss.gov**. Si ad la xiriirto qof ka socdo Adeegga Ciidan Qoridda, wac 847-688-6888. Wicidda taleefonkan bilaash ma aha.

Macluumaadka intaa ka badan waxaad ka heli kartaa shabakada interneka USCIS **www.uscis.gov**.

## U Dhiib USCIS Ciwaankaaga Cusub

Waa inaad u sheegto USCIS haddii aad cinwaankaaga beddesho. Xareey Foomka AR-11 Bedelka Cinwaanka, 10 maalmood gudaheeda laga bilaabo goorta aad guurtey. Macluumaad khuseeya xareynta beddelka cinwaanka, tag shabakada internetka USCIS **www.uscis.gov/addresschange** ama Adeega Macmiilka ka wac 1-800-375-5283. Waa inaad u sheegto USCIS **mar walba** aad cinwaankaaga beddesho.

Macluumaadka intaa ka badan, ka wac USCIS 1-800-375-5283 ama booqo **www.uscis.gov**.

# Haddii aad Tahay Degeenle Degenaansho Joogto ah

Waxaad Maraykanka ku joogi kartaa sida qof degenaansho joogta ah oo shuruud ku xiran (CR) leh. Waxaad tahay CR haddii aad xaaskaaga oo ah Muwaadin Maraykan ah ama leh Degenaasho Joogta ah is-qabteen in ka yar labo sanno maalinta aad heshey Degenaashaha Joogtada ah. Haddii aad carruur leedahay, iyagana waxaa laga yaabaa inay yihiin CRs. Tilmaamo ku saabsan hab-socodka xareynta carruurta ka eeg Foomka I-751, Codisga Si Loo Baxsho Shuruudaha ku Xiran Degenaanshaha. Sidoo kale muhaajiriinta qaarkood oo maalgeliyayaasha ah waa kuwo leh sharciga CR.



Qofka sharciga CR-ka haystaa wuxuu leeyahay isla xuquuqyo iyo mas'uuliyado la mid ah kuwa haysta degenaashaha Joogtada ah. Qofka haysta degenaansho joogta ah oo shuruud ku xiran waa inuu xareeyo foomka I-751, iyo muhaajirka maalgeliyaha ah waa inuu xareeyo Foomka I-829, Codsiga Ganacsadaha si Loo Baxsho Shuruudaha Ku Xiran, **labo sanno** gudaheeda laga bilaabo maalintii la siiyey sharciga degenaansho joogta ah oo shuruud ku xiran. Taariikhdani waxay badanaa tahay waqtiga uu dhacayo Kaarka degenaanshaha Joogtada ah. Waa inaad foomamkan ku xareyso **muddo** 90 maalmood gudahood ah, ka hor **intii** la gaarin sannad guurada goorta aad heshey sharciga degenaansho joogta ah oo shuruud ku xiran. Haddii aanad taas samayn, waxaad lumin kartaa Heerka Muhaajirnimo.

# Xareynta Foomka I-751 Ninkaaga ama Xaaskaaga

Haddii aad tahay qof haysta sharciga CR iyo hijradaada ku salaysan yahay guursashada Muwaadin Maraykan ah ama qof haysta Degenaashaha Joogtada ah, markaa waa in adiga iyo ninkaaga ama xaaskaaga xareysaan foomka I-751 sidii sharuudaha ku xiran sharcigaaga laga saaro Heerkaaga Degenaanshaha Joogtada ah.

Marmarka qaarkood looma baahna in aad adiga iyo ninkaaga ama xaaskaagu wada buuxsataan foomkan I-751. Haddii aad xaaskii ama ninkii is furteen ama xaaskaagu ama ninkaagu ku dhibaateeyo, foomkaaga I-751 gooni ayaad u buuxin kartaa. Waxaad sido kale kaligaa soo buuxin kartaa Foomka I-751, haddii masaafurinta dalka Maraykanka kugu sababo dhibaato. Haddii aadan xaaskaaga ama ninkaaga wax la dalbanayn, waqti kasta ayaad soo buuxin kartaa foomkan I-751 ka dib markaad noqoto qof haysta sharciga CR.

## Soo Xareynta Foomamka USCIS I-751 iyo I-829

**Waa ayo:** Dadka haysta Degenaansho joogta ah oo shuruud ku xiran (CR)

**Maxaa yeelay:** Degenaansho joogta ah oo shuruud ku xiran wuxuu dhacaa muddo labo sanno **ka dib** taariikhda aad noqotay CR.

**Goorma:** Qofka qabo degenaansho joogta ah oo shuruud ku xiran haddii uu foomamka la buuxinaayo xaaskiisa ama ninkeeda waa inay buuxiyaan Foomka I-751. Muhaajirka maalgeliyaha ah waa in uu buuxiyaa foomka I-829. Labadan foomba waa in la xareeyo 90 maalmood **ka hor** intuusan dhicin heerka degenaanshada joogtada ah oo shuruud ku xiran. Taariikhda uu dhacayo wuxuu ku qoran yahay Kaarkaaga Degenaanshaha Joogtada ah.

**Xaagee foomamka laga heli karaa:** Waxaad ka heli kartaa foomkan shabakada internetka **www.uscis.gov** ama waxaad wacdaa Khadka Foomamka USCIS oo ah 1-800-870-3676.

**Xaagee loo diraa foomamka:** Waxaad u dirtaa xarunta Adeegyada USCIS. Ciwaanka xarumaha adeegyada wuxuu ku qoran yahay qaybta fariimaha ee foomka.

**Waa imisa kharashku:** Waa in aad bixisid kharash si aad u xareyso foomka I-751 ama foomka I-829. Ka hor intii aadan soo dirin foomka, kharashyada gudbinta ugu dambeeyo ka eeg **www.uscis.gov/fees**.

Haddii aad xeraysay foomka I-751 ama foomka I-829 intaanu sharcigu kaa dhicin, USCIS-tu waxay caadi ahaan kuu soo diri doontaa ogeysiis ay kuugu sheegayaan in lagu kordhiyey sharciga heerka CR-ka muddo 12 bilood ah. Inta waqtigaa lagu dhex jiro, USCIS-tu waxay dib u eegi doonaan codsigaaga.

### Haddii aad Dhibbane ka Tahay Xadgudubka Guriga

Haddii aad dhibbane ka tahay xadgudubka guriga waxaad caawiimo ka heli kartaa markaad wacdid Lambarka Xadgudubka Guriga ee Qaranka (National Domestic Violence Hotline) oo lambarkoodu yahay 1-800-799-7233 ama 1-800-787-3224 (dadka maqalku ku adag yahay). Caawimaad ayaa diyaar loola yahay dadka Isbaanishka iyo luqadaha kale ku hadla.

Xeerka Weerarka Dhanka Dumarka ayaa u oggolaanaya in xaaska/xaasluhu iyo carruurta muwaadiniinta Maraykanka iyo kuwa leh degenaashaha joogtada ah in ay keligooda dalbadaan racfaa "self-petition," si ay u noqdaan Degaanle joogto ah. Eeg **www.uscis.gov** ama wac Lambarka Xadgudubka Guriga ee Qaranka haddii aad rabtid warbixinta intaa ka badan.

**TALO**



Nuqul kala har dhammaan foomamka aad u dirtid USCIS-ta ama xafiisyada dowladda ee kale. Nuqulo soo dir, ha soo dirin dokumentiyada rasmiga ah. Marmar foomamka way dhumi karaan, sidaa awgeeda koobi kala harkiisa waxay kaa caawimaysaa ka hortaga dhibaatooyinka.

# Helitaanka Kaalmo Sharci

Haddii aad u baahan tahay caawimaada arrimaha socdaalka, waxaad isticmaali kartaa adeegyada qareenada socdaalka oo ruqsada haysta. Waxaad u tegi kartaa ururka qareenada deegankaaga si ay kuu helaan qareen fiican.

Gobolada qaarkood waxay shahaaddo siiyaan khabiirada yaqaan sharciga socdaalka. Qareenadan waxay ku najaxeen imtixaano si ay u muujiyaan inay aqoon gaar ah u leeyihiin sharciga socdaalka. Goboladan hoos ku qoran waxay dhowaan shabakadooda internetka ku taxeen qareenada khabiirada shahaadada haysta: California, Florida, North Carolina, ama Texas. Ogow: Adiga ayaa mas'uul ka ah go'aamida haddii aad qareen rabtid iyo inkale. USCIS ma taageerto mana ku taliso qareen gaar ah.



Haddii aad u baahan tahay caawimaada sharciga ee arrimaha socdaalka, laakiin aadan haysan lacag kugu filan oo aad qareen ku qabsatid, waxa jira meelo qiime jaban iyo kaalmo bilaash ah. Hal ka mid ah meelahaan ka codso kaalmo:

- **Urur la Yaqaan:** Ururadani waa in ay noqdaan kuwo ay aqoonsadaan Guddiga Rafcaanka Laanta Socdaalka (Board of Immigration Appeals [BIA]). Si loo aqoonsado urur waa in ay leeyihiin aqoon ku filan iyo waaya'aragnimo, oo ay bixiyaan adeegyo lacageed ama ka qaataan muhaajiriinta wax yar. Ururka la aqoonsado wuxuu kharashgareyn karaa ama ogolaan karaa kaliya kharashaayo yar. Si aad u hesho liiska ururyadaan uu BIA-aqoonsadey, u booqo **www.justice.gov/eoir/recognition-accreditation-roster-reports**.
- **Wakiilada ku Xidhan:** Dadkani waa kuwo ku xidhan ururada la aqoonsan yahay-BIA "recognized organizations". Wakiiladan waxay ka qaadan karaan adeegyadooda qiime buuxa ama waxay aqbalaan kharash yar. Si aad u hesho liiska ururyadaan uu BIA-aqoonsadey, u booqo **www.justice.gov/eoir/recognition-accreditation-roster-reports**.
- **Wakiil Khibrad Leh:** Dadkani waa kuwo ku bixin doona adeegyo bilaash ah. Wakiiladaan waa inay yaqaaniin sharciyada socdaalka iyo shuruucda maxkamada. Tusaale wakiilada khibrada leh waxaa ka mid ah ardayda dugsiyadda sharciga dhigata, kuwa ka qalin jebiyey iyo dad leh dabeecad dhaqan wanaagsan oo qof ahaan kula xiriira sida qaraabo (jaar/deris, wadaad, qof kula shaqeeya ama saaxiib).
- **Bixiyaha Adeega Qareenimada Bilaashka ah:** Waaxda Caddaalada waxay qabaan liiska qareenada la aqoonsan yahay ee dadka hab-socod xagga laanta socdaalka ku jiro siiyo adeeg sharciyeed oo bilaash ah. Liiskan waxaa ku jira qareenada iyo ururada laga yaabo in ay wakiil u noqdaan muhaajiriinta maxkada socdaalka horteeda. Qareenada iyo ururyada ku jira liiskaan waxay ogolaadeen inay si bilaash ah muhaajiriinta ku caawiyaan hab-socod xiriir la leh laanta socdaalka oo kaliya. Qaar ayaga ka mid ah waxaa suurtogal ah inaysan kugu caawin karin arrimo kale aan maxkamadda ku xirneyn, sida rafcaanka fiisada, jinsiyadda iwm. Liiska waxaad ka heli kartaa **www.justice.gov/eoir/free-legal-services-providers**.
- **Barnaamijyada Bilaashka ah:** Liiska ururyada bilaash ku hawl galo ama wakiiladooda waxaa caadi ahaan laga heli karaa xafiis deegaan walba ee USCIS.

Macluumaad ka badan ee ku saabsan helidda adeeg qareen, fadlan booqo **www.uscis.gov/legaladvice**.

## Iska Ilaali Muhaajirnimo Khiyaamo ah

Qareeno badan waa kuwo daacad ah oo xirfad qaba, iyo waxay muhaajiriinta siin karaan adeegyo fiican, hase-yeeshe, waxaa jiro dad ka faa'iideysto muhaajiriinta.

Ka hor intaadan ku tashan helista caawimaada arrinmaha socdaalka oo aadan weli lacag bixin, waa inaad sameysid cilmi baaris si aad go'aan sax ah oo ku saabsan noocyada caawimaada sharciyada aad u baahan tahay. Iska ilaali inaad noqoto dhibbane khiyaamada muhaajirnimada.

Waxyaabo muhiim ah oo la baahan yahay inaad xasuusato:

- Ma jiraan ururo ama shakhsi gaar ah oo bixiya caawimada arrimaha socdaalka ee xiriir gaar ah la leh USCIS-da. Su'aalo weydii dadka kuu sameeyo ballan run loo moodo ama sheegta in ay xiriir gaar ah la leeyihiin waaxda socdaalka ee USCIS-da. Ha aamminin dad kuugu ballan qaada natiijo ama jawaab dhaqso ah. Haddi aadan u qalmin manfaca socdaalka, qareen iyo la taliye toona wax kama bedeli karo arrintaas.
- La taliyeyaasha, hay'adaha socdaalka, xafiiska ganacsiga guryaha iyo dadka qaarkood oo loogu yeero "arji-qoraha dadweynaha" waxay bixiyaan adeegyada socdaalka. Hubi in aad su'aalo ka weydiisid khibradooda iyo in ay ku tusaan nuqulka warqada Guddiga Rafcaanka Laanta Socdaalka (BIA) ama shahaadada ururka qareenada. Dadka qaarkood oo yiraahda waxan khibrad u leenahay bixinta adeegyada qareenimada ma ahan. Dadkaan waxay samayn karaan qaladaad oo halis gelin karaa heerkaaga muhaajirnimo iyo dhibaato wayn ayeey ku keeni karaan.

THE WRONG HELP
CAN HURT
BEWARE OF IMMIGRATION SCAMS

- Haddii aad qabsatid la taliye ama qareenka arrimaha socdaalka ka qaado heshiis ama qandaraas qoraal ah. Qandaraasku waa in uu ku qornaadaa luqada Af-ingiriisida iyo luqadaada (haddii aaney Af-ingiriisidu afkaaga hooyo ahayn). Heshiiska qandaraaska waa in ay ku taxan yihiin dhammaan adeegyada laguu qabanaayo iyo inta kharashkoodu yahay. Weydii cida taqaan intaadan heshiiska saxeexin ka hor.
- Isku day in aad iska ilaalisid bixinta lacagta caadiga ah ee adeegyada. Hubi in aad ka qaadatid resiidka lacagta aad bixisay. Hubi inaad haysatid waraaqahaaga asalka ah.
- Weligaa ha saxeexin codsi madhan. Hubi in aad fahantey waxaad saxeexaysid.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ka hortagi kartid inaad noqoto dhibbane khiyaamo muhaajirnimo, u booqo **www.uscis.gov/avoidscams**.

Caawimaad raadso haddii la taliyaha arrimaha socdaalku ku khayaano. Wac xeer-ilaaliyaha gobolkaaga, degmadaada, waaxda arrimaha macmiilka iyo waaxda booliska ee degmada. Waxaad sido kale la xiriiri kartaa Guddiga Ganacsiga Federaalka si aad u warbixiso dadka sharciga socdaalka fasax la'aan ka shaqeeyo adigoo u booqanaayo **www.ftccomplaintassistant.gov**.

# Dhaxalka Dabci Dambiile ee Deegaanle Joogto ah

Waddanka Maraykanku waa bulsho dhawrta sharciyada. Degenayaasha Joogtada ah ee degan Maraykanku waa inay oofiyaan sharciyada dhammaantood. Haddii aad tahay degaanle joogto ah oo Maraykanka ka gashid ama lagugu xukumo denbi, waxay kugu noqon kartaa dhibaato aad u weyn. Waxaa lagaa saari karaa dalka, laguu diidi karaa inaad Maraykanka ku soo laabato haddii aad dalka ka tegto, waxaad lumin kartaa Heerkaaga Degenaanshaha Joogtada ah, iyo, xaalado gaar ah, waxaad lumin kartaa xaqa aad u leedahay noqoshada Muwaadin Maraykan ah.



Tusaale denbiyada wax ka bedeli kara Heerka Degenaanshaha Joogtada ah waxaa ka mid ah:

- Denbi ba'an ("aggravated felony"), waxaana ka mid ah dagaal ama xadgudub denbigiisu aad u daran yahay oo xabsigiisu dhan yahay sannad;
- Dil;
- Kufsad;
- Kufsi lagu sameeyo ilmo;
- Si sharci-darro laga ganacsado muqaadaraad, hubka iyo dadka; iyo
- Gelidda danbiyada ah "denbi saqajaannimo" sida tuugonimada ama khaayinimada; denbiyada jirka wax la gaarsiiyey ama hanjabaad; denbi dhaawac khatar ah la geystey; ama denbi lagu geystey galmo edeb-darro ah.

Sidoo kale waxaa lagu siinayaa ciqaabo aad u daran markaad tahay degaanle joogto ah, haddii aad:

- Adiga iyo qof kale been ku qaadataan manfacyada muhaajiriinta;
- Tiri waxan ahay Muwaadin Maraykan ah haddii aadan ahayn;
- U codeysid doorasho federaal ama doorasho goboleed ama deegaaneed u furan kaliya Muwaadiniin Maraykan;
- Badanaa sarkhaansan tahay ama qof isticmaala muqadaraad mamnuuca ah wakhtiga intiisa badan;
- Leedahay hal xaas ka badan isla markaa wakhti isku mid ah;

- Ku guul daraysatay masruufida qoyskaaga ama ilmahaaga oo lagugu xukumay inaad masaruuto ama taageerada xaaskaaga;
- Lagu xiro xad gudub guri awgeed (xad gudubka guriga waa markii qof dagaal ku soo qado xubin ka mid ah qoyska, waxaana ku jiro jebinta amarka ilaalinta);
- Been sheegto ama isticmaasho dokumenti been-aabuur ah sidii si khiyaano ah waaxyada dowladda ka qaadato manfacyo;
- Ku guuldarraysiga canshuur bixinta marka loo baahan yahay;
- Si ula kac ah la isku soo diiwaangelin Adeegga Ciidan Qoridda haddii aad tahay lab oo da'daadu u dhexayso 18 ilaa 26; iyo
- Haddii qof oo aan aheyn Muwaadin Maraykan ah ama waddani ahayn si sharci darro ku caawiso inuu soo galo Waddanka Maraykanka sido kale haddii qofkaasi yahay qaraabadaada ama aadan lacag ka qaadan.

Haddii aad gashay ama lagugu xukumay denbi, waa inaad la tashatid qareen laanta socdaalka ama ururada bulshada ee bixiya adeegyada sharciga ee muhaajiriinta ka hor intii aadan codsan manfacyada socdaalka. Eeg bogga 21 macluumaadka ku saabsan helidda Taakulo Sharci.



# Helitaanka Degenaanta Maraykanka

Qaybtaan wuxuu ku siin doonaa macluumaad kugu caawiyo la-qabsiga noolosha Maraykanka. Waxaad baran doontaa sida loo dalbado Lambarka Nabadsugida Bulshada, loo helo meel aad ku noolaato, shaqo u raadsato, hesho daryeelka carruurta iyo ku safarto Maraykanka.

# Helitaanka Lambarka Shooshalka

Degaanle joogto ahaan, waxaad xaq u leedahay lambarka lambarka shooshalka, oo ah lambar uu ku siiyey dowladda Maraykanka. Wuxuu lambarkani ka caawimayaa dowladdu in ay ogaato dakhliga dhaqaalaha ku soo gala iyo kaalmooyinka aad qaadan kartid. Lambarka shooshalka isticmaalo ururyada maaliyadeed iyo hay'ado kale, sida dugsiyada, si ay kuu aqoonsadaan. Waxaa kale oo laga yaabaa in lagu weydiiyo lambarka shooshalka (SSN) marka aad guri kiraysanaysid ama iibsanaysid.




Lambarka shooshalka waa barnaamaj dowladda Maraykanka oo bixiyaa manfacyo lagu kaalmeeyo hawlgabayaasha shaqada qaarkood iyo qoysaskooda, qaar naafada shaqaysta ka mid ah iyo qoysaskooda, iyo qoysaska qofkoodu ka dhinto shaqada. Wasaarada Arrimaha Dibada oo u qaabilsan Nabadsugida Bulshada waxaa loo yaqaan Maamulka Nabadsugida Bulshada (Social Security Administartion (SSA).

Si aad u heshid xafiiska Nabadsugida Bulshada ee kuugu dhow waxaad:

- Ka eegi kartaa bogga internetka SSA, **www.socialsecurity.gov**. Luqad Isbanish, u booqo **www.segurosocial.gov/espanol**. Bogga internetka waxaa macluumaad xadeysan lagu heli karaa luqado kale.
- Soo wac 1-800-772-1213 ama 1-800-325-0778 (dadka maqalku ku adag yahay) wax u dhexeeyo 7 subaxnimo iyo 7 habeenimo. Waxaa kuu diyaar ah adeegyada turjumaanada oo bilaash ah.

## Haddii Af Ingiriis ku Hadlin



Xafiiska Nabadsugida Bulshada ayaa kuu qaban kara turjubaan bilaash ah oo kaa caawiya dalbashada lambarka Nabadsugida Bulshada. Markaad waceyso xafiiska Nabadsugida Bulshada, u sheeg qofka telefoonka kaa qabto inaadan ku hadlin af Ingiriis. Waxay kuu heli doonaan turjumaan ku caawiya. Waxay sido kale kuu heli doonaan turjumaan ku caawiya markaad uu booqaneyso xafiiska Nabadsugida Bulshada.

Bogga internetka Maamulka Nabadsugida Bulshada waxa ku jiraa macluumaad aad u caaawimaya dadka ku cusub Maraykanka. Qaybta "Luqado Kale" ee bogga Internetku waxay leedahay macluumaad ku saabsan Nabadsugida Bulshada oo ku qoran dhowr luqadood. Booqo **www.socialsecurity.gov** ama, Afka-isbaanishka eeg **www.segurosocial.gov/espanol.**

Uma **baahnid** in aad buuxisid codsi ama ka doonatid lambarka Nabadsugida Bulshada xafiiska Nabadsugida Bulshada haddii aad **qancin** kartid dhammaan shuruudaha hoos ku qoran:

- Aad weydiisatey lambarka Nabadsugida Bulshada ama kaadhka markii aad dalbatay fiisaha muhaajirka;
- Aad dalbatay fiisaha muhaajirka bishii Oktoobar 2002 ama ka dib; iyo
- Aad ahayd 18 jir ama ka weyneed markii aad timid Waddanka Maraykanka.

Xaaladan, macluumaadkii loo baahnaa in lagugu siiyo lambarka Nabadsugida Bulshada waxaa loo diray Wasaarada Arrimaha Dibada ee Waddanka Maraykanka ee Maamulka Nabadsugida Bulshada. Maamulka Nabadsugida Bulshada ayaa kuu sameyn doono lambarka Nabadsugida Bulshada iyo boosto kuugu soo diri doona kaarka Nabadsugida Bulshada isla ciwaankii uu USCIS kuugu soo direen Kaarka Degenaanshaha Joogtada ah. Waa inaad kaarkaaga Nabadsugida Bulshada ku hesho seddax usbuuc gudaheeda laga bilaabo goorta aad timid Maraykanka. Haddii kaarkaaga Nabadsugida Bulshada ku helin seddax usbuuc gudaheeda laga bilaabo goorta aad timid Maraykanka, si degdeg ah la xiriir SSA. Sidoo kaleba, la xiriir SSA haddii aad beddesho cinwaankaaga boostada markaad timaado **kadib** laakiin **ka hor** intii aadan helin kaarkaaga Nabadsugida Bulshada.

Waa **inaad** lambarka Nabadsugida Bulshada ka doonatid xafiiska Nabadsugida Bulshada haddii aad qancin kartid **dhammaan** shuruudaha hoos ku qoran:

- Aadan weydiisan lambarka Nabadsugida Bulshada ama kaarka markaad dalbatay fiisaha muhaajirka;
- Dalbatay fiisaha muhaajirka ka hor Oktoobar 2002; ama
- Aad ka yareed 18 jir markii aad soo gashay Maraykanka.

Wakiilka Nabadsugida Bulshada ayaa kaa caawin doona dalbashada SSN-ka. Horey u soo qaado dokumentiyadaan markii aad codsiga ka sameyneyso xafiiska Nabadsugida Bulshada:

- Warqada Dhalashada ama dukumentiyo kale sida baasaboor muujinaya taariikhda iyo meesha aad ku dhalatay.
- Dokumenti muujinaayo heerkaaaga Muhaajirnimo, ay ku jirto fasaxaada shaqada dalka Maraykanka. Kani wuxuu ahaan karaa Kaarkaaaga degenaanshaha Joogtada ah ama baasaboorkaaga leh shaabadda laanta socdaalka ama fiisa.

Xafiiska SSA waxay lambarka Nabadsugida Bulshada kugu soo diri doonaan boostada. Waa in aad kaadhka Nabadsugida Bulshada ku heshid muddo labo usbuuc ah ka dib markay SSA heleen dhamaaan waraaqigii lagaaga baahnaa in aad ku dalbatid codsiga. Haddii SSA u baahan yahay inuu xaqiijiyo dokumentiyadaada, waqti ka badan ayuu ku qaadan karaa helidda lambarka Nabadsugidda Bulshada.

# Hel Goob Aad ku Noolaato

Adigaa dooran kara meeshaad rabtid in aad kaga noolaatid Maraykanka. Dad badan waxay la joogaan qaraabadood ama saaxiibadood marka ugu horeysa oo ay waddanka yimaadaan. Kuwo kale waxay u guuraan gurigooda.

Maraykanka, dadka intooda badan waxay dakhliga soo gala boqolkiiba shan iyo labaatan 25 % ku kharash-gareeyaan guryaha. Halkaan waxaa ku qoran qaar ka mid ah xulashoyinka guriyeynta aad tixgelin kartid.

## Guri Kiraysasho/Ijaarasho

Waxaa la kiraysan karaa abaartmantyo iyo guryo. Waxaad kuwan ku heli kartaa dhawr siyaabood:




- Waxaad raadisaa daaro calaamada kiradu ku dhegan tahay guri diyaar ah ama la kiraynayo ("Apartment Available" ama "For Rent").
- Weydii saaxiibo, qaraabo ama dadka aad la shaqeyso haddi ay yaqaanan guri kiro ah.
- Meelaha shacbiga wadaagaan ka raadi meel ku qoran "For Rent", sida alwaaxyada warbixinta ee maktabadda xaafaddaada, dukaamada iyo xarumaha Bulshadda.
- Internetka ka raadi guryaha kirada. Haddii aadan guriga ku haysan kombiyuutar, waxaad tagi kartaa maktabadda dadweynaha ee kuugu dhow.
- Ka raadi buuga talefoonada ee jaalaha ah qaybta ay ku qoran tahay maamulka hantida ("Property Management"). Kuwaani waa shirkado ijaaro abaarmentka iyo guryo. Shirkadahani waxaa laga yaabaa in ay kaa qaadaan kharash yar si ay guri kuu helaan.
- Ka eeg qaybta "Iidehda" ee wargeyska. Hel bogagga liistada guryaha abaarmentka ah oo la kiraynayo guri weyn. Kuwaani waxaa ku qornaan doono macluumaad khuseeya ijaarka abaarment iyo guri.
- Wac hay'adaha guryaha ee kuugu dhow.

### Wac 311 Si Aad u Hesho Macluumaad ku Saabsan Adeegyada Magaalada



Magaaloyin badan, waxaad wici kartaa 311 si aad u hesho adeegyada dowladda aan deg-deg eheen. Tusaale ahaan, waxaad wici kartaa 311 si aad u weydiiso su'aal ku saabsan aruurinta qashinka ama codsiga in la hagaajiyo marshobiyeedigaaga. Waxaa jiro meelo aan laga helin adeegga 311. Wac dowladda hoose magaaladaada si aad u ogaato haddii deegaankaaga laga heli karo adeegga 311.

## Waxaad Filaneysid Markaad Guri Kiraysato

Qaybtaan waxaa ku qoran tallaaboyinka kala duwan loo baahan yahay inaad qaado ka hor intii aadan u guurin gurigaaga cusub. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, u booqo **www.hud.gov** Afka-isbaanishka eeg **www.espanol.hud.gov**.

**Codsiga Kirada:** Dadka guryo kireysta waxaa lagu magacaaba kireyste. Kireyste ahaan, waxaad guriga si toosan ka kireysaneysaa milkiilaha (qofka guriga iska leh) ama maamule guryo (qof mas'uul ka ah guriga). Milkiilaha ama maamulaha guryaha waxay kaa codsan karaan inaad buuxiso foomka codsiga kirada, kaasoo xaqiijinaayo haddii aad qabtid lacag aad kirada ku bixiso.



Codsigaan waxaa laga yaabaa in uu ku weydiiyo lambarka Nabadsugida Bulshada iyo caddayn in aad shaqaysid. Waxaad isticmaali kartaa Kaadhkaaga degenaanshaha Joogtada ah haddii aad weli haysan lambarka Nabad Sugidda bulshada, ama waxaad tusin kartaa warqada mushaarka si aad u caddeyso inaad shaqeyso. Sidoo kale waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo in aad bixisid lacag yar.

Haddii aadan weli shaqo bilaabin, waxaa laga yaabaa in aad u baahatid qof kuu saxeexa qandaraaska ama heshiiska kirada. Qofkan waxaa loogu yeeraa u saxiixe “co-signer”. Haddii aadan bixin karin kirada, u saxiixaha ayaa mas'uul ka ah inuu kirada baxsho.

**Saxiixida Heshiiska Kirada:** Waxaad saxeexaysaa heshiiska kirada “lease” haddii milkiilaha aqbalo in uu kaa kireeyo. Heshiiska kiradu waa waraaqo sharci ah. Markaad heshiiska saxeexdid, waxaad aqbashay in aad kiradaada waqtiga la rabo bixiso joogtidna inta heshiisku ka dhammaanayo. Heshiisyada intooda badan waxaa la saxeexaa muddo sannad ah. Sidoo kale waxaad heli kartaa guryo waqti gaaban la saxeexo, sida hal bil oo kale. Waxaa laga yaabaa in aad lacag dheeraad ah bixisid kuwa waqtigoodu gaaban yahay.

Markaad heshiiska saxiixdid, waxaad ballan qaaday in aad guriga dhaqaalaysid oo nadiif ahaado. Waxaa laga yaabaa in lacag dheeraad ah lagaa qaado haddii aad guri aad kiraysatay jejebisid. Sidoo kale waxa laga yaabaa in heshiiska lagu qoro inta qof ee guriga ku noolaan kara.

**Bixinta Lacagta Deebaajiga ah:** Kireysteyaasha caadi ahaan waxay baxshaan debaaji ka hor intii aysan guriga soo degin. Deebaajiga nabadsugidu wuxuu la mid yahay hal bil kiradeed. Lacagtan deebaajiga ah waa laguu soo celinayaa markaad guurtid haddii aadan halayn guriga iyo nadiif yahay. Haddi sidaas aheen, waxa laga yaabaa in qofka guriga leh qaato lacagta qaar ama kuligeeba oo ku bixiyo sameynta iyo nadiifinta guriga.

Iska hubi guriga ama abaarmentyada ka hor intaadan u soo guurin. U sheeg milkilaha haddii wax dhib ah ka heshid. Weydii qofka guriga leh waxyaabaha loo baahan yahay in aad guriga ka hagaajiso intaadan guurin si hadhow lacagtii deebaajiga kuu soo noqoto.

**Bixinta Kharashka Kale ee Kirooyinka:** Guryaha qaarkood ama abaarmentyada, kirada waxaa ku jira kharashka korontada, gaaska, kululeysiga, biyaha iyo qaadista qashinka. Meelaha qaarkood kharashyadaas kale gooni baa loo bixiyaa. Weydii milkiilaha in ay korontadu ku jirto kirada markaad guri raadinaysid. Haddii korontada, biiyaha iyo gaaska ku jiraan kirada, hubi in macluumaadkaan ku qoran yahay heshiiskaaga kirada ka hor intii aadan saxiixin. Haddi aanay korontadu, biiyaha iyo gaaska ku jirin, waa in aad ogaataa inta qiimaheedu noqon doonto. Qaar ka mid ah qiimaha korontada, biiyaha iyo gaaska wuxuu u badan yahay xilliga xagaaga (marka la isticmaalo qaboojiyaha) ama jiilaalka (marka la isticmaalo kululeysiga). Ceymiska kireystaha ayaa la heli karaa. Ceymiska wuxuu ilaaliyaa hantidaada, wuxuu ku siinayaa badbaadada mas'uuliyad sarnaanta, iyo wuxuu dabooli karaa kharash noolol gaar ah haddii guriga aad kireysatey wax-yello gaaro ama burburo.

**Joojinta Heshiiska kirada:** Joojinta heshiiska kirada waxaa loogu yeedhaa ka takhalusida heshiiska (terminating your lease). Haddii aad u baahan tahay inaad heshiiskaaga kirada joojiso waqti horey, waxa laga yaabaa in aad bilbil u bixisid kirada ilaa heshiisku ka dhaammanayo, sido kale haddii aadan ku noolayn guriga. Haddii aad guriga ka baxdid intaan heshiisku dhammaan waxa laga yaabaa in aad weydid lacagtii deebaajiga ahayd. Ka hor intii aadan guurin, milkiilahaada sii ogeysiis qoraal ah halkaaso ugu sheegeysid inaad diyaar u tahay inaad guriga ka guurto. Milkiilayaasha badankood waxay codsadaan in loo qoro warqad ogeysiis ah, ugu yaraan soddon 30 maalmood ka hor maalinta aad rabtid inaad guriga ka baxdo. Ka hor intii aadan saxiixin heshiiska kirada, hubi inaad garato shuruudaha ku qoran iyo weydii imisa malmood ogeysiis aad u baahan tahay inaad milkiilaha siido ka hor intii aadan guurin.

## Weydinta Milkiilahaada inuu Guriga Hagaajiyo

Milkiilahaada waxaa laga rabaa inuu waxyaabaha ka xun guriga hagaajiyo oo amnigiisa sugo. Haddii aad u baahan tahay in guriga meel laga hagaajiyo:

- Marka ugu horeeysa, la hadal hantiilaha guriga. Asaga ama ayada u sheeg dhibaatada iyo weydii inay hagaajiyaan. Haddii milkilahaada sameyn waayo, markaa warqad u qor milkiilaha iyo ka codso inay dhibaatada sameeyaan. Koobiga warqada meel dhigo.
- Haddii milkiilahaada weli hagaajin waayo, markaa wac Xafiiska Guriyeynta xaafaddaada. Magaalooyinka badankood iyo dowladda hoose waxay leeyihiin dad baadha guryaha dhibaatada leh. Weydii Xafiiska Guriyeynta inay kormeere u soo diraan gurigaaga si uu u baaro. Kormeeraha tusi dhibaatada.
- Haddii milkiilahaada aanu hagaajin wixii xun, waxa laga yaabaa in aad dacweyn kartid.

TALO



Haddii aad guurto waa inaad u sheegto adeegga Boostada Maraykanka si warqadahaada u soo wareejiyaan ciwaanka cusub. Si aad cinwaankaaga ku beddesho internetka, u booqo **www.usps.com/umove** ama tag xafiiska boostada xaafaddaada. Sido kaleba, ha hilmaamin inaad USCIS ka faylgareyso Foomka AR-11 Beddelka Cinwaanka. Eeg bogga 19 si aad sharraxaad u hesho.

## Ogow Xuquuqdaada: Takoorida Xagga Guryaha Lama Oggola

Milkiilayaasha kuuma diidi karaan guriga kirada ah iyagoo sabab uga dhigaya cidaad tahay. Waa wax sharciga ka soo hor jeedda in laguugu diido sababahan:

- jinsiyadda ama midabkaaga;
- Asalkaaga Qaran;
- diintaada;
- lab ahaan ama dhedig ahaan;
- Naafonimo; ama
- Heerka qoyskaaga.

Haddii aad u maleyso in laguu diidey guri sababahaan awgeed, la soo xiriir Waaxda Guriyeynta iyo Horumarka Magaaloyinka Maraykanka (HUD), ka wac 1-800-669-9777 ama 1-800-927-9275 (dadka maqalku ku adag yahay). Waxaad sido kale cabasho u diri kartaa qaybta “Fair Housing” ee bogga internetka **www.hud.gov** Macluumaadka waxaad ku heli kartaa luqado badan.

# Guri Iibsasho

Dad badan lahaansha guri, wuxuu qayb ka yahay nolosha Maraykanka (“American Dream”). Guri lahaanshuhu wuxuu leeyahay faa’iidooyin badan iyo mas’uuliyado badan.

Wakaaladaha iibka guryaha ayaa kaa caawimi kara helitaanka guri aad iibsatid. Weydii saaxiibadaa, qof kula shaqeeya ama wac wakaalada iibka guryaha, ama wac wakaalad iibka guryaha xaafada ku yaalo iyo weydii wakiilka magaciisa. Weydii wakiil kala yaqaan xaafadaha aad rabtid in aad guri ka iibsatid. Waxa jiro habab badan aad ku raadin kartid guri aad iibsato, waxad ka eegi kartaa internetka, ama waxaad guri ka raadin kartaa xayeysika wargeyska ama astaanta “Waa IIB" ka eeg guryaha ku yaalo xaafadda aad jeceshahay.

Dadka intooda badan waxay u baahan yihiin in ay deyn qaataan si ay guri u iibsadaan. Kani waxaa loogu yeeraa sii amaahinta lacagta guryaha. Waxaad deyn ka qaadan kartaa bangiga ama shirkadaha wax laga amaahdo. Deyn qaadashada micneheedu waa lacag amaahasho ribo gaar ah saran tahay oo waqti go'an loogu talagalay.




Ribada aad deynta guri ka bixisid waxaad ka jari kartaa dakhliga canshuurta dowladda.

Sidoo kale waxaad u baahan tahay in aad iibsatid caymiska hantiilaha si uu kaaga caawiyo bixinta kharashka khasaaraha danbe ee guriga. Caymiska wuxuu inta badan bixiyaa khasaaraha ka yimaada cimilada xun, dabka iyo dhaca ama tuugada. Waxaad kaloo u baahan tahay in aad ka bixisid qiimaha gurigaa canshuurta hantida.

Wakiilada ama qareenada wakaalada iibka guryaha ayaa kuu heli kara deynta iyo caymiska guryaha. Asaga ama ayada waxay kugu caawin karaan buuxinta foomamka aad ku iibsato gurigaaga. Wakaalada iibka guryaha kuguma dallaci doono kharash markaad guri iibsaneysid, laakiin waxaa suurtogal ah inaad kharash siin doontid qareenka wakaalada iibka guryaha si uu kugu caawiyo buuxinta foomamka. Sidoo kale waxaad bixin doontaa kharashka deynta iyo foomamka sharciga gobolka. Kharashaadka waxaa loogu yeeraa kharashka xirista ("closing costs"). Wakiilka guryaha ama deyn bixiyahu waa in uu kuu sheego inta uu kharashka ahaan doono ka hor intaadan foomka guri iibsashada saxeexin. Si aad u hesho caawinaad helidda wakaalada iibka guryaha, helidda deyn, iyo xulushada caymiska, u booqo qaybta "Buying a Home" ee bogga internetka **www.hud.gov**.

**TALO**



Iska ilaali khayaanada deynta iyo shirkadaha deynta oo dulsaar badan saarto deynta guriga. Qaar ka mid ah shirkadaha deynta waxay isku deyi karaan inay kaa faa'iideystaan, tusaale ahaan lacag ka badan ayeey kugu soo dallaaci karaan sababtoo ah, dalka ayaad ku cusub tahay. Waxaa jira sharciyo kaa difaacaya khayaanada, kharashyada aan daruuriga ahayn iyo midabtakoorka guryo iibsashada. Si aad u hesho macluumaad ka badan oo ku saabsan talada khayaanada deynta ama ka hortaggiisa, u booqo qaybta "Buying a Home" ee bogga internetka **www.hud.gov**.

## Macluumaad ka Badan ee ku Saabsan Iibsashada ama Kireysiga Guri

U booqo qaybta "Buying a Home" ee bogga internetka Waaxda Guriyeynta iyo Horumarka Magaaloyinka Maraykanka (HUD) **www.hud.gov**. Waxaad sido kale la hadli kartaa Talo-bixiye guriyeyn adigoo ka wacaayo HUD 1-800-569-4287. Macluumaadka waxaa la isku siiyaa Af-ingiriisida iyo Isbaanish.

Si aad u hesho iloyin kale ee wax-tar leh, u booqo, Xarunta Federaalka Maclumaadka Muwaadinka **http://publications.usa.gov**.

# Raadi Shaqo

Waxaa jira siyaabo badan oo Waddanka Maraykanka shaqo looga raadin karo. Si aad fursada shaqo helista u kordhisid, waxaad qaban kartaa:

- Weydii saaxiibadaa, deriska, xubinada qoyska ama kuwa kale ee bulshaddaada in ay jirto shaqo bannaan ama meel fiican oo laga shaqaysan karo.
- Ka raadi shaqo internetka. Haddii aad kombiyuutar ka isticmaashid maktabadda xafadaada, shaqaalaha maktabadda ayaa kaa caawimi kara sida loo isticmaalo.
- Ka eeg meelaha ay ku qoran tahay waxaa la rabaa caawimo "Help Wanted" ee calaamadaha ku dhegan daaqadaha meelaha ganacsiga.
- Waxaad tagtaa xafiisyada ganacsiga ee shaqaalaynta iyo ganacsiyada xaafaddaada iyo weydii haddii ay shaqo qabaan.
- Booqo hay'ada bulshada oo muhaajiriinta ku caawiya shaqo helista ama barnaamijyada tababarka shaqada.
- Eeg alwaaxyada ogeysiiska ee maktabadda dadweynaha, dukaamada iyo xarumaha bulshada oo shaqooyin lagu soo dhejiyo.
- Eeg Adeegyada Waaxda Shaqaalayta ee gobolkaaga ama deegaankaaga.
- Ka eeg wargeyska "Iidhehda" oo ku hoos qoran qaybta shaqaalaynta "Employment".

**TALO**





Intii aad shaqo ka raadineyso, waxaad la kulmi kartaa khayaano shaqo. Inkastoo shirkadaha shaqaaleynta badankooda ay yihiin kuwo sharciyeysan oo caawimaad leh, kuwo kale waxay xayeysiin karaan shaqoyin been ah ama duug ah, ama waxay kugu dallaci karaan kharash badan oo ay rabaan inaad marka horey bixiso, kadibna wax shaqo ah kuma helayaan. Si aad u hesho maclumaad ka badan, u booqo **www.ftc.gov/jobscams**.

## Shaqo Dalbasho

Loo-shaqeeyaha intooda badan waxay ku weydiinayaan in aad buuxisid codsiga shaqada. Foomkan waxaa ku qoran su'aalo ku saabsan ciwaankaaga, waxbarashadaada iyo waayo'aragnimadaadii hore ee shaqooyinka. Sidoo kale waxa laga yaabaa in lagu weydiiyo warbixin ku saabsan dadkii aad hore ula soo shaqaysay. Kuwan waxaa loogu yeeraa weydiinta dadka ku yaqaan (references), iyo waxa laga yaabaa in loo shaqeeyuhu rabo in uu waco oo weydiiyo su'aalo kugu saabsan.

Waxaa laga yaabaa in aad u baahan tahay sameynta warqada xirfada shaqada, waayo'aragnimada iyo waxbarashada (resumé). Resumé-gu waxuu loo-shaqeeyaha u sheegayaa waxyaabaha ku saabsan shaqadaadii hore, tacliintaada, tababar iyo xirfad-shaqo. Markaad shaqo codsaneyso, horey u qaado resume'ga.

Resume' fiican:



- Waxa ku qoran magacaaga, ciwaankaaga iyo telefoonkaaga, iyo;
- Waxaa ku yaal shaqooyinka aad hore u soo qabatay oo ay ku jiraan wakhtiyadii aad ka soo shaqaysay;
- Muuji waxbarashadaadu heerkay gaadhsiisan tahay;
- Wuxuu muujinaayaa xirfadahaaga gaarka kuu ah; iyo
- Si sahlan loo akhriyi karo oo aan khalada lahayn.

Tag meelaha hay'adadha bulshada u adeeggaa yihiin si aad u ogaatid in ay kaa caawimi karaan qorista warqada shaqo xirfadeedka (resumé). Ganacsiyada khaaska ah ayaa iyagana kani kugu caawin karo, laakiin kharash ayey kugu dallaci karaan. Si aad u hesho macluumaad ka badan ku saabsan codsiga shaqo, u booqo **www.careeronestop.org**.

### Waa Maxay Manfacyada?

Marka lagu daro mushaharkaaga, loo-shaqeeyaha qaarkood waxay bixiyaan manfacyada shaqaaleynta oo dheeraad ah. Manfacda waxaa laga yaabaa in ay ku jiraan:

- Daryeelka caafimaadka
- Daryeelka caafimaadka ilkaha
- Daryeelka caafimaadka indhaha
- Caymiska qofka
- Qorshaha hawlgabka

Loo-shaqeeyuhu waxa laga yaabaa in ay bixiyaan qaar ama dhammaan kharashka manfacyadaan. Haddii shaqo lagu siiyo, weydii loo shaqeeyaha manfacyada uu baxsho.

## Su'aalaha lagu Weydiinayo Markaad Shaqo Raadis Tahay

Waxaa laga yaabaa in loo-shaqeeyuhu rabaan in ay kula kulmaan oo kaala hadlaan wax ku saabsan shaqada. Waxay ku weydiin doonaan shaqooyinkaagii hore iyo xirfadahaaga shaqado. Waxaad ku barbaran kartaa ka jawaabida su'aalaha saaxiibadaa ama xubno ka tirsan reerkiina si aad ugu diyaar garowdid. Sidoo kaleba waxaad su'aalo weydiin kartaa loo shaqeeyaha markii uu wareysiga dhamaado. Tani waa fursad fiican si aad u ogaatid waxyaabo ka badan ee ku saabsan shaqada.

Waxaad weydiin kartaa:

- Sidee ku tilmaami laheyd hawlaha aan caadi ahaan qaban doono hal maalin shaqo?
- Sidee lii tababari doonaa ama la i bari doonaa shaqada?
- Halkee ayuu shaqada qayb ka yahay ururka ama shirkadda?
- Sidee ku tilmaami laheyd hawlaha aan caadi ahaan qaban doono hal maalin shaqo?
- Maxay kula tahay arrimaha wanaagsan iyo kuwa caqabad ku leh jaggadan?

Inta kulanka su'aalo weydiinta lagu dhex jiro, loo-shaqeeyuhu wuxuu ku weydiin karaa su'aalo badan. Cidna kuma weydiin karto waxyaabaha ku saabsan jinsiyadaada, midabkaaga, lab ama dhedig hadaa tahay, xaas leedahay, diinta, waddankaad u dhalatay, da'da iyo wixii naafonimo ah oo aad leedahay. Si aad u hesho maclumaad ka badan ee ku saabsan waxyaabahaan dadka takoorid la ilaaliyo, u booqo **www.dol.gov**.

## Ogow Xuquuqdaada: Sharciga Dowladda Federaaliga ah ayaa Difaaca shaqaalaha

Maraykanka wuxuu qabaa dhowr sharciyo oo loo shaqeeyeytaasha u diidaayo inay taakooraan dadka shaqo raadsanaayo iyo loogu talagalay inay kaa difaacaan aarsasho iyo nooc takoorid kale ee laga helo goobta shaqada.

- Xeerka Xuquuqda Shacbiga wuxuu diidaa takoorid ku salaysan jinsi, midab, diin, asalka dalka dhalashada, lab ama dheddig, ama uur.
- Xeerka Takoorida Da'da Shaqaalaha waxuu diida takoorid ku salaysan da'.
- Xeerka Maraykanka Naafada ah iyo Xeerka Dib-u-Nooleynta waxay diidan takoorid ku salaysan.
- Xeerka Mushaarka Siman wuxuu diidaa takoorid ku saleysan lab ama dheddig.
- Xeerka Takoorid La'aanta Hidde-sideyaasha wuxuu diida takoorid ku saleysan macluumaad xagga hidde-sideyaasha.

Si aad u hesho maclumaad ka badan ee ku saabsan waxyaabahaan dadka takoorid la ilaaliyo, u booqo bogga internetka Maamulka Maraykanka ee Fursadaha Siman ee Shaqaaleynta, **www.eeoc.gov** ama wac 1-800-669-4000 iyo 1-800-669-6820 (haddii qofka maqalku ku adag yahay).

Sharciyada kale ee caawimaada anmiga meelaaha shaqada, oo ku siinaya fasax haddii reerkaagu kuu baahdo ama xaalad caafimaad oo degdeg ah timaado iyo siinta lacagta ku-meelgaadhka ee shaqo la'aanta shaqaalaha. U booqo bogga internetka Waaxda Shaqaalaha ee Maraykanka **www.dol.gov** waxaad ka heleysa macluumaadka intaa ka badan oo ku saabsan xuquuqaha shaqaalaha.

Waxaa intaa dheeraad u ah, sharciyada federaalka waxay shaqaalaha ka ilaaliyaan takoorid ku saleysan asalka dalkooda ama heerkooda muwaadanimo. Si aad u ogaato macluumaad ka badan ee ku saabsan ilaalintaan, wac Xafiiska Waaxda Caddaalada iyo Talo-siinta Gaarka ah ee Shaqo-siinta aan Xaq Eheen ee Muhaajiriinta, lambarkuu waa 1-800-255-7688 ama 1-800-237-2515 (haddii qofka maqalku ku adag yahay). Haddii aadan ku hadlin af Ingiriis, waxaa joogo turjubaan ku caawin kara. Si aad u hesho maclumaad ka badan, u booqo **www.justice.gov/crt/osc**.

# Maxaad Filaysaa Markii lagu Shaqaaleeyo

Marka kuugu horeysa oo aad tagtid shaqada cusub, waxaa lagu weydiin doonaa in aad buuxisid foomam. Waxaa kuwaas ka mid ah:

- **Foomka I-9, oo ah foomka Caddaynta u Qalmida Shaqaalaynta (Employment Eligibility Verification Form):** Waa sharci in loo shaqeeyeyaashu laga rabo inay caddeyaan in shaqaalaha cusub oo dhan ay xaq u leeyihiin inay ka shaqeyaan Maraykanka. Maalintaada koowad ee shaqo, waxaad buuxin doontaa Qaybta 1 ee Foomka I-9. Waa in lagu weydiinin inaad buuxiso Qaybta 1 ilaa aad ka ogolaato shaqada. Seddax maalmood shaqo gudaheeda, waa inaad loo shaqeeyahaada siido dokumenti muujinaayo aqoonsigaaga iyo fasaxa inaad shaqeyn kartid. Adaa dooran kara nooca waraaqaha lagaa rabo oo caddaynaya in aad ka shaqayn kartid Maraykanka, mar hadday yihiin kuwa ku liisgaraysan foomka I-9. Loo shaqeeyahaada ayaa ku siin doono liiska dokumentiyada la ogol yahay.

Waraaqaha la aqbali karo waxaa ka mid ah, Kaarkaada Degenaanshaha Joogtada ah ama kaadhka lambarka Nabadsugida Bulshada oo aanay ku qornayn ma shaqayn kartid iyo ruqsada baaburka lagu wado oo sameeyay gobolka. Macluumaad ka badan, u booqo I-9 Central ka eeg bogga internetka **www.uscis.gov/I-9Central**.

- **Foomka W-4, Gunnada ka Jarista Shaqaalaha:** Loo shaqeeyahaagu waa inuu ka jaro jeegaaga shaqada lacagta canshuurta guud oo u diro dowladda. Kan waxaa loogu yeedhaa canshuur ka haynta "withholding tax. Foom W-4 wuxuu loo-shaqeeyahaada u sheegayaa inay canshuur ka jaraan mushaarkaaga iyo wuxuu kugu caawinayaa ogaanshada caddadka saxda ah ee loo baahan yahay in la jaro sidii biilkaaga canshuurta hal mar loo wada bixinin sanadka dhamaadkiisa.
- **Waxaa Laga:** Yaabaa in aad buuxisid foomka canshuur ka haynta ee gobolka aad ku nooshahay iyo foomam kale oo ku saabsan manfacyada aad heli kartid.

Waxaa laga yaabaa in jeegaaga shaqada lagu siiyo usbuuciba mar, labadii usbuucba mar ama bishiiba hal mar. Jeega shaqadu wuxuu muujin doonaa inta ay tahay canshuurta dowladda federaaliga iyo gobolka, tan Nabadsugida Bulshada iyo manfacyada shaqaalaha ee lagaa jaray. Loo-shaqeeyayaasha qaarkood waxay mushaaradaada toos ugu diri doonaan bangigaaga, kan waxaa loogu yeeraa bangi u dirista toosan.

## Xaqiijinta U Qalmida Shaqaalaynta

Ku Cadeyn-Danabeedka waa hab internetka ku shaqeeyo oo loo-shaqeeyayaasha isticmaalaan si ay is-barbardhigaan macluumaadka ku qoraan Foomka I-9 ee shaqaalaha, Caddaynta u Qalmida Shaqaalaynta, ee USCIS iyo diiwaanada Maamulka Nabad Sugidda Bulshada (SSA) si loo xaqiijiyo in shaqaale xaq u leeyahay inuu ka shaqeeyo Maraykanka. Qaar ka mid ah loo-shaqeeyayaasha waa inay ka qayb qaataan Ku Cadeyn-Danabeedka ; loo shaqeeyayaal iskooda ayeey uga qayb-qaataan. Si aad u ogaato wax ka badan ee ku saabsan Ku Cadeyn-Danabeedka , u booqo **www.uscis.gov/e-verify**.

## Kaligaa Xaqiiji U Qalmida Shaqaalaynta

Habka Is-baar (Self Check) waa barnaamaj bilaash ah ee internet oo aad isticmaali kartid si aad iskaa u baarto haddii aad xaq u leedahay inaad shaqeyso haddii aad joogto Maraykanka iyo ka wayn tahay 16 jir. Markaad qorto macluumaaka lagaa codsadey, Self Check wuxuu macluumaadkaas la barbardhigi doonaa diiwaanada kala duwan ee dowladda si ay u ogaadaan u qalmidaada ka shaqeynta Maraykanka. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, u booqo **www.uscis.gov/selfcheck** or, for Spanish, **www.uscis.gov/selfcheck/Espanol**.

## Af-ingiriisi ku Hadalka Shaqada

Haddii aadan ku hadlin Af-ingiriisi, isku day inaad dhakhso u baratid haddii ay suurtogal tahay. Waxaad heli kartaa casharo Af-ingiriisi lacag la'aan ah ama lacag yar laga baxsho oo laga qaato dugsiyada dadweynaha ama kulliyada bulshada. Barashada Af Ingiriisidu waxay kaa caawimaysaa xagga shaqada, bulshada iyo nolol maalmeedkaaga. Eeg bogga 68 macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan barashada Af-ingiriisiga.



Haddii loo-shaqeeyahaada **sheego** in shaqada lagaa rabo inaad ku hadasho af Ingiriis, markaa asaga ama ayada waa inay muujiyaan in ku hadalka af Ingiriiska looga baahan yahay sameysiga shaqadaada. Loo-shaqeeyahaada waa inuu sido kale kuu sheego in af Ingiriis lagaa rabo ka hor intuu **shaqada** ku siinin. Haddii loo-shaqeeyahaada caddeyn waayo in ku hadalka af Ingiriisiga looga baahan yahay shaqadaada, markaa asaga ama ayada waxay jebinayaan sharciyada federaalka. Haddii aad u baahan tahay caawinaad ama macluumaad ka badan, waxaad la xiriiri kartaa Maamulka Maraykanka ee Fursadaha Siman ee Shaqaaleynta (EEOC). Wac 1-800-669-4000 ama 1-800-669-6820 (dadka maqalku ku adag yahay) ama u booqo **www.eeoc.gov**.

## Baaritaanada Daroogada iyo Aasaaska

Qaar ka mid ah shaqoyinka, waxaa loo baahan yahay in baaritaan lagaa qaado si loo hubiyo inaadan daroogo isticmaalin. Qaar ka mid ah shaqoyinka, waxaa loo baahan yahay in la baaro aasaaskaaga, kaasoo ah baaritaanka waxyaabaha aad horey u soo qabatey iyo xaalada aad iminka ku jirtid.

### Ilaalinta Federaalka ee Shaqaaleyaasha Muhaajirka ah

Muhaajiriin badan (ay ku jiraan deganayaasha joogtada ah) iyo dhammaan muwaadiniinta Maraykanka waxaa laga ilaaliyaa takoorida goobta shaqada. Sharciga federaaliga wuxuu shegayaa in loo shaqeeyayaasha ku takoori karin heerkaaga muhaajirnimo. Loo shaqeeyeyaasha ma:

- Diidi karaan inay ku shaqeysiiyaan ama ku ruqseeyaan heerkaaga muhaajirnimo awgeed ama haddii aadan eheen muwaadin Maraykan ah.
- Ku weydiin karaan inaad tusiso Kaadhka degenaanshaha Joogtada ah ama diidan dokumentiyadaada fasaxa shaqada.
- Shaqo siin karaan shaqaale aan dokumenti sharci qabin.
- Kugu takoori karaan asalka dalkaaga ama qaran.
- Ka aarsan karaan shaqaale walba oo ka dacwoodo dhaqan sida kor ku qoran.

Si aad u ogaato macluumaad ka badan ee ku saabsan xuquuqdaada ama faylgareynta cabasho, wac Xafiiska Waaxda Caddaalada iyo Talo-siinta Gaarka ah ee Shaqo-siinta aan Xaq Eheen ee Muhaajiriinta, lambarkuu waa 1-800-255-7688 ama 1-800-237-2515 (haddii qofka maqalku ku adag yahay). Haddii aadan ku hadlin af Ingiriis, waxaa joogo turjubaan ku caawin kara. Macluumaadka intaa ka badan: **www.justice.gov/crt/osc**.

# Daryeelka Caruurta

Ha kaga tegin carruurta guriga keligood. Haddii aad shaqaysid oo carruurtaadu da'aada iskuulka ka yar yihiin, waxaa laga yaabaa in aad u baahan tahay in aad heshid qof ilmaha kuu haya intaad shaqada ku maqan tahay. Marmar carruurta dugsiga tego waxay u baahan yihiin qof guriga ku ilaaliyo. Haddii adiga ama qof kale oo qoyskaaga ka tirsan carruurta ilaalin karin, waxaad u baahan tahay in aad heshid qof iyaga daryeela ama haya. Ama waxa jiri karo cawaaqib sharci oo culus. Si aad u hesho macluumaad ka badan ee ku saabsan sharciyada iyo xeer-deganaha gobolkaaga, la xiriir ha'ayadda ilaalinta cunugga ee xaafaddaada.

## Helitaanka Daryeelka Carruurta



Waa muhiim go'aan ka gaadhida doorashada qofka carruurtaada haynaya. Intaad tashanaysid ka feker waxyaabaha ku saabsan tayada daryeelka iyo qiimaha xannaanada. Isku day in aad heshid qofka ilmaha kuu haynayaa oo degan yahay meel gurigaaga ama shaqadaada u dhow.

Waxaa jira meelo badan oo aad weydiin kartid meelaha fiican oo laga helo karo adeegaha daryeelka carruurta. Weydii waalidiinta kale, saaxiibadaa ama dadka kula shaqeeya oo caruurtaada danaynaya. Gobolada qaarkood waxay leeyihiin isu dirka hay'adaha daryeelka carruurta oo ku siin kara liiska barnaamijyada rugta daryeelka ilmaha oo gobolka ruqsad ka haysta. Ruqsad qaadashada daryeelka ilmaha waxaa lagu xiraa in ay oofiyaan shuruudaha looga baahan yahay oo lagu ilaalinayo ilmaahaga. Waxaad sidoo kale waci kartaa xafiiska iskuulka degmadaada si aad u ogaatid meelaha kale ee carruurta xaafaddaada lagu hayo.

**TALO**



Haddii aad rabtid in lagugu caawiyo helidda meel carruurta lagu daryeelo, u booqo **www.usa.gov/Topics/Parents-Care.shtml**.

## Noocyada Daryeelka Carruurta

Waxaad haysataa dhawr fursadood oo markaad xulaneyso daryeelka carruurta.

- Qof baa guriga kuugu imaanaya oo carruurta kuu haynaya ama kuu ilaalinaya. Adeega noocan ahi wuxuu noqon karaa qaali, maxaa yeelay ilmahaagu wuxuu helayaa daryeel dheeraad oo shakhsiyadeed. Tayada xannaanadu waxay ku xiran tahay qofka aad shaqaalaysid.
- Cunuggaaga iyo carruur kale waxaa lagu xannaaneynaaya guri kale. Xulushadaan wuxuu ka raqiisnaan karaa noocyo kale ee daryeelka carruurta. Tayada xannaanada wuxuu ku xiran yahay dadka cunuggaaga daryeela iyo tirada carruurta ay ku xannaaneeyaan gurigooda.
- Xarumaha daryeelka carruurta ee ku yaalo dugsiyada, ururyada diinta, iyo meelo kale. Barnaamajyadaan caadi ahaan waxay qabaan dhowr xannaaneeye oo daryeelo carruur badan. Xarumaha daryeelka carruurta waa inay qanciyaan heerarka gobolka, shaqaalaha waxaa badanaa laga baahan yahay inay lahadaan tababar iyo waayo-aragnimo gaar ah.
- Dowladda Sare waxay bixisaa maaliyad ay ugu talagashay qoysaska saboolka ah Xannaanda Biloowga hore ama Xannaanda Biloowga “Early Head Start” iyo “Head Start”. Barnaamajyadan waxay bixiyaan adeegyada xannaanada iyo waxbarashada ee caruurta si ay ugu diyaargaroobaan dugsiga. Si aad u ogaato wax intaa ka badan ee ku saabsan barnaamajyadan, wac Wasaarda Caafimaadka iyo Adeegyadda Dadka Maraykanka, ka wac 1-866-763-6481 ama u booqo **http://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/hslc**.

Qaar ka mid ah goobaha laga baxsho daryeelka carruurta waxay hayn doonaan carruurta maalin dhan ama qayb ka mid ah maalinta, waxay ku xiran tahay baahida waalidka. Sidoo kale waxay ku xidhan tahya qiimaha lacagta ee ilmaha lagu haynayo. Eeg haddii aad u qalantid kaalmada dowladda federaalka ama gobolka ee daryeelka carruurta. Gobolo badan ayaa bixiya kaalmo maaliyadeed oo loogu talagalay waalidiinta dhaqaalahoodu yar yahay oo shaqeeya ama tababar shaqo ku jira ama barnaamij waxbarasho. Si aad u hesho macluumaad ka badan ee ku saabsan kaalmada dowladda federaalka ama gobolka ee daryeelka carruurta, u booqo qaybta “Education and Child Care” ee **www.welcometousa.gov**.

# Sidee ku Ogaan Karta in Bixiyaha Daryeelka Carruurta Fiican Yahay?

Ka feker su’aalahan aasaasiga ah oo aad weydiin leheed markaad u booqatid barnaamajyada daryeelka carruurta.

- Carruurtu ma faraxsan yihiin markay shaqaalaha la joogaan?
- Ma la hayaa alaabta carruurtu ku ciyaarto oo ku habboon da’dooda?
- Carruurtu ma sameynayeen wax-qabad habboon?
- Xannaaneeyuhu ma la hadlay ilmahaaga intii aad meesha joogtey?
- Meesha nadiif ma tahay mase habeysan tahay?
- Ma jira manhaj ama jadwal carruurtu leedahay?

Hubi inaad weydiisid waxay yihiin si aad ugala hadashid waalidiinta kale waxyaabaha ku saabsan barnaamajka.



**TALO**

Hubi bixiyaha daryeelka ilmaha iyo barnaamijka aad isticmaalaysid in uu ruqsad ama sharci leeyahay. Ruqsad-haysashada micneheedu waa in barnaamijku ku najaxo badbaadada ugu yar ama qawaaniinta xannaanada ee gobolku dejiyey. Barnaamajyada "Accredited" micneedu waa in barnaamijku la yimaado qawaaniin heerkoodu ka sarreeyo kuwa laaysanka ama sharciga haysta.

# Gaadiidka




Waxaa jira dhawr siyaabood oo aad Waddanka Maraykanka ugu kala safri kartid. Magaaloyin badan waxay qabaan noocyo badan ee gaadiid dadweyne, sida bas, tariin, ama tareenada waddada ku socdo. Qof walba ayaa gaadiidka dadweynaha ku raaci karo kharash yar. Meelaha qaarkood waxaad iibsan kartaa kaadh dhawr jeer aad ku isticmaali kartid baska iyo tareenka. Sidoo kale waxaad safar walba ku bixin kartaa si gooni ah. Taksiyada waa baabuuro darawal wado oo kharash kugu geynaya meeshii aad rabtid. Taksigu waa ka qaalisan yahay gaadiidka kale ee dadweynaha.

## Qaadashada Ruqsada Baabuurka lagu Wado

Waa sharci darro in aad ruqsad la'aan ku wadid baabuurka. Waa in aad qaadatid ruqsada baabuurka lagu wado haddii aad rabtid in aad baabuur wado. Waxaad ruqsada baabuurka ka qaadan kartaa gobolka aad degan tahay.

Ka hubso xafiiska bixiya ruqsada baabuurka sida loo qaato ruqsada baabuurka. Gobol kasta xafiiskiisu wuxuu leeyahay magac u gooni ah. Magacyada guud oo la yaqaano waxaa ka mid ah Waaxda Baabuurta, Waaxda Gaadiidka, Maamulka Qaybta Baabuurta, ama Waaxda Amniga Dadweynaha. Xafiisyadan waxaad ka heli kartaa buugga telefoonka ama macluumaad dheeraad ah ka eeg **www.usa.gov/Topics/Motor_Vehicles.shtml**.

Deganaadayaasha rasmiga ah qaarkood waxay hore uga qaateen ruqsada baabuurka lagu wado waddamo kale. Waxaa laga yaabaa inaad ruqsadaadii hore ka bedelan kartid gobolka aad ku nooshahay. Ka hubso xafiiska gobolka haddii aad sidan sameyn kartid.

## Miyaan Iibsadaa Baabuur?



Way kuu fiican tahay in aad baabuur leedahay si aad meelaha aad rabtid u tagto. Waddanka Maraykanka, waa in aad sidoo kale bixisid caymiska, diiwaangelinta iyo taargada baabuurkaaga. Magaalooyinka qaarkood oo baabuurtu ku badan yahay waa dhib gaari ku wadistu. Ka feker dhammaan kharash iyo faa'iidooyinka ka hor intaadan go'aansan baabuur iibsashada. Si aad u hesho maclumaad ka badan ee ku saabsan iibsashada baabuur, u booqo qaybta "Safar iyo Madadaalada" ee **www.usa.gov**.

## 10 Taloyin ku Saabsan Habka Maraykanka Baabuur si Ammaan ah Loogu Wado

1. Ku wad baabuurka dariiqa dhinaca midigta.
2. Markasta waa inaad haysataa ruqsada baabuur wadida iyo warqada caymiska.
3. Mar kastaba waa in aad suunka xirataa.
4. Markastaba carruurtu waa inay suunka xidhnaadaan.
5. Isticmaal baabuurka fareejadiisa markaad midig ama bidix u leexaneysid.
6. U hogaansanoow sharciyada dariiqa iyo calaamadaha.
7. U leexo dhinaca midigta markaad aragtid baabuurta gurmadka sida dabdamiska, booliska iyo ambalaaska oo u baahan in ay ku dhaafaan.
8. Ha dhaafin baska qaada caruurta iskuulka markii nalkooda cas si biligbilig u shidan yahay.
9. Ha wadin baabuurka haddii aad khamri cabtey ama daroogo isticmaashay.
10. Si tartiib ah iyo taxadar ah u wad baabuurka markaad aragto ceeryaamo, roob iyo baraf.

**TALO**




Ruqsada baabuurka lagu wado waxaa aqoonsi ahaan laga isticmaalaa Maraykanka. Waa fikrad fiican inaad mid dalbato sido kale haddii aadan si joogto ah baabuur u wadin ama baabuur qabin.

Haddii aadan aqoon sida baabuurka loo wado waxaad qaadan kartaa casharo ku saabsan sida baabuurka loo wado. Iskuulo badan iyo degmooyin badan ayaa laga bixiyaa casharada ku saabsan sida loo wado baabuurka. Sidoo kale waxaad ka eegi "Kartaa sharraxaada" ku qoran buuga talefoonada ee jaalaha ah.

**TALO**



Dalka Maraykanka caadi kama ahan in la qaado dadka waddada dhinaceeda lugaynaya. Meelo badan waa sharci darro arrintaasi. Nabad-gelyo darteed, adigu gacanta ha u taagin cidna hana qaadin qof dariiqa taagan.


BANK
Citizens

# Daryeelidda Lacagtaada

Daryeelida lacagtaada wuxuu raad wayn ku lahaan karaa mustaqbalkaaga dalka Maraykanka. Qaybtaan wuxuu ka hadlaa maaliyadda shakhsiyeed, bixinta canshuurta, iyo habab aad u ilaalin kartid naftaada iyo lacagtaada.

# Dhaqaale Shaqsiyeedka

## Sameysashada Akoon Bangi

Dalka Maraykanka waxaa ka jiro labo hay'ado maaliyadeed ee bixin karo akoon maaliyadeed shakhsiyeed waxayna kala yihiin bangiyada iyo ururyada ama iskaashatooyinka daynta.

Akoontiga bangigu waa meel amnigeedu fiican yahay oo aad lacagtaada dhigan kartid. Bangigu wuxuu leeyahay akoonto kala duwan. Akownti jeeg leh iyo mid keyd ah ayaa ah labada ugu sawaxan. Waxaad furan kartaa akoonto aad leedahay ama mid aad la furatid xaaskaaga/ninkaaga ama qof kale. Waxa laga yaabaa in bangiga kugu dallaco kharash qaar ka mid ah adeegyada uu kuu qabto.

Ururyada amaahda baxsha ayaa ah meel kale aad lacagtaada si ammaan ah ku keydin kartid. Loo shaqeeyahaada ayaa lahaan karo urur amaah aad ku biiri kartid, ama adiga ayaa mid ku biiri karo, taaso ku xiran meesha aad degan tahay. Ururyada amaahda waxay bixiyaan adeegyada bangiga kuwo la mid ah, laakiin qaarkood waxay bixiyaan adeegyo dheeraad ah. Isu eeg adeegyadooda, kharashkooda, saacada ay furan yihiin iyo meesha ay ku yaalaan intaadan furan akoonto, si aad u doorato mid ku habboon waxyaabaha aad u baahan tahay.

Markaad akoon bangi furato, waxaa lagu weydiin doona in aad caddaysid aqoonsigaaga. Waxaad isticmaali kartaa Kaarka Degenaanshaha Joogtada ah ama ruqsada baaburka lagu wado. Sidoo kale waxaad u baahan tahay lacag bangigu akoonkaaga kuugu furo—oo la yiraahdo dhigis—taas oo akoonkaagaada lagu shubi doono. Markaad lacag ka bixineyso akoontiga, macaamiilo ganacsigaan waxaa lagu magacaaba lacag-baxsasho. Waxaad lacag kula bixi kartaa jeeg aad qortid, Mishiinka lLcagta lagala Baxo (ATM) ama foom bangiga lacagta lagala baxo.

**TALO**



Waxaa jiro dukaamo badan oo baxsho adeegyada jeeg sarifida (check-cashing) iyo lacag u dirista dibadda, laakiin waxyaabahani waa lacag. Eeg haddii bangigaagu ama ururkaaga amaahda leeyahay adeegyadan oo ka qiime jaban.

### Ku Haynta Lacagtaada Si Ammaan ah

Ammaan ma ahan inaad lacag badan jeebka ku sidato ama ku dhaafto guriga, waa la xadi karaa ama waa la lumin karaa. Haddii lacagta ku shubato bangi ama urur amaah ee xubin ka ah Shirkadda Caymiska Keydka Federaalka (Federal Deposit Insurance Corporation (FDIC)) ama uu caymiyeey Maamulka Midowga Amaahda Qaranka (National Credit Union Administration (FDIC), markaa lacagtaada wuxuu badbaado yahay ilaa $250,000. Markaad xulaneyso hay'ad maaliyadeed, hubi inuu xubin ka yahay FDIC ama inuu caymiyey NCUA. macluumaad dheeraad ah, u booqo **www.fdic.gov** or **www.ncua.gov**.

## Isticmaalka Akoonkaaga

Waxaad bangigaaga lacag kagala bixi kartaa jeeg ama kaadhka mishiinka lacagta lagala baxo (Kaadhka ATM) ama kaadhka bangiga. Hubi in adiga ama qofka aad akoonkaaga wadaagtaan (haddii mid qabtid) oo kaliya wax kala bixi kartid akoontiga.

**Jeegaga Shakhsiga:** Waxa lagu siin doonaa jeegaga shakhsiga markaad furatid akoonkaaga lacagta lagala baxo. Jeegagan waa foomam aad buuxinaysid markaad wax ku bixinaysid. Jeegagu wuxuu u sheegayaa bangigaagu in uu lacagtaa siiyo qofka ama ganacsiga aad jeega u qortay. Jeegagaan ku hay meel ammaan ah iyo weydii bangigaaga sida aad kuwo cusub u codsan kartid markii ay kaa dhamaadaan.

**Kaaradka ATM:** Waxaad bangigaaga weydiin kartaa inay ku siyaan kaadhka ATM. Waa kaadh caag ah bangigaaga akoontadiisa ku xidhan. Kaadhkan waxaad u isticmaashaa markaad lacag la baxaysid ama lacag ku shubaysid akoonkaaga ama mishiinka lacagta ee ATM. Inta badan ma bixinaysid kharash markaa ATM-ka bangigaaga isticmaalaysid. Waxaa badanaa kharash bixin doontaa markii aad isticmaaleyso ATM-ka bangi kale.

Shaqaalaha bangiga ayaa ku tusi doona sida loo isticmaalo kaarka ATM-ka oo ku siin doona lambar gaar ah oo la yiraahdo lambarka aqoonsiga shakhsiga (personal identification number [PIN]), kaasoo u isticmaali doonto ATM. Iska ilaali markaad isticmaalaysid ATMs-ka. Weligaa qofna ha siinin PIN'kaaga ama kaadhkaaga ATM sababtoo ah asaga ama ayada waxay lacag ka baxsan karaan akoonkaaga.

**Kaararka Bangiga:** Waxaa laga yaabaa in bangigu ku siiyo kaarka bangiga oo u isticmaali kartid akoonkaaga lacagta lagala baxo. Marmarka qaarkood kaadh ATM-ga ayaa loo isticmaali karaa sida kaarka bangiga. Weligaa qofna ha siinin PIN'kaaga ama kaarkaaga bangiga sababtoo ah asaga ama ayada waxay lacag ka baxsan karaan akoonkaaga. Waxaad kaarka bangiga ku isticmaali kartaa dukaan si aad wax ku iibsato, dukaankana lacagtana si otomaatik ah ayuu ka baxsan doonaa bangigaaga.

**Jeegaga Khasnajiga iyo Bangiga:** Kuwaan waa jeegag uu bangiga soo saaro markaad ka codsato. Markaad bangiga lacag siisid ayey jeeg ugu bedelaan lacag qofka ama ganacsiga aad rabtid inaad lacag siido. Bangiyada kharash ayeey kugu dallaci karaan jeegaggaan. Weydii bangigaaga xulashoyinka kale aad isticmaali kartid.

**TALO**



Si taxadar u maamul akoontigaaga si lagugu dallacin kharashyada deynta furan. Deynta furan wuxuu dhacaa markii aadan akoontigaaga ku haysan lacag ku filan aad ku daboosho ama ku sameyso lacag bixin. Weydii bangigaaga hababka aad isticmaali kartid iyo kharashyada.

## Kaararka Amaahda

Kaarka Amaahda—waxaa sidoo kale loogu yeeraa kaarkii wax ku qaadashada ("charge cards")—wuxuu kuu oggolaanayaa in aad wax ku iibsatid oo lacagta mar danbe iska bixisid. Bangi, ururyada amaahda, dukaanada, iyo saldhigyada gaas iibiya ayaa ku siin kara kaarka amaahda. Biil ayaa boosta laguu soo dhigayaa bil kasta oo kuu sheegaya waxyaabihii aad ku iibsatey kaarka amaahda. Haddii aad bixiso lacagta lagugu leeyahay oo dhan markaad biilka heshid, wax ribo ama korsocod ma bixinaysid. Haddii aadan bixin lacagta oo dhan ama lacagta diristeeda la daahdid, waxa laga yaabaa in lagaa rabo in aad bixisid lacagta kor socodka ah iyo ujro dheeraad ah. Qaar ka mid ah kaararka amaahda waxay qabaan dulsaar aad u sarreeyo, sidaa awgeeda sii fiican u eeg xulashoyinka kaarka amaahda si aad u go'aamiso midka adiga kuu fiican. kaararka amaahda waxaa lagu magacaabi karaa kaararka bangiga, laakiin way ka duwan yihiin. Kaarka bangiga waxaa lagaa rabaa inaad bixiso dhammaan lacagta bil walba, laakiin khaadka amaahda si tartiib ah ayaad u bixin kartaa.

Ka taxadir in aad siisid kaadhkaaga amaahda lambarkiisa dad kale, gaar ahaan telefoonka iyo internetka. Hubi in aad taqaanid ama aamini kartid qofka ama ganacsiga aad lambarka kaadhkaaga siinaysid.

**TALO**



Eeg biilka kaararka amaahda bil kasta oo hubi in ay sax yihiin lacagta wax lagu iibsadey. Haddii aad ku aragtid waxyaabo aadan iibsan, si dhakhso ah u wac shirkada kaarka amaahda. Siday u badan tahay adigu ma bixinaysid waxyaabaha aadan gadan haddii aad isla markaaba shirkada kaadhka amaahda u sheegtid arrintaas.

Meel ku qoro dhammaan lambarada akoonkaaga bangiga, khaadhka ATM iyo kaararka amaahda. Sidoo kale qor lambarada telefoonka shirkadahan. Warbixintan meel fiican oo ammaan ah dhigo. Haddii ay kaa lunto ama lagaa xado boorsadaadu, waxaad wici kartaa shirkadaha aad kaadhadhka ka haysatey oo u sheeg in ay masaxaan. Taasi waxay ka ilaalinaysaa in qof kale si sharci darro ah isticmaalo kaadhkaaga.

Si aad u ogaado wax intaa ka badan ee khuseeyaa maaliyad shakhsiyeed, u booqo **www.mymoney.gov.**

## Qiimeynta Amaahda

Wadanka Maraykanka, habka aad u maamusho amaahdaada aad ayuu muhiim u yahay. Waxaa jiro ururyo go'aamiyo darajada ama qiimaha amaahdaada. Qiimeynta ama darajada amaahdaada waxay ku xiran yihiin sida aad u bixiso biilalkaaga, imisa deyn aad qaadato, imisa kaadh amaah aad qabtid iyo waxyaabo kale. Darajada amaahdaada waxay aad muhiim ugu tahay markaad rabtid inaad guri iibsatid ama baabuur, ama aad deyn qaadanaysid. Si aad darajo fiican ugu hayso amaahdaada waxyaabahaan ayaad samayn kartaa:

- Dhamaan biilashaada ku bixi wakhtiga lagaa rabo.
- Deynta ku maqan kaararka amaahda ka dhig mid hooseeya iyo ugu yaraan bil walba bixi lacagta ugu yar ee lagaa rabo inaad bixiso.

Marka loo eego sharciga federaalka, waxaa laguu ogol yahay inaad si bilaash ah ku dalbato warbixinta deyntaada sanadkiiba mar. Haddii aad koobi ka rabto qiimeynta amaahdaada, waxaad wici kartaa 1-877-322-8228 ama booqo **www.annualcreditreport.com**.

# Bixinta Canshuurta

Cashuurtu waa lacag waddaniyiinta Waddanka Maraykanku siiyaan dowladda federaalka, gobolka iyo dowladda hoose. Canshuurta waxaa lagu bixiyaa adeegyada dowladu qabato. Cashuurtu waxay leedahay noocyo kala duwan, sida canshuurta dakhliga, canshuurta wax iibiska iyo canshuurta hantida laga bixiyo.

**Canshuurta Dakhliga:** Canshuurta dakhliga waxaa la siiyaa dowladda federaaliga, gobolka iyo dowladda hoose. Waxyaabaha canshuurta la saari karo waa lacagta kaa soo gasha mushaharka, iskaa u shaqaysiga, lacagta bakhshiishka lagu siiyo iyo hantida la gado. Dadka intooda badan canshuurta dakhliga waxay ka bixiyaan lacagta laga jaro jeega shaqada. Canshuurta dakhliga inta laga rabo in aad bixisid waxay ku xidhan tahay dhaqaalaha ku soo gala. Sicirka canshuurta dakhliga dadka lacagta yar sameeyey way yar tahay. Qof kasta oo dakhli soo galo, oo Maraykanka degan waxaa loo baahan yahay in uu faylgareeyo canshuur celinta oo bixiyo canshuurta lagu yeesho.




Adeega Daqliga Gudaha (Internal Revenue Service [IRS]) waa hay'ad dowladda federaaliga oo aruurisa canshuurta dakhliga. Canshuur bixiyayaasha Maraykanka waxay faylgareyaan Foomka 1040. Canshuur celinta dalkhliga shakshiyaad walba, ayaa sanad walba loo diraa hay'ada IRS. Canshuur celintaada ayaa dowladda u sheegaysa intaad lacag sameysay iyo inta jeegaaga shaqada laga jaray. Haddi lacag badan jeegaaga shaqada laga jaray, waxaa kuu soo noqon doona lacag. Haddii canshuur sax ah laga goosanin jeegaaga shaqada, waxaa lagaa rabaa inaad lacagta siido IRS.

**Canshuurta Nabadsugida Bulshada iyo Daryeelka Caafimaadka (Social Security and Medicare Taxes):** Cashuurahan dowladda federaaliga ah, waxaa laga gooyaa jeegaaga shaqada. Nabadsugida Bulshada wuxuu bixiyaa manfacyo lagu kaalmeeyo hawlgabayaasha shaqada qaarkood iyo qoysaskooda, qaar ka mid ah shaqaalaha naafada ah iyo qoysaskooda, iyo xubinada qoysaska shaqaale dhintey. Canshuurta Daryeelka Caafimaadka waxaa lagu bixiyaa adeegyada caafimaadka dadka da'doodu dhaaftay 65. Intooda badan, waa in aad shaqaysid muddo dhan 10 (ama 40 rubuc) ilaa intii aad noloshaadu jirtey si laguu siiyo manfacyada Hawlgabka ee Nabadsugida Bulshada iyo Daryeelka Caafimaadka. Waxaa laga yaabaa in lagaaga baahan yahay in aad shaqaysid muddo toban sanno ka yar markaad dalbanaysid manfacyada naafada ama qoyskaagu dalbadaan manfacyada badbaada marka loo eego lacagtaad sameysay.




**Canshuurta Ganacsiga:** Canshuurta ganacsiga waa canshuurta gobolka iyo dowladda hoose. Canshuurtan waxaa lagu daraa qiimaha waxyaabaha qaarkood la iibsado. Canshuurta ganacsiga qiyaasteedu waxay ku xidhan tahay shayga qiimihiisa. Lacagta laga soo aruuriyo canshuurta ganacsiga waxaa lagu baxshaa adeegyada gobolka iyo dowladda hoose sida dhisidda waddooyinka, booliska iyo waaxda demdemiska.

**Canshuurta Hantida:** Canshuurtani waa canshuurta gobolka iyo dowladda hoose oo laga bixiyo gurigaaga iyo dhulka aad leedahay. Meelaha intooda badan, canshuurta hantida waxaa lagu kaalmeeya iskuulka dadweynaha iyo adeegyo kale.

### Foomkaaga W-2: Warbixinta Mushaharka iyo Canshuurta



W-2 waa foomka federaaliga waxaana ku liisgaraysan dakhliga ku soo galay iyo canshuurta lagaa jaray sannadkii hore. Sannad cashuureedku waa bisha Janaayo 1 ilaa Diseembar 31 ee sannad kasta. Sharci ahaan, waa in loo shaqeeyuhu kuu soo diro foomka W-2 intaan la gaadhin bisha Janaayo 31 sannad kasta. Waxaad shaqo kasta aad hesho ka heli doonataa foomka W-2. Waa in aad koobiga foomka W-2 ku dartid celinta canshuurta dakhliga oo aad u diraysid IRS-ta. Haddii aad ku nooshahay ama ka shaqaysid gobol ururiya canshuurta dakhliga, waa inaad dirtid koobiga foomkaaga W-2 iyo canshuur celinta dakhliga gobolkaaga.

## Caawimaad Helista Canshuurtada

Degane ahaan, waxaa lagaaga baahan yahay in aad faylgareysid canshuur celinta dakhliga ee federaalka sannad kasta. Celintan waxay daboolaysaa dakhligii ku soo galay bishii Janaayo ilaa Diseembar ee sanadkii la soo dhaafay. Waa in aad canshuurtaada faylgareyso intaan la gaadhin bisha Abriil 15. Waxaad caawimo

bilaa lacag ah ka heli kartaa Xarunta Kaalmada ee Cashuur-bixiyaasha IRS-ta markaad rabtid inaad faylgareyso canshuurtaada.

Xarumaha Kaalmada ee Cashuur-bixiyaasha waxay ku yalaan magaaloyin badan gudaha Maraykanka. Si aad u heshid Xarunta Kaalmada ee Cashuur-bixiyaasha oo ku taala meeshaad degan tahay, u booqo **www.irs.gov/localcontacts/index.html**. Caawimaada telefoonka, wac lambarkan IRS-ta 1-800-829-1040 ama 1-800-829-4059 (dadka maqalku ku adag yahay). Liiska gunnoyinka canshuurta, u booqo **www.benefits.gov**.

### Sida Dowladda Inoo Shaqeeyo

Cashuurtu waxay bixisaa adeegyada dowladda federaaligu uu u qabto dadka degan Maraykanka. Adeegyada qaarkood waxa ka mid ah:

- Sugidda amniga waddanka;
- Daaweynta iyo ka hortaga cudurada ee lagu ogaado cilmi baadhista;
- Waxbarida caruuta iyo dadka waaeyn;
- Dhisida iyo dayactirka waddooyinka haayweyada;
- Siinta adeeg caafimaad deganayaasha dakhligoodu hooseeyo iyo dadka duqa ah; iyo
- Ku deeqida gargaarka xaalada degdegga ah marka dhibaatoyinka dabiiciga ah dhacaan, sida duufaanada, dada ama dhulgariirka.

# Ilaalinta Lacagtaada iyo Naftaada

## Iska Ilaali Xadiska Aqoonsiga

Xadista Aqoonsiga ("identity theft") micnaheedu waa qof kaa xaday warbixintaada shakhsi ahaaneed, sida lambarka Nabadsugida Bulshada iyo lambarka xisaabta ama akoontiga bangiga. Waxay warbixintaa lacag kagala bixi karaan akoontiga bangigaaga ama waxay magacaaga kula soo bixi karaan kaadhka amaahda. Xadista Aqoonsigu waa denbi aad u weyn. Naftaada is-ilaali adigoo:

- Hubinaayo in aad taqaanid iyo in aad dadka ama ganacsiyada ku aammini kartid warbixintaada shakhsi ahaaneed, gaar ahaan telefoonka ama internetka.
- Kaga tag guriga oo dhig meel ammaan ah kaadhka Nabadsugida Bulshada. Ha qaadan kaadhka.

- Qaado waraaqaha aqoonsiga iyo kaadhadhka amaahda markaad u baahan tahay oo keliya. Inta kale kaga tag guri meel fiicana dhig.
- Jarjar ama ku shiid mishiinka waraaqaha ka hor intaadan qashin ku tuurin waraaqaha ama foomamka warbixintaadu ku qoran tahay.
- Akoonti walba erey sir gooni ah u samey. Ha u wada isticmaalin isla erey sir, kaasi wuxuu halis gelin karaa macluumaadkaaga shakhsiyadeed.

Si aad iska ilaaliso xadiska aqoonsigaaga, wac Khadka Xadiska Aqoonsiga ee Guddiga Ganacsiga Federaalka, lambarkuu waa 1-877-438-4338 ama u booqo **www.consumer.ftc.gov/features/feature-0014-identity-theft**.

## Khiyaamoyinka internetka (Phishing) iyo Khiyaamoyin Kale

Guddiga Ganacsiga Federaalka (FTC) wuxuu yiri in "phishing" yahay khiyaamo internetka ka dhaca halkaaso qof kuu soo diraayo email ama farriin ayagoo halkaas iska dhigaaya dad ka socdo ganacsi ama urur aad xiriir la leedahay, sida bangi, adeeg lacag-bixin internet ama hay'ad dowladda ka mid ah. Farriinta ama emailka wuxuu lahaan karaa meel la guujiyo ee kugu xiraayo bogga internetka ganacsigaas iyo waxay kaa codsanayaan inaad casriyeyso macluumaadkaaga shakhsiyadeed. Haseyeeshe meeshaas la guujiyo wuxuu ku gayn doonaa bog internet been-abuur ah ee u eg midka dhabta ah ee ganacsiga. Khiyaanoleyaasha waxay bogga internetka u sameysteen si ay u xadaan macluumaadkaaga shakhsiyadeed, sidii ay lacag ku xadaan ama dembi ku galaan magacaada.



Iska ilaali khiyaanada telefoonka oo shakhsiyaadka si toosan u bar shiisho, ay ku jirto muhaajiriinta. Khiyaanolaha telefoon ayuu kuu soo diri karaa si uu lacag ku weydisto ama wuu ku hanjabaadi karaa. Waxaa suurtogal ah in warar kugu saabsan haystaan, lambarkooda telefoonkana wuxuu u ekaan karaa mid rasmi ah. Hay'adaha Dowladda weligood telefoonka lacag kuma codsadaan iyo dadka kuma hanjabaadaan. Haddii aad hesho wicitaan sidaan oo kale ah, telefoonka is-saar iyo wac lambarka rasmiga ah aad ka haysato ganacsiga ama hay'ada dowladda si aad u hubiso haddii uu khiyaano yahay iyo inkale.

Si looga hortago khiyaamo, waxaa muhiim ah inaad waxyaabahaan xasuusato:

- Haddii aad internetka ka hesho email ama farriin lagugu codsanaayo macluumaad maaliyadeed ama shakhsiyadeed, ha jawaabin.

- Telefoonka ha ku sheegin lambarkaaga akoontiga ama ereygaaga sirta aysan ka eheen haddii aad adiga wacdey shirkad sumcad leh oo aad aamini kartid. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan shirkad, eeg xafiiska ilaalinta macmiilka deegaankaaga ama Xafiiska Ganacsiga Fiican.
- Dib u eeg bayaanada akoontigaaga iyo kaadhka amaahda si aad u hubiso in lacag si khalad ah lagaa baxsadey.
- Haddii aad qabtid kombyuutar, isticmaal softweerka fayruska joojiya, iyo sidoo kaleba habka khadka internetka ilaaliyo (firewall). Si joogto ah u cosbooneysii.
- Si taxadar ah u fur waxyaabaha ku lifaaqan emailka ama internetka ka soo baxsatey. Haddii aadan aqoon qofka emailka kuu soo direy, ha furin lifaaqa ama internetka ha ka soo baxsan faylka.
- Haddii aad ka shakisan tahay in bog internet ama email khiyaano yahay, u sheeg bankiga, shirkadda ama hay'adda dowladda dhabta ah.

Haddii aad u maleyso in lagu khiyaaney, waxaad cabasho ka samayn kartaa bogga internetka FTC **www.ftccomplaintassistant.gov**. Si aad u ogaato wax intaa ka badan ee ku saabsan ka hortagga khiyaanada internetka iyo ka hortagga emailada been-abuurka ah, u booqo **www.onguardonline.gov**.


TODAY'S LESSON: MATH
3+3=
3+2=
2+5=
3+5=
1904-2004
TIMES SQUARE

# Fahmidda Waxbarashadda iyo Daryeelka Caafimaad


Waxbarashada wuxuu adiga iyo qoyskaaga ku xiri karaa jaaliyaddaada. Qaybtaan wuxuu ka hadlaa dugsiyada Maraykanka ee lagu talagaley carruurta, dhallinyarada iyo dadka wayn. Qaybtaan waxay sido kale ka hadasha habka caafimaadka iyo uxuu baxshaa iloyin sidii adiga iyo qoyskaaga aqoon u lahaataan.

# Waxbarshadda Dalka Maraykan

Si loo hubiyo in dhammaan carruurta guuleystaan, Maraykanka wuxuu arday walba degan dalka Maraykanka siiyaaa waxbarasho dadweyne bilaash ah laga bilaabo xannaanada ilmaha ilaa fasalka 12aad. Qaar ka mid ah jaaliyadaha waxay sido kale carruurta ilaa seddax jirka ah siiyaan fursad ay ku tegaan xannaanada dugsiga ka hor. Qaybtaan wuxuu ku sharraxi doonaa sida carruurtaada lagu qoro dugsiga, sida ay dugsiyada Maraykanka u shaqeyaan iyo sida aad carruurtaada ku caawin kartid wax-barashada.

Dugsiyada Maraykanka intooda badan waa wax wada barasho laysku dhex jiro. Waxbarasho isku dhax jiuro waxaa loola jeedaa in wiilasha iyo gabdhaha isku fasal isla dhigtaan, hase-yeeshe waxaa jiro dhowr dugsiyo oo lab ama dheddig ahaan ardayda u qoro. Dugsiyada badankood waxay hoos yimaadaan degmo oo maamulo dhowr dugsiyo, ay ku jiraan dugsiyo carruur da' kala duwan leh. Da'da carruurta dugsi walba wuu kala duwanaan karaa dugsi ka dugsi.

## Ka Diiwaangelinta Ilmahaaga Dugsiga



Hal ka mid ah waxyaabaha ugu horeeya aad samayn doontid waa inaad cunuggaaga dugsiga ku diiwaangelisid ama ku qortid. Wac ama u booqo xafiiska weyn ee dugsiga degmadaada si aad u ogaatid dugsiga aad ilmahaaga dhigan doono. Waqtiga xaadirka, dhammaan gobolada iyo degmada Columbia waxay qabaan sharciyo dugsi dhigasho qasab ah. Dugsi dhigashada qasabka ah waxaa loola jeedaa in carruurta jiro da' gaar ah laga rabo inay tegaan dugsi. Gobolada badankood, sharciyadaan waxay daboolaan carruurta jiro 5 jir ilaa 16 jir. La xidhiidh waaxda waxbarashada gobolkaaga si aad u ogaatid da'da caruurta loo baahan yahay inay dugsiga yimaadaan.

Waxaad ilmahaga u diri kartaa dugsiga dowladda ama dugsi khaas loo leeyahay. Dugsiyada dowladu waa bilaash casharo diineedna ma bixiyaan. Gobolka ayaa go'aamin doono waxa uu cunugaaga ka baran doono dugsiga dadwaynaha, laakiin degmoyinka, macallin-madaxyada, iyo waalidiinta ayaa go'aamin doono sida cunuggaada wax loo bari doono. Dugsiyada dadweynaha madaxbannaan waa nooc dugsi dadweyne gaar ah oo si madaxabannaan u hawlgalo, ma hoos yimaadaan maamulka degmada. Canshuurtaada deegaanka, gobolka iyo qaar ka mid ah midka federaalka ayaa baxsho kharashka dugsiga dadwaynaha.

Dugsiyada khaaska ah waa hab kale aad wax ku bari kartid ilmahaada. Dugsiyada khaaska ah waxaa iska leh oo maamulo kooxo ka baxsan dowladda, ay ku jiraan kooxo diimeed ama aan diin xiriir la leheen. Ardaydu waa in ay iska bixiyaan kharashka ama (ujrada loo yaqaan "tuition") ee dugsiga gaarka ah lagu tago. Qaarkood waxay ugu deeqaan kaalmo maaliyadeed ardayda aan iska bixin karin kharashka ama dugsiga. Xaalado kale, maalgelin dowladeed ayeey ardayda heli karaan kuwaasoo ah foosharo ay ku tegaan dugsiyada khaaska ah. Qaar ka mid ah dugsiyada khaaska ah waa kuwo jinsi isku dhax jiro leh, kuwo kalena wiil ama gabadh kaliya ayaa dhigto. Qaar ka mid ah gobolada waxay qabaan shuruudyo laasin ama diiwangelin dugsiyada khaaska ah, dugsiyo khaas badan waxay xushtaan inay isku qoraan ururyo. Si aad u barato wax ka badan ee ku saabsan guryaha khaaska ah, la xiriir waaxda waxbarashada gobolkaaga.

Guriga wax ku barida cunuggaaga waa xulasho kale. Waxaana loo yaqaan Dugsi Guri. Shuruudaha dugsi gurigu wuu kala duwan yahay gobol walba. Waalidiinta xiiseeyo dugsi guriga wa inay la xiriiraan degmadooda u xilsaaraan waxabarashada si ay u helaan macluumaad ka badan.

Carruurta Maraykanka badankood waxay dhigtaan Dugsiyada dadwaynaha ilaa 13 sano, laga bilaabo dugsiga xannaanada ilaa fasalka 12aad. Dugsiyada badankooda, cunuggaaga waxaa la gayn doonaa fasal ku salaysan labo waxood: da'adooda iyo heerkooda waxbarasho. Xaalado qarkood, dugsiga wuxuu cunuggaaga siin karaa tijaabo si loo ogaado heerkiisa ama heerkeeda iyo fasalka ay dhigan doonaan.

**SIDA LOO ABAABULO DUGSI MARAYKAN CAADI AH**

| Dugsi | Fasalada | Da'da |
|---|---|---|
| Dugsiga Hoose | Dugsiga Xannaanada iyo Fasalada 1 ilaa 5 ama 1 ilaa 6 | Da'da Carruurta 5 ilaa 11 |
| Dugsiga Dhexe | Fasalka 6 ilaa 8 7 ilaa 8, ama 7 ilaa 9 | Dhallinyarada 11 ilaa 14 Jir |
| Dugsiga Sare | Fasalka 9 ilaa 12 ama 10 ilaa 12 | Dhallinyarada 14 ilaa 18 Jir (iyo marmar ilaa 21 jir) |
| Waxbarashada ka dambeyo midka sare ama Waxbarashada Sare | Kulliyada Bulshadda Dadweynaha iyo kuwa Dadweynaha, Labo ama afar sano oo kulliyad ama jaamacad ah, Dugsiyada Tababarka | Dhammaan Dadka Wayn oo u Qalma Ayaa Tegi Karo |


Su'aalaha qaar ka mid ah oo waalidiintu inta badan dugsiyada dowladda weydiiyaan waxaa ku jira:

## Intee ayuu la eg yahay sannad dugsiyeedka?

Inta badan iskuulku wuxuu bilaabmaa bisha Agoosto ama Setember ilaa dhammaadka Maayo amaJuun. Meelaha qaarkood, carruurtu waxay dugsiga dhigtaan sannadkoo dhan. Carruurtu waxay dugsiga tagaan Isniinta ilaa Jimcaha. Dugsiyada qaarkood waxay bixiyaan barnaamijyo ka horreeya ama ka danbeeya saacadaha caadiga ah oo loogu talagalay carruurta waalidiintoodu shaqeeyaan. Waxaa kuwaani lagugu dallaci karaa kharash ka hor iyo ka dib barnaamajyada dugsiga, laakiin qaar ka mid ah adeegyada wax baridda si bilaash ah ayaa laga bixin karaa degmoyinka.

## Xagee ka diiwaangeliyaa ilmahayga?

Wac ama u booqo xafiiska weyn ee dugsiga degmadaada si aad u ogaatid dugsiga aad ilmahaaga dhigan doono.




## Waa maxay dukumentiyada aan u baahanahay sidii ilmahayga dugsiga ku qoro?

Waxaad u baahan tahay xogta caafimaadka ilmahaaga oo caddaynaya in uu qaatay tallaalo ka hortagga cudurada oo la yidhaahdo irbado. Waxaad sido kale u baahan tahay caddeyn aqoonsi, sida shahaadada dhalashada, iyo wax caddeynaayo inaad ku nooshahay bulshada uu dugsiga ku yaalo. Haddii waraaqahaasi kaa lumeen, weydii shaqaalaha dugsiga meesha laga dalbado dukumenti cusub. Si aad ugu taxadirtid dibdhac, samee waxyaaban ka hor intaadan ilmahaaga dugsiga ku qorin.

## Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu aanu ku hadlin Afka-ingiriisiga?

Haddii cunuggaaga ku hadlin af Ingiriis, degmada dugsiga wuxuu qiimayn doonaa aqoonta luqada cunuggaada. Dugsiga markaa wuxuu cunuggaaga siin doonaa adeegyada uu asaga ama yada u baahan yahay si uu u barto af Ingiriis iyo ka qayb qaato barnaamajka waxbarashada heerkiisa aqoon. Degmada dugsiga wuxuu mas'uul ka yahay inuu cunuggaaga siiyo adeegyada saxda ah si uu u qanciyo baahida luqadeed ee ilmaha, iyo si lagugu ogeysiiyo luqad aad garan kartid adeegyada uu cunuggaaga heli doono. Waxaad la xiriir kartaa dugsiga cunuggaada si aad u weydiiso hab-socodkaan. Adeegyada luqada la baxsho waqtiga caadiga ee dugsiga waxaa dheeraad u ah barnaamajyada dugsiga; qaar ka mid ah dugsiyada ayaa baxsho si ardayda lagu caawiyo inay wanaajiyaan Ingiriiskooda. Dugsiga ilmahaaga ayaa kuu sheegi doona waxyaabaha ay ku caawimaan ardayda u baahan inay bartaan Af-Ingiriisiga.

## Maxaa dhacaayo haddii ilmahayga naafo yahay?

Dhammaan ardayda ku nool Maraykanka waxay xaq u leeyihiin inay helaan waxbarasho bilaash ah, ayada la eegin haddii ay naafo yihiin ama inkale. Haddii ilmahaaga naafonimo qabo, asaga ama iyada waxay heli karaan waxbarasho gaar ah iyo adeegyada ku xiran. Ilmahaaga waxaa la geyn doonaa dugsi caadi ah, haddii uu suurtogal yahay. Marmar cunuggaaga wuxuu u baahnaan karaa fasalka dibeddiisa waxbarasho gaar ah ama adeegyada ku xiran. Waxaad ka qayb qaadan kartaa markii uu dugsiga go'aaminaayo sida ugu fiican ee wax loo bari lahaa ilmahaaga. Dugsiga wuxuu mas'uul ka yahay inuu luqad aad garan kartid kugu ogeysiiyo go'aamadaan. Macluumaad dheeraad ah ku saabsan sida adeegyada iyo iloyinka loo heli karo, u booqo **http://idea.ed.gov**.

## Ilmahaygu dugsi ma dhigan jirin ka hor intaanaan iman Maraykanka. Ilaa gormee ayada ama isaga si bilaash ah ku dhigan karaan dugsigada dadwaynaha?

Gobolada badankood, ardeyda waxay si bilaash ah u dhigan karaan dugsigada dadwaynaha ilaa ay qallinjebiyaan dugsiga sare ama ilaa ay ka garaan da'da ugu wayn oo ah 21 jir. Haddii ardayga ka yar yahay 22 jir waxay isku qori karaan dugsi sare iyo waxay qaadan karaan shahaadada dugsiga sare. Haddii ardayga uusan dhammaynin dugsi sare markuu gaaro 22 jir, asaga ama yada waxay isku qori karaan Fasalada Dugsiga Sare ee Dadka Wayn (ASE). Fasalada ASE waxay ardayda baraan aqoonta loo baahan yahay si ay u helaan shahaado la aqoonsado ee u dhigma midka dugsiga sare sida (shahaadaada Horumarka Guud ee Waxbarashada [GED]) intii ay heli lahaayeen shahaadada caadiga ah ee dugsiga sare. Waxaad wacdaa xafiiska degmada dugsigaaga ama Waaxda Waxbarashada gobolka si aad u ogaatid meesha laga bixiyo fasalada GED.

## Ilmahaygu sidee buu dugsiga ku tegayaa?




Waddanka Maraykanka carruurta way u lugeeyaan dugsiga marmarka qaarkood. Haddii uu dugsiga fog yahay ama ammaan eheen in la lugeeyo, waxay raaci karaan baska dugsiga ama waxay raaci karaan gaadiidka shacbiga, sida tareenka ama midka dhulka hoostiisa ku socdo. Dugsiyo dadwayne badan waxay qabaan basas si bilaash ah ardayda ka qaado iyo ku soo celiyo saldhig bas ee guriga u dhow. Dugsiyo dadwayne kale waxay ardayda u qalma siiyaan warqad ogolaansho si ay si bilaash ah ama si raqiis ah u raacaan gadiidka shacbiga. Si aad u ogaato haddii cunuggaada bas u raaci karo dugsiga ama heli karo warqad ogolaansho, la xiriir xafiiska degmada dugsigaaga. Haddii aad haysatid baabuur, waxaad sameysan kartaan adiga iyo waalidiinta kale oo carruurtiinu isku dugsi tagaan in aad wadaagtaan wax la yiraahdo baabuur wadaagis "car pool".

## Barnaamajka Federaalka ee Cuntada Dugsiga

Si waxbarashada kor loogu qaado, dowladda maraykanku waxay bixisaa cuntooyin caafimaadka u fiican oo qiime jaban ah ama mid bilaash ah oo loogu talagalay carruur ka badan 26 malyuun maalin kasta. Ka qayb qaadashada Barnaamajka Quraacda Dugsiga ama Barnaamajka Qaranka ee Qadada Dugsiga wuxuu ku salaysan yahay dakhilga qoyska iyo inta qoysku le'eg yahay. Barnaamijka Caanaha Gaarka ah wuxuu carruurta aan ka qayb qaadan barnaamajyada federaalka ee cuntada dugsiga siiyaa caano. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamjyadaan Waaxda Beeraha Maraykanka, u booqo **www.fns.usda.gov/cnd**.

### Ilmahaygu muxuu iskuulka ku cuni doonaa?



Carruurtu waxay cuntadooda u qaadan karaan dugsiga ama mid bay ka iibsan karaan makhaayada dugsiga ku taal. Sidoo kale dowladda maraykanku waxay bixisaa quraac nafaqaysan bilaash ah ama qiime jaban ah oo loogu talagalay carruurta aan iibsan karin cuntada dugsiga. Wac ama u booqo dugsiga ilmahaaga si aad u ogaatid in ay ka qayb qaatan barnaamajka federaalka ee cuntada dugsiga. La hadal shaqaalaha dugsiga si aad u ogaatid haddi carruurtaadu u qalmaan ka qayb qaadashada barnaamajka cuntada.

### Yaa bixiya kharashka buugta iyo hawlaha iskuulka?

Dugsiyada dadweynaha waa iska caadi in ay bixiyaan buugaag bilaash ah. Ardaydu waa in ay iibsadaan waxyaabaha kale ee dugsiga lagu dhigto, sida xaashiyaha wax lagu qorto iyo qalin qoriga. Haddii aadan bixin karin waxyaabaha dugsiga lagu dhigto, la xidhiidh dugsiga ilmahaaga. Waxa laga yaabaa in dugsiyo qaarkood lacag yar ka qaadan waxyaabaha dugsiga ama dhacdooyinka gaarka ah, sida safarka dugsiga ee carruuta loo sameeyo. Dugsiyo badan waxay baxshaan barnaamjyada isboortiga iyo musikada ee dugsiga ka dib. Waxaad u baahan doontaa inaad kharash ka bixiso ka qayb-galka barnaamajyadaan.

### Muxuu ilmahaygu ka baran doonaa dugsiga?

Gobol kasta wuxuu dejiyaa qaynuunada waxbarashada ee dugsiga. Qaynuunyadaan waxay dejiyaan waxyaabaha laga rabo inay ogaadaan ardey walba iyo heerka loo baahan yahay inay gaaraan. Degmoyinka dugsiga ayaa go'aan ka gaadha sida macluumaadka loo dhigayo ama loo baranaayo. Dugsiyada intood badan waxaa laga bartaa Ingiriis, xisaab, culuunta bulshada, saynis iyo waxbarashada jidh dhiska. Farshaxan, muusiga iyo luuqadaha ajnibga waa la bixiyaa marmarka qaarkood.

## Sidee shaqada ilmahayga loo qiimeynayaa?

Macallimiinta waxay baxshaan dhibco (sido kale lagu magacaabo darajo) kuwaaso ku salaysan hawsha at carruurta qabtaan sanadka dugsiga. Dhibcaha inta badan waxaa lagu bixiyaa shaqo-guriga, imtixaanaadka, imaanshaha dugsiga iyo anshaxa ama edaabta fasalka. Waxaa laagu soo diri doonaa kaadhka warbixinta ilmahaaga sannadkii dhawr jeer. Qaar ka mid ah dugsiyada waxay si toos ah kuu soo diri doonaan kaadhka warbixinta ilmahaaga. Kaadhka warbixintu wuxuu kuu sheegayaa sida ilmahaagu maado kasta u sameynayo. Dugsiyada way kala duwan yihiin habka ardayga dhibcihiisa u qiimeeyaan. Dugsiyada qaarkood waxay istimaalaan xaraf u taagan dhibcaha uu keenay ilmuhu, tusaale ahaan A ama A+ waxay u dhigantaa shaqo aad u fiican, xarafka D ama F wuxuu u dhigmaa shaqo dugsi ku liidasho ama ku dhicis. Qaar kale waxay isticmaalaan lambaro ama kelmado ay ku soo koobaan shaqada ilmahaagu qabtay sida aad u fiican, wanaagsan ama u baahan horumar. Fasalo badan ardayda waxay sido kale ka sameeyaan imtixaano, kaasoo uu dugsiga sameeyo sii uu qiimeeyo ardayda. Weydii shaqaalaha dugsiga sida loo qiimeeyo dhibcaha ardayda dugsiga la dhigta ilmahaaga.

## Sidee ula hadli karaa macalinka ilmahayga?




Dugsiyada intooda badan waxay leeyihiin kalfadhi aad kula kulmi kartid macalinka ilmahaaga. Sidoo kale waxaad kullan la yeelan kartaa macalimiinta iyo maamulayaasha dugsiga si aad u weydiiso waxbarashada ilmahaaga. Haddii aadan ku hadlin ama aadan fahmin af Ingiriis, degamada dugsiga ayaa kuu qaban-qaabin doono turjubaan xirfad leh markaad kullamadaas timaado. Degmada dugsiga waxa sido kale laga rabaa inuu luqad aad garan kartid kugu siiyaan macluumaad khuseeya arrimo kale ee ku saabsan dugsiga.

## Maxaa dhacaya haddi ilmahaygu dugsiga ka baaqdo?

Imaanshaha dugsiga aad ayuu muhiim u yahay. Waalidiintu waa in ay warqad u soo qoraan macalinka ama dugsiga soo wacaan iyo soo sheegaan sababta ilmahoodu dugsiga uga baaqday ama u iman waayey. Haddii ilmahaaga dugsiga imaan doonin, macalinka ogeysii. Ardaydu waa inay dib u sameeyaan hawsha ama shaqada dhaaftay. Weydii dugsiga ilmahaagu nooca macluumaadka aad u baahan tahay inaad bixiso haddii cunuggaaga dugsiga ka baaqdo.

## Waxaad Qaban Karto

Dugsiyada dadweynaha iyo kuwa gaarka ahiba waxay leeyihiin Guddiga Waalidka iyo Macalinka (PTA) ama Ururka Waalidka iyo Macalinka (PTO). Ururadan waxay caawiyaan waalidiinta raba in ay ogaadaan wuxuu ilmahoodu dugsiga ka qabto iyo ka qayb qaadashada hawlaha dugsiga. Qof kasta ayaa ka qayb qaadan kara arrintan, xataa marka lagu daro awoowayaasha iyo ayeeyooyinka. PTA/PTO-gu waxay sido kale dugsiyada ku taageeraan hawlo gaar ah iyo bixinta mutaddaawiciinta looga baahan yahay fasalada.

Waad ka qaybgeli kartaa hawlaha dugsiga xataa haddi aadan ku hadlin af Ingiriis. Dugsiyada intooda badan waxay leeyihiin macluumaad gaar ah oo loogu talagalay waalidiinta ay luqada Af-ingiriisida ku adag tahay. Ogeysii dugsiyada inaad u baahan tahay adeeg turjubaan si aad uga qayb-qaadato. Wac ama booqo xafiiska si aad u ogaatid marka ay kulmaan Gudiga ama ururka waalidiinta iyo macalimiinta dugsiga ilmahaaga iyo sida aad ku biiri kartid ururkaas. Waxaad sido kale la xiriiri kartaa macallinka cunuggaaga iyo waxaad weydiin kartaa haddii ay jiraan hab aad mutaddaawac ka noqoto ama ka qayb qaadato.

### Maxaa dhacaya haddi ilmahaygu dhibaato geysto?

Dugsiyo badan waxay qabaan liiska shuruudaha ama siyaasad anshax ee la rabo in ardayda raacaan, kaasi badanaa waxaa lagu magacaaba xeerka anshaxa. Weydii dugsiga cunuggaaga siyasaddooda anshaxa ama xeerka anshaxa. Dugsiga wuxuu ciqaabi karaa ardayda jebiyo shuruucda dugsiga ayagoo ka codsanaayo inay joogaan dugsiga markii ay fasalada dhamadaan ama waxay u diidi karaan inay ka qayb qaataan isboorti ama wax-qabadyo kale ee dugsiga. Ciqaabta jidhka lama oggola in lagu sameeyo dugsiyada gobolada Maraykanka.

Waxa laga yaabaa in carruurta laga baajiyo ama laga eryo dugsiga haddii ay wax anshax xumo sameeyaan ama inta badan sharciga dugsiga jebiyaan. Haddii ilmahaada laga eryo dugsiga, asaga ama ayada mar danbe ma tegi karaan isla dugsiga. Waxaad u baahan tahay in aad la kulanto shaqaalaha dugsiga si aad ilmahaaga dugsiga ugu soo celisid.

### Imahaygu miyuu ammaan ku yahay dugsiga?

Dugsiyada dadweynaha Maraykanka intooda badan waa meel amaan ah oo wax lagu baran karo. La hadal macalimiinta, guddiga dugsiga iyo maamulaha dugsiga haddi aad ka welwelsan tahay amaanka ama badbaadada ilmahaaga.

## Sida loo Joojiyo Xoog-sheegashada

Xoog-sheegashada, waa akhlaaq dagaal leh oo xad-gudub jireed ama hadal wata iyo ka dhaxeeyaa carruurta da'da dugsiga. Xoog-sheegashada wuxuu dhici karaa ka hor iyo ka dib saacadaha dugsiga. Sido kale haddii badanaa xoog-sheegashada la soo wargeliyo ka dhaco gudaha dugsiga, xoog-sheegashada wuxuu sido kale ka dhici karaa meesha ay carruurta ku ciyaaraan, baska, ama internetka. Si aad u barato wax intaa ka badan sida looga hortago xog-sheegashada, u booqo **www.stopbullying.gov**.

# Waxbarshadda sare: Kuliyadaha iyo Jaamacadaha

Dugsiga sare ka dib, dhalinyarada waaweyn iyo dhallinyarada waxay sii wadan karaan tacliintooda ilaa labo sanno kulliyad bulshadeed ama kulliyad machadka farsamada ama afar sano kulliyad ama jaamacad. Kuwan waxaa loo yaqaan machadka dugsiga sare ka dib ama machadka tacliinta sare. Caadi ahaan, afarta sano ugu horeeya ee waxbarashada dugsiga ka dib waxaa lagu magacaaba waxbarashada shahaadada ka hor, iyo midka shahaadada jaamacadda ka dib waxaa lagu magacaaba waxbarashada daraasadda sare. Dugsiyada tacliinta sare waxay u kala baxaan kuwo dadweyne iyo kuwo khaas ah. Kulliyadaha iyo Jaamacadaha dadweynuhu way ka qiime jaban yihiin kuwa khaaska ah, gaar ahaan way u qiimo jaban tahay dadka degan gobolka kulliyadu ama jaamacadu ku taalo. Dhallinyarada waaweyni sidoo kale waxay dooran karaan inay galaan dugsiyada laga barto shaqo gaar ah, sida farsamada kombiyuutarka ama kaaliye caafimaad.



Ardayda dhigta dugsiga tacliinta sare waxay doortaan in ay bartaan maado takhasus ah, oo loo yaqaan major. Doorashada maadada takhasuska ah, waxay ka caawimaysaa isu diyaarinta shaqooyinka iyo korodhsiga waxbarashada mustaqbalka danbe.

| TACLIINTA SARE: | | |
|---|---|---|
| **Noocyada Shahaadada** | **Noocyada Dugsiyada** | **Sannadaha Dugsiga Lagu Jiro** |
| Shahaado | Kuliyada Bulshada/Dugsiga Ganacsiga | Lix Bilood ilaa Labo Sanno |
| Shahaadada Isku xidhka | Kulliyada Bulshada | Labo Sannadood |
| Shahaadada “Bachelor’s” | Kulliyada ama Jaamacada Afar-sanno ah | Afar Sannadood |
| Daraasadda Sare “Master’s | Jaamacad | Labo Sannadood |
| Shahaadada Digtoornimada ”Doctorate” | Jaamacad | Labo ilaa Sideed Sannadood |
| Takhasus “Professional” | Iskuul Gaar ah | Labo Ilaa Shan Sannadood |

Waxbarasho kulliyad ama jaamacad wuxuu ahaan karaa qaali, laakiin waxaa jiro barnaamajyo kugu caawin doono kharashka waxbarashada. Ardeyda badankooda waxay qaataan deyn ama waxay codsadaan deeq waxbarasho ama taakulayn lacageed si ay ku baxshaan waxbarashadooda. Qaar ka mid ah dugsiyada waxay baxshaan taageerid waxbarasho lagu magacaabo deeq waxbarasho. Waxaad u booqan kartaa xafiiska taakulayn lacageed dugsigaaga si aad u ogaato warar ka badan ee ku saabsan deeqda waxbarasho. Qaar ka mid ah deeqyada waxbarasho waxaa la siin karaa oo kaliya muwaadiniinta Maraykanka, deganyaasha joogtada ah, ama dad kale u qalma laakiin aan eheen muwaadin Maraykan. Dawladda Maraykanka wuxuu sido kale taakulayn lacageed siiyaa ardayda. Si aad u barato wax intaa ka badan ee ku saabsan Taakulayn lacageed, hoos eeg ama u booqo **www.StudentAid.gov**.

## Kaalmo Maaliyadeedka Dowladda Sare ee Ardayda Kuliyada

Dowladda Maraykanka wuxuu baxshaa taakulayn lacageed si uu ardayda ku caawiyo bixinta kharashka waxbarashadooda kulliyad, dugsi farsame, dugsi tababar ama daraasadda dambe. Taakulayn lacageedka federaalka wuxuu daboola kharashyada sida wax baridda, ujroyinka, qolka iyo cuntada, buugaagta iyo gaadiidka. Ardayda u qalma kaalmadan waxaa lagu siiyaa baahidooda dhaqaale, ee ma ahan dhibcahooda. Waxa jira saddex nooc oo ah kaalmo dowladeed:

- Deeq—waa lacag aan lagaa rabin in aad dib u bixiso.
- Shaqo iyo Waxbarasho—waa lacag aad shaqaysatay intii aad dugsiga ku jirtey.
- Deyn—waa lacag aad amaahatay oo ribo saaran tahay lagaana rabo in aad dib u bixisid mar danbe.

Macluumaad ka badan ku saabsan barnaamajyada kaalmoyinka dowladda, wac 1-800-433-3243 ama u booqo Bogga Internetka Waaxda Waxbarashada Maraykanka **www.StudentAid.ed.gov/resources**. Sidoo kale waxaa macluumaadka lagu heli karaa Af Isbaanish.

### Iska Ilaali Taakulayn Lacageen Khiyaano ah



Ka taxadir ama ka fiirso markaad raadinaysid macluumaadka ku saabsan kaalmo maaliyadeed. Iska ilaali waxyaabaha runta la moodo ama wax laguugu ballan qaado in lacag laguugu beddelayo. Sannad kasta, qoysas badan ayaa lacag badan oo gaadhaysa malaayiin kaga luntaa deeq waxbarasho oo been ah. Haddii aad dhibbane ka tahay khiyaano ama si aad u hesho macluumaad ka badan, wac Guddiga Federaalka Ganacsiga 1-877-382-4357 ama 1-866-653-4261 (haddii maqalku kugu adag yahay). Waxaad sido kale u booqan kartaa boggooda internetka **www.consumer.ftc.gov/articles/0082-scholarship-and-financial-aid-scams**.

# Waxbarshadda Dadka Waaweyn

Waxbarashadu ma ahan in ay dhammaato markaad weynaatid. Waddanka Maraykanka, dadka waxaa lagu dhiiri geliyaa in ay noqdaan "dad weligood wax barta". Haddii da'daadu tahay 16 ama ka weyn tahay oo aadan dhammeysan dugsiga sare, waxaad isku qori kartaa fasalada Waxbarashada Dadka Waaweyn (ASE). Fasaladaan waxay ku baraan aqoonta loo baahan yahay si aad u hesho shahaado la aqoonsado ee u dhigma midka dugsiga sare sida (shahaadaada Horumarka Guud ee Waxbarashada [GED]).

Shahaadada GED waa shahaadada u dhigma ee si fiican loo aqoonsado, inkastoo qaar ka mid ah gobolada kaaga baahan yihiin inaad imtixaan kale sameyso oo la mid ah GED ama qancisid shuruudo kale si aad u hesho shahaado la aqoonsado ee u dhigma midka dugsiga sare. Shahaado u dhigma midka dugsiga sare ama shaado sida GED wuxuu muujinayaa inaad baratey tacliinta iyo xirfadaha dusgiga sare. Si aad u hesho GED, waa inaad ku baasdo afar imtixaano: aqoonta luqada iyo farshaxanka (wax qoris iyo wax akhris), waxbarashada bulshada, sayniska, iyo xisaabta. Loo shaqeeyayaasha Waddanka Maraykanka intoodda badan waxay u maleeyaan haysashada GED-du in ay u dhiganto shahaadada dugsiga sare laga qaato. Meelo badan oo laga qaato fasalada u diyaar garoowga GED-ga waa bilaash ama waxaa lagu helaa qiime aad u jaban. Internetka raadi GED iyo waxbarasho kale ee dadka waawayn, ama wac xafiiska degmada dugsigaaga si aad macluumaad u hesho.



Dad badan oo waaweyn waxay qaataan fasalo ay ku bartaan maadooyin ay jecel yihiin ama kuwo ay ka bartaan xirfado cusub oo ka caawiya shaqooyinkooda. Dugsiyada dadweynaha ama kulliyada bulshada intooda badan waxay bixiyaan fasalada lagu dhigto maadooyin fara-badan oo loogu talagalay dadka waaweyn. Caadi ahaan, fasaloyinkaan waxay qabaan kharashyo hooseeyo iyo qof walba ayaa isku qori karo. Eeg liistada nidaamka dugsigaaga kuu dhow iyo kan kulliyada bulshada iyo casharada ay bixiyaan, intay lacagtoodu tahay iyo sida laysku diiwaangeliyo.

# Barashadda Ingiriiska

Waxaa jira meelo badan oo aad ka baran kartid sida Af-Ingiriisida loogu hadlo, loo akhriyo, loo qoro. Carruur iyo dad waaweyn oo badan ayaa Af-Ingiriisida u qaata luqad labaad ahaan (ESL). Cashardaasi waxay caawiyaan dad badan oo aan aqoon sida luqada Af-Ingiriisida loogu hadlo. Casharadan waxaa loo yaqaan dadka luqadaha kale ku hadla (English for Speakers of Other Languages [ESOL]) ama ka jaahil bixinta Af-Ingiriisiga (English Literary classes).

Carruurta aan luqada af-Ingiriis aqoon waxay ku baran doonaan dugsiga. Dugsiyada dadweynaha ee Maraykanku waxaa laga bixiyaa sharraxaado lagu caawiyo ardayda u baahan in ay af-Ingiriisiga bartaan.

Dadka waaweyn oo aan af-ingiriis aqoon waxay qaadan karaan fasalada ESL-ka oo laga bixiyo dugsiyada dadka waaweyn, barnaamijyada waxbarashada beesha ama kuwa khaaska ah oo lacagta laga bixiyo. Dugsiga ilmahaada wuxuu bixin karaa adeegyada farbarashada qoyska, wacyi gelinta waalidiinta, iyo tababarka waalidiinta aan ku hadlin af Ingiriis. La xiriir dugsiga ilmahaada si aad u ogaato haddii ay baxshaan barnaamijyadaan.

Barnaamijyada waxbarashada dadka waaweyn waxaa inta badan laga baxshaa rugta jaaliyadda, kulliyada bulshadda iyo dugsiga degmada. Barnaamijyadan waxaa laga yaabaa in ay bixiyaan casharo ESL iyo wax barid ay baxshaan mutaddaawiciin deegaanka joogo. Barnaamijyadan intooda badan waa bilaash ama waxa laga yaabaa in aad bixisid kharash yar. Fasaldan waxaa la dhigtaa maalinta dhexdeeda ama saacadaha galabtii. Waxaad wacdaa kulliyada bulshada kuugu dhow ama xafiiska degmada dugsigaaga si aad u ogaatid meelaha kuu dhow oo barnaamijyada ESL-ka laga bixiyo.

Magaalooyinka waaweyn intoodda badan waxay qabaan dugsiyo u gaar ah Af-ingiriisida oo laga bixiyo casharo la dhigto maalinta dhexdeeda ama saacadaha galabtii. Kharashka fasalada gaarka ah ee luqada waxay badanaa ku salaysan yihiin tirada saacadaha wax baridda, caadi ahaan way ka qaalisan yihiin fasalada dadweynaha. Internetka ayaad ka raadin kartaa dugsiyada khaaska ah ee aaggaaga.

Ururada beesha, maktabadaha iyo xarumaha diinta waxay sidoo kale bixiyaan casharada ESL-ka oo bilaash ah ama qiime jaban ah. Waxaad ka eegtaa meelaha ay ka mid yihiin maktabadaha dadweynaha, ha'yadaha adeegyada bulshada iyo meelaha lagu cibaadaysto. Qofka ka shaqeeyaa maktabadda kugu dhow ayaa kuu sheegi kara meelaha aad ka heli kartid buuggaga, cajaladaha ama saxamada Cd-ga af-Ingiriisida (ESL) iyo barnaamijka kombiyuutarka.

Si aad u hesho barnaamajka ESL ee kugu dhow, u booqo **www.literacydirectory.org**. Waxaad sido kale wax ka baran kartaa internetka markaad u booqato **www.usalearns.org**.

## Wac 211 si Aad u Hesho Macluumaad Khuseeya Adeegyada Bulshada

Gobolada intooda badan ayaad ka waci kartaa 211 si lagaaga caawiyo adeegyada bulshada ee aad u baahan tahay. Wac 211 si aad u heshid meelaha xaafaddaada ku yaal oo aad iska diiwaan gelin kartid fasalada ESL. Sidoo kale waxaad waci kartaa 211 haddi aad u baahan tahay meelaha laga helo cuntada, guryaha ama adeegyada kale ee bulshada. Gobolada iyo degmooyin qaarkood ma lahan adeegyada 211. Si aad u ogaato haddii aaggaaga laga heli karo adeegga 211, u booqo **www.211.org**.

# Daryeelka Caafimaadka

Caadi ahaan, dadka degan dalka Maraykanka si toosan ayeey u baxshan kharashka xannaanadooda caafimaad ama waxay isticmaalaan caymis. Xannaanada caafimaadka waa qaali, sidaa awgeeda waxaa faa'ido leh in loo shaqeeyo qof ku siin karo caymiska caafimaadka ama laftigaaga iibso caymiska caafimaadka. Waa muhiim in adiga iyo qoyskaaga heshaan caymis caafimaad sida ugu dhaqsi badan.



Waxaa laga yaabaa in loo-shaqeeyuhu bixiyaan caymiska caafimaadka si ay ugu faa'iideeyaan shaqaalahooda. Qaar ka mid ah loo shaqeyayaasha waxay baxshaan dhammaan kharashka biloodlaha oo dhan ee xannaanada caafimaadkaaga, kuwo kalena waxay baxshaan qayb uun. Kharashkaan bil kasta la bixiyo waxaa loogu yeedhaa lacag bixinta joogtada ah “premium”. Waxaa loo baahan karaa in aad bixisid qayb ka mid ah lacag bixinta joogtada ah. Caadi ahaa, loo-shaqeeyahaaga ayaa ka jari doona qayb ka mid ah lacagta caymiska caafimaadka jeega shaqaalaha. Loo shaqeeyayaasha qarkood waxay sido kale kuu ogolaan doonaan inaad caymis caafimaad uu iibiso qoyskaaga. Waxaa suurtogal ah inaad lacag ka badan ka bixin doonto caymiska noocaan.

Haddii aad qabtid caymiska caafimaadka, takhaatiirta waxay biilka u diri doonaan shirkaddaada caymiska caafimaadka. Shirkadda caymiska caafimaadka waxay bixin doonaan qaar ama dhammaan biilaalkaan. Badanaa adiga waxaad bixin doontaa caddad yar markaad isticmaasho adeeg caafimaad ama takhtar u tegto. Kani badanaa waxaa lagu magacaaba iskaashi lacag bixin.

Haddii aadan qabin caymiska caafimaadka, takhaatiiro waxay kaa codsan karaan inaad bixiso kharashka buuxa ee daaweyntaada. Waxaa laga yabaa inaad heli kartid taageerida xannaanada caafimaadka federaalka ama gobolka. Gobolada waxay nooc kaalmo siiyaan carruurta saboolka ah, haweenada uurka leh, iyo dadka naafada ah. Gobolo kalena waxay qabaan barnaamajyo taageerid kale oo ay maalgeliyaan.

Haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah, waxaad tegi karta qolka xaalada degdegga ah ee isbitaalka kuugu dhow. Isbitaalada badankood ee leh qaybta degdegga waxay ku waajiban yihiin inay daaweeyaan dadka qaba xaalad caafimaad degdeg ah sido kale haddii qofkaas lacag bixin karin, haseyeeshe, bixiyaha xannaanada caafimaad wuxuu soo saari karaa biilka adeegyada caafimaadka la baxshey.

Markaad go'aan ka gaareysid caafimaadkaaga waxaa muhiim ah inaad ogaato meesha aad ka heli kartid macluumaadka ugu dambeeyo iyo lagu tashan karo. Iloyin baaxad leh ee khuseeya mawduucyada caafimaadka, u booqo **www.healthfinder.gov**.

## Suuqa Caymiska Caafimaadka

Suuqa Caymiska Caafimaadka (ama kala beddelashada caymiska caafimaadka) waa hab lagu helo caymis caafimaad tayo leh oo aad awoodi kartid iyo qanciyo baahidaada. Wuu ku caawin karaa haddii loo shaqeeyahaada ku siinin caymis aad awoodi kartid ama haddii aadan u qalmin Medicare, Medicaid, ama Barnaamjka Caymiska Caafimaadka Carruurta (CHIP). Suuqa caymiska wuxuu ku siinayaa awood aad is-barbardhigto noocyo caymis caafimaad, jawaabo ka hesho su'aalo, ogaato haddii aad xaq u leedahay taageerid maaliyadeed si ad u bixiso caymiska, iyo waxaad isku qori kartaa caymiska qanciyo baahidaada. Deganayaasha joogtada ah iyo dad kale ee leh heer muhaajirnimo waxay u qalmi karaan Suuqa Caymiska. Si aad u hesho macluumaad ka badan, u booqo **www.HealthCare.gov**.

### Helitaanka Xarunta Daryeelka Caafimaadka ee Kharashka Yar


Bulshooyinka inta badan waxay qabaan ugu yaraan hal rug caafimaad baxsho adeeg bilaash ah ama kharashkiisa hooseeyo. Kuwaani waxaa marmar lagu magacaaba rug caafimaad ama xarumaha caafimaadka bulshada. Si aad u hesho midka kuu dhow, internetka eeg ama weydii urur muhaajiriinta caawiya haddii ay yaqaanan rug caafimaad bilaash ama kharashkiisa hooseeyo ee ku yaalo xaafaddaada.

Wasaarda Caafimaadka iyo Adeegyadda Dadka Maraykanka ayaa maalgeliyo rugyada caafimaadka ku yaalo meelo badan ee dalka iyo muhaajiriinta siiyo xannaano caafimaad aasaasi ah. Si aad u hesho takhtar kuu dhow, u booqo **http://findahealthcenter.hrsa.gov.**

# Barnaamijyada Caafimaadka ee Dowladda Federaaliga iyo Gobolka

**Medicare (Xanaano caafimaad):** Medicare waa barnaamaj caymis caafimaad loogu talagalay dadka ka wayn 65 jir ama ka wayn, ama ka yar 65 jir iyo qabo naafonimo, ama qabo cudur kelli heerkiisu ugu dambeys gaarey. Medicare wuxuu baxshaa xannaanada koowad iyo noocyo adeeg ah haddii aad jiran tahay ama waxyeello ku gaarey. Si aad u hesho macluumaad ka badan ee ku saabsan sida la isku diiwaangeliyo Medicare, u booqo **www.medicare.gov/MedicareEligibility/home.asp**.

Medicare wuxuu leeyahay dhawr qaybood, oo ay ka mid yihiin Qaybta A, Qaybta B, iyo Qaybta D.




- Qaybta A waa caymiska isbitaalka oo kugu caawinaayo bixinta xannaanada bukaanjiifka isbitaalka, adeegyada kaaliyayaasha caafimaadka, hoyga daawynta, iyo xannaanda caafimaadka guriga. Dadka badankood ma baxshaan Qaybta A sababtoo ah waxay baxsheen canshuurta Medicare markii ay shaqeyn jireen. Haddii aadan xaq u leheen caymiska bilaashka ee qaybta A, waxaa laga yaaba inaad iibsan kartid Qaybta A haddii aad qancisid shuruudyo.
- Qaybta B waa caymiska caafimaadka ee daboolo adeegyo sida, takhtarka, xannaanada bukaan socodka, qalabyada caafimaadka, adeegyada caafimaadka guriga, iyo adeegyo caafimaad kale iyo adeegyo hortag kale. Qaybta B, waxaad bixinaysaa kharash yar bishiiba.
- Qaybta D waa midka lagu iibsado daawada laguu qoro iyo lagu baxsho dhowr daawoyin uu takhtarka kuu qoro si laguu daaweeyo. Isku qorida Qaybta D ee Medicare waa mid ikhtiyaar ah, si aad caymiskaan u hesho waxaad bixin doonta kharash biloodle dheeraad ah.

Deganayaasha joogtada ah waxay heli karaan Qaybta A, Qaybta B, iyo Qaybta D ee Medicare haddii ay ka soo baxaan shuruudaha qaarkood. Deganayaasha joogtada ah oo ah 65 jir ama ka wayn si otomatik ah ayaa lagu qori karaa Qaybta A ee Medicare markii ay bilaabaan inay helaan Manfacyada Hawlgabka Nabadsugida Bulshada. Haddii aadan ahayn 65 jir, laakiin siyaabo kale ugu qalmi kartid, wac xafiiska Nabadsugida Bulshada ee kuugu dhow wixii warbixin ah oo ku saabsan sida loo dalbado. Guud ahaan, waa inaad Waddanka Maraykanka ka soo shaqaysay muddo gaadhaysa 10 sanno (ama 40 waqtiyo seddex biloodle ah) noloshaadu si aad u qaadatid Qaybta A ee Medicare adigoo lacag bixinin. Si aad u hesho macluumaad ka badan ee ku saabsan Medicare iyo si aad internetka uga soo baxsato *Medicare & You*—Hagaha Rasmiga Dowladda Maraykanka ee Medicare u booqo **www.medicare.gov.** Sidoo kale waxaa macluumaadka lagu heli karaa Af Isbaanish.

**Medicaid (Kaalmo caafimaad):** Medicaid waa barnaamij ay iska kaashadeen dawladda federaaliga iyo gobolka iyo loogu talagalay dadka dakhligoodu yar yahay. Gobol kasta wuxuu leeyahay qaynuuno gaar u ah Medicaid. Medicaid waxay bixisaa adeegyada caafimaadka, sida tegista dhakhtar ama isbitaal iyo qiimaha daawoyinka laguu qoro. Deganeyaasha joogtada ah oo soo galay Waddanka Maraykanka *ka hor*

Agoosto 22, 1996 waxaa laga yaabaa in la siin karo Medicaid (Kaalmo Caafimaad) haddii ay ka soo baxaan shuruudaha qaarkood. Deganeyaasha Joogtada ah badankood ee soo galey Waddanka Maraykanka *markaas ama ka dib* Agoosto 22, 1996 waxaa laga yaabaa in la siin karo Medicaid haddii ay ku noolaayeen Waddanka Maraykanka shan sano ama ka badan iyo ka soo baxaan shuruudaha. Si aad u hesho macluumaad ka badan ku saabsan adeegyada Medicaidee gobolkaaga, u booqo **www.medicaid.gov.**

**Barnaamjka Caymiska Caafimaadka Carruurta (CHIP):**

Carruurtaada waxay heli karaan xannaano caafimaad bilaash ah ama qiimo jaban ayagoo u maraayo CHIP haddii ay qanciyaan shuruudyo gaar ah. Haddii dakhligaaga aad u sareeyo iyo u qalmi karin Medicaid, gobolo waxay qabaan barnaamijyo caymis caafimaad ee loogu talagalay ilmaha yar, carruurta iyo dhallinyarada. Caymiskaan wuxuu bixiyaa kharashka takhtarka, daawooyinka, daryeelka isbitaalka iyo adeegyadda kale ee ku saabsan daryeelka caafimaadka. Gobolada intooda badan, carruurta da'doodu tahay 18 ama ka yar oo aan caymiska caafimaadka lahayn oo dhaqaalaha reerkoodu yaryahay way u qalmaan barnaamijka. Carruurta waxay heli karaan daryeel caafimaad bilaash ah ama mid jaban iyagoo aan heerka muhaajirnimo ee waalidkood waxba ka bedelayn.



### Macluumaad Kabadan ee ku Saabsan Medicaid iyo Chip

Gobol walba wuxuu qabaa shuruudahiisa khuseeyo Medicaid iyo CHIP, sidaa awgeed waxaa muhiim ah in la ogaado barnaamijka gobolkaaga. Macluumaad ka badan, wac 1-877-543-7669 ama u booqo **www.insurekidsnow.gov**.

# Mashaariicyadda Kale ee Faa'idooyinka Federaalka

Adiga ama xubin ka tirsan qoyskaaga ayaa laga yaabaa in ay u qalmaan manfacyada kale ee dowladda federaalka, waxayna ku xidhan tahay heerkaaga muhaajirnimo, intii aad Waddanka Maraykanka joogtey, Si aad u barato wax ka badan ee khuseeya adeegyada aad heli kartid, u booqo **www.benefits.gov**.

## Barnaamjka Taageerida Nafaqaynta Dheeraadka (SNAP)

Muhaajiriin qaarkood, waxay xaq u lahaan karaan Barnaamjka Taageerida Nafaqaynta Dheeraadka (SNAP). SNAP wuxuu baxshaa maalgelin aad dukaamada cunto kaga iibsato. Gobolada qaarkood waxa laga yaabaa inay leeyihiin barnaamij kaalmada cuntada u gaar ah oo shuruuda u qalmida muhaajiriintu ka duwan yahay gobolada kale. Macluumaad ka badan ee ku saabsan SNAP iyo shuruudaha u qalmida, u booqo **www.fns.usda.gov/snap**. Macluumaad ku saabsan SNAP waxaa lagu heli karaa 36 luqadood kala duwan, ka eeg **www.fns.usda.gov/documents-available-other-languages**.

## Adeegyada Badbaadeyaasha Xadgudubka Guriga

Muhaajiriinta iyo carruurtooda ka soo badbaadey xadgudubka guriga waxaa laga yaabaa in ay u qalmaan adeegyada manfacyada dowladda federaaliga, sida guriyeynta hoyga dumarka dhibaataysan ama SNAP. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan **www.womenshealth.gov/violence-against-women**.

## Kaalmada Taakulaynta aan Joogtada Ahayn ee Qoysaska Baahan (TANF)

Kaalmada Taakulaynta aan Joogtada ahayn ee Qoysaska Baahan waa barnaamijka dowladda federaaliga oo kaalmo iyo fursado shaqo siiyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee u qalmo. Barnaamijyadu way kala duwan yihiin, gobol kasta wuxuu leeyahay barnaamijka kaalmada oo u gooni ah. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ku saabsan u qalmida, u booqo **www.acf.hhs.gov/programs/ofa/programs/tanf**.

## Kaalmada Muhaajiriinta Naafada ah

Muhaajiriinta naafada ah waxay xaq u lahaan karaan Medicaid, SNAP, iyo Dakhliga Nabadasugidda Dheeraadka ah. Macluumaad intaa ka badan oo ku saabsan Dakhliga Nabadasugidda Dheeraadka ah, u booqo **www.socialsecurity.gov/ssi**.

## Xaruumaha Shaqada Hal Meel ku Wada Yaalaa

Dowladda Federaaliga ah ayaa bixisa lacagta kharashka ee xarumaha shaqada oo bixisa tababar u diris, shaqo kala talin, liiska shaqooyinka iyo adeegyada kale ee la xidhiidha xagga shaqaalaynta Qaar ka mid ah xarumahaan waxaa muhaajiriinta laga siiyaa faslada ESL iyo tababarka xirfadaha shaqada.



Si aad u hesho xarunta "One-Stop Career Center" ee ku dhow, u booqo **www.careeronestop.org** or **www.doleta.gov**.


EMT-P-CC-FTO

# Xafiddida Gurigaaga iyo Qoyska

Gurmadyadda waa dhacdooyin aan la fieynin kuwaasoo u sababi kara waxyeelo dadka iyo hantida. Gurmadyadda way ku dhici karta qof kasta waqti kasta. Qeybtani waxay kuu sheegeysaa sidii aad ugu diyaar garoobi laheyd gurmadyadda iyo sidii aad ku heli laheed kaalmo marka ay dhacaan.

# Diyaargarowga

U diyaargaroow gurmadyadda inta aysan dhicin ka hor. Macluumaad sidii aad ugu diyaargaroobi laheyd gurmadka, booqo **www.ready.gov**. Macluumaadkan kaamilka ah ee shabakad bixineyso ee ah sidii loogu diyaar garoobaayo gurmadka sidaas aawgeed waxaad ku xafideysaa gurigaaga iyo badbaadada qoyska.

Waa kuwan waxyaabaha aad sameyn kartid si aad u badbaadid:

- Hubi in albaabadaadu si fiican u xidhmayaan waana inay waqti kasta xidhnaadaan. Ha siin fureyaashaada qof aadan aqoon. Haddii qofaadan aqoon soo garaaco iridaada, weydii yay yihiin iyo wax ay doonayaan inta aadan ka furin ka hor.
- Qalabka qiiqa ka diga wuxuu sameeya dhawaaq dheer marka gurigu qiiq ama qaac leeyahay. Waa inaad hubiso in qalabka qiiqa ka diga ku xidhan yahay qolalka agtooda iyo meelaha kale oo gurigaaga ka mid ah. Waa inaad qalabka qiiqa ka diga tijaabisaa bil walba si aad u hubsato in uu shaqaynayo iyo in kale. Bedel batteriga qalabka qiiqa ka diga sannadkiiba laba mar.
- Waxaad isku daydaa inaad ogaatid meesha kuugu dhow ee cisbitaal, booliiska iyo dab damisku ku yaalaan. Ku xafid dhammaan nambaradda muhiimka ah taleefoonkaaga meel aad ka heleyso si fudud dhacdooyinka gurmad.
- Hel meesha ay gurigaaga kaga yaaliin dhuumaha gaaska, korontada iyo biyaha. Hubi in aad taqaanid sida gacanta caadiga ah loogu damiyo waxyaabahaas. Haddii aadan aqoon sida loo helo, weydii milkiilaha gurigaaga, shirkadaha muhiinka ah ee deegaanka, ama jiiraanka.
- U diyaargarayso waxyaabaha lagaga gaashaanto masiibada dabeeciga ah, oo ay ka mid yihiin toosh, raadiyo gacanta lagu qaadan karo, baatariyo dheeraad ah, buste, alaabta gargaarka caafimaadka, cunada qasacadaha, qardaaso cunto ah iyo caagado biyo ah oo kugu filaada ilaa saddex casho. Sidoo kale waxaad qaadataa bacaha qashinka, xaashiya musqusha ama suuliga loo isticmaalo iyo cuntada xayawaanka la rabaysto haddii aad u baahan tahay. Waxyaabahan oo dhan dhig hal meel oo aad si sahlan u heli kartid.



- Is tababara adiga iyo reerkaaga sida guriga looga baxo marka dab dhaco ama arrin kale oo degdeg ah timaado. Hubi in ay caruurtaadu yaqaaniin sida qalabka qiiqa ka diga u qayliyo iyo waxay sameyn lahaayeen haddii ay maqlaan. Ku tashada meel aad ku kulantaan adiga iyo reerkaagu haddii aad guriga ka baxdaan idinkoon is ogeyn. Meel ka calaamadsada guriga bannaankiisa ama xaafada, haddii ay dhacdo in aydaan guriga ku soo noqon karin. Weydii saaxiib ama qaraabe meel kale ku nool in uu yahay qofka ugu muhiimsan oo qoyskaagu soo wacayo haddii xaalad degdeg ah ku kala qaybsantaan. Hubi in qof kasta ogyahay in uu waco qofkan iyo in uu talefoon lambarkiisa ama lambarkeeda haysto.

- Weydii iskuulka caruurtaada qorshaaha ku saabsan xaalada degdegga ah. Xaqiiji in uu ilmahaaga yaqaano wax la sameynaayo dhacdooyinka gurmadka ama halka ay kugula kulmi karto isaga ama iyada. Ilmahaaga waa inuu yaqaanaa nambarka taleefoonkaaga iyo cinwaankaaga.

## Waxaad Qaban Karto




Si aad xaafadaada amnigeeda u caawisid, baro derisgaaga. Kala hadal waxyaabaha ku saabsan sida loo xalilo xaalada degdegga ah ee xaafadaada. Haddii aad leedahay deris naafo ah, eeg haddii ay u baahan yihiin caawimo.

Jiiraanno badan waxay leeyihiin Ilaalada Jiiraanka, macallinkee degen siey isu caawinayaan aqoonsiga iyo ka warbixinta dhaqdhaqaayada shakiga leh ee jiiraankooda ka dhacaayo. Haddii ay leedahay Gaadh haynta Xaafada meeshaad degan tahay, waad ku tabaruci kartaa ka qayb qaadashada. Haddii aad rabtid in aad bilowdid Gaadh haynta ama Ilaalinta Xaafada, wac waaxda booliska kuugu dhow wixii caawimo ah. Si aad u heshid war dheeraad ah,booqo **www.nnw.org**.

Markaad dad kale ku gargaartid badbaadadooda, waxaad caawimaysaa beeshaadaa iyo dalkaaga. Si aad uga qayb qaadatid arrimaha bulshada la xidhiidh Guddiga Kooxaha Shicibka Si aad u heshid war dheeraad ah,booqo **www.citizencorps.gov**.

# Gargaarka Degdegga

Baro siyaabaha loo caawimo xaaladaha degdegga ah qaarkood, sida marka qof dhiig baxayo ama mergado. Kan waxa la yiraahdaa "gargaarka degdegga" ("first aid"). Waxaad qaadan kartaa casharada tababarka gargaarka kowaad ee caafimaadka oo ay bixiyaan hay'ada Laanqayrta. Wac xafiiska Laanqayrta Cas ama Guddiga Amniga Qaran si aad u weydiisid meelaha laga helo cashardaas. Macluumaad dheeri ah, booqo **www.redcross.org** ama **www.nsc.org/learn/Safety-Training/Pages/first-aid-training.aspx**.

Dhigo gargaarka kowaad ee caafimaadka guriga, shaqada iyo baabuurka gudiihiisa. Gargaarka kowaad ee caafimaadka waxaa ku jira waxyaabo aad u isticmaali kartid dhaawaca ama xanuun, sida sharooto, istaraashooyin waxyaabaha jeermiska ah laysakaga nadiifiyo, daawooyin xanuun baabiska, bac baraf ah iyo goloofis ama gacmo gashi. Waxaad ka iibsan kartaa gargaarka koowaad oo fiican farmashiiyaha xaafada.

# Kontoroolka Sunta

Alaabooyin badan oo gurigaaga yaala ayaa lagu sumoobi karaa haddii la cabo ama la liqo. Waxyaabahaa waxaa ka mid ah alaabta wax lagu nadiifiyo, daawooyin, renjiga, aalkoloda, waxyaabaha laysku qurxiyo iyo xataa dhirta qaarkeed. Ka fogee ama meel dheer ka saar waxyaabaha ilmahaagu ku sumoobi karo.

Haddii qof liqo waxyaabaha lagu sumoobo, si degdeg ah ka wac Xarunta Kontroolka Sunta 1-800-222-1222. Waxaad heli kartaa gargaar 24 saacadoodba, todobada cashoba ah. Gacanta ku haay walxaha suntan ah marka aad waceyso si aad ugu sheegto shaqaalaha wax uu yahay. Haddii aadan Af-ingiriisi ku hadlin u sheeg qofka si aad u heshid turjumaan ku caawin kara. Taleefonada soo gaadha Xarunta Kontroolka Sunta waa qarsoodi waana bilaash.

# Ogoow

Wasaarada Amniga Gudaha Dalka Mareykanka (DHS) wuxuu aqoonsan yahay in qof kasta la wadaagaayo masuuliyadda ee amnika qaranka waana inaad ka taxadirtaa qatarta xasaasiga ah ee hujuumka argagixisadda Mareykanka dhexdiisa. DHS waxay leedahay nidaam si ay ugu caawiso dadka fahamka qatarta hujuumka argagixisadda ama halis kastoo kale ee amniga qaranka. Nidaamkani waxaa la yiraahdaa Nidaamka Tallo siinta Argagixisadda Qaranka

NTAS waxay ugu digeysaa waxaa loo sameeyay marka ay jirto macluumaad la aamini karo in ay jirto halis. Labadda nooc ee digniinta waa:

- **Digniin Qatareed Dhici Rabto:** Digniintaa waxay ku talineysaa oo la aamini karo, qaas ahaan, iyo lid ku ahaanshaha halista argagixiso ee Mareykanka.
- **Digniin Haliseed Muhiim ah:** Digniintaa waxay ku talineysaa oo la aamini karo, qaas ahaan, iyo lid ku ahaanshaha halista argagixiso ee Mareykanka.

Macluumaad dheeri ah, booqo **www.dhs.gov/alerts**.

Haddii aad jeclaan laheyd inaad ku hesho moobaaylka wixii ugu dambeeyay, booqo **www.twitter.com/NTASAlerts**.

Dowladda Mareykanka waxay u isticmaaleysaa NTAS inay siiso macluumaad dadweynaha dhacdooyinka gurmadka. Xoghayaha Amniga gudaha Dalka wuxuu u isticmaali karaa nidaamkani siinta macluumaadka isla madkaas ah dadweynaha marka ay dhacdohujuum argagixisinimo. Dowlada iyo doladaha deegaanka sido kale laga yaabee inay isticmaalaan NTAS siay u siiyaan macluumaad gurmad dadweynaha.

**TALO**



Haddii ay argagixso weerarto, masiibo dabiiciah, ama gurmad kale dhaco, maqal waxay ay maamulladda deegaanka kuu sheegayaan in aad sameyso. Ka dhegeyso idaacada ama telefishinka wixii sharraxaad ah. Guriga dhigo raadiyo ama telefishinka ku shaqaynaya baytari lacalaa haddii korontadu si ku milady ah u tagto.

## Waxaad Qaban Karto

Waaxda Nabadsugida ee Dalka Maraykanka waxay caawimaysaa Ameerikanku in ay bartaan khatarta laga yaabo inay ku timaado, si ay ugu diyaar garoobaan haddii ay dhacdo weerar argaggixiso ama masiibo dabeeci ah. DHS waxay bixineysaa macluumaad kaa caawinaaya sidii qoyskaaga, gurigaaga, iyo bulshadaada u badbaadin laheyd. Wac 1-800-U AHOW-DIYAAR ama booqo **www.ready.gov**.

Waxaad heli kartaa hagaha shicibka oo ah, Are You Ready? An In-Depth Guide to Citizen Preparedness *Diyaar ma tahay? Waa Hage aad uqoto Dheer oo ka Hadlaya Diyaargaraynta Shicibka*, waxaana ka helaysaa sharraxaada ku saabsan sidiiaad reerkaaga, gurigaaga iyo bulshadaada u badbaadin lahayd. Waxaad ka heli kartaa hagahaan Wakaaladda Maamulka Gurmadka Federaalka adigoo booqanaayo **www.ready.gov/are-you-ready-guide**. Sido kale waxaad ka heli kartaa qalab shabakadda DHS ee **www.ready.gov/publications**.

# Masiibooyinka Ficil ka geyso

## Kaalmadda Gurmad ee Taleefoonka

Waddanka Maraykanka, lambarka 911 waxaad wacan kartaa taleefan walba si aad u heshid gargaar degdeg ah. 911 waxaad u istimaali kartaa oo keliya dhacdooyinka gurmadka. Bar qoyskaaga marka la isticmaalaayo iyo marka aanan ku haboobeyn wicidda 911. Tusaalooyin ayaa lagu taxay hoosta.

**Wac lambarka 911 si aad:**

- U sheegto marka dab dhaco;
- U sheegto falal denbi oo markaa socda;
- Codsiga gurmad kaalmo caafimaad;
- Warbixin gaas daadanaayo; iyo
- U soo sheeg haddii aad ka shakidid dhaqdhaqaaqyo falal dambi ah, sida qaylo, qaylo caawimaad rabta iyo rasaas dhacaysa.




**Ha <u>wicin</u> 911 si aad u:**

- Weydiiso meesha aad u soctid;
- Weydiiso macluudaadka ku saabsan adeegyada dadweynaha;
- Ogaatid haddii qof xabsi ku jiro;
- U soo sheegtid xaaladaha aan degdegga ahayn;
- Weydiiso macluudaadka la xidhiidha ururinta xayawaanka; ama
- La haddal sarkaal boliis ah.

Waxaad 911 wici kartaa oo qudha marka wax khatar ah dhacaan ama naftaadu halis ku jirto. Haddii 911aad u wacdid arrimo khaldan waxaa laga yaabaa inaad ka xanibtid qof kale oo gargaar degdeg ah u baahan. Haddii aad rabtid inaad booliska su'aalo weydiisid, wac lambarka waaxda booliska ee aan ahayn xaaladadegdegga ah oo ku liisgaraysan buugga talefoonada oo buluugga ah.

### Maxaa dhacaya markaad wacdo lambarka 911?




- Marka lambarka 911 la waco waxaa badanaaba lagaga jawaabaa labo-iyo-toban 12 ilbidhiqsi. Waxaa laga yaabaa in hagad lagu geliyo. Marka qof obereytarka ah jawaabo, talefoonku wuu aamusi doonaa ilaa dhawr ilbidhiqsi. Ha dhigin talefoonkaaga. Sug inta obereytarku kula hadlayo.
- Haddii aadan Af-ingiriisida ku hadlin u sheeg qofka kula hadlaya luqadaad ku hadashid. Isla markaba waa in lagugu yeedho turjumaan.
- Qofka 911 ka jawaabay ayaa ku weydiin doona su'aalo ku saabsan sidii wax u dhaceen iyo meesha xaalada degdegga ah ka dhacday. Si degan uga jawaab su'aalaha lagu weydiiyo. Isku day inaad talefoonka ku jirtid ilaa qofka 911 kaala hadlaya uga jawaabtid su'aalihiisa oo dhan ku weydiiyo.

## Meel Marinta Sharciyada ee Waddanka Maraykanka

Waddanka Maraykanka waxaa jira dowladda sare, gobolka iyo hay'adaha hawlgelin sharciga eeilaaliya amniga dadweynaha. Xaafadahiina ama beeshiina, waxaa jira saraakiisha hawlgelintasharciga oo ah booliska iyo sheriff-ka. Raadso talefoon lambarka saldhiga booliska ee kuugu dhow, waxaadna dhigataa meel talefoonkaaga agtiisa ah. Xusuusnoow in saraakiisha boolisku u joogaan in adiga iyo qooyskaaga ka badbaadiyaan wixii halis ah. Ha ka biqin in aad soo sheegto fal denbi, gaar ahaan haddii aad tahay dhibane. Denbiilayaasha qaarkood way ka faa'iideystaan dadka soogaleetiga waayo waxay u malaynayaan in aadan denbigaas booliska usheegayn. Haddii boolisku ku joojiyo:

- Ha cabsanin.
- Anshax fiican lahaw oo la kaalmee.
- U sheeg sarkaalka booliska ah haddii aadan Af-Ingiriisi ku hadlin.
- Haddii aad baabuur gudahiisa ku jirtid, ha ka degin baabuurka ilaa sarkaalka booliska ah kuu sheego.
- Saar gacmahaaga meel booliisku ka arki karo. Ha tiigsan jeebabka ama meelaha kale ee baabuurka.

## Taageeradda Masiibo Dabeeci ah



Masiibo dabeeci ah waxay weerari kartaa waqti kasta iyo goobkasta. Masiibo dabeecadeedka waxay ku imaankartaa noocyo badan, sida dabeylo roob la socda, duufaanno, daadad, ama dhulgariiryo. Dhacdooyinka ee saameyn kugu yeelatay ee masiibo dabeecadeeka, isticmaal kaalmada masiibo iyo macluumaad ee **www.disasterassistance.gov** ama adigoo wacaya 1-800-621-FEMA (3362) ama 1-800-462-7585 (maqalkoo).

## Haddii Aad Wax Aragto, Wax Dheh™

Madaxda dowladda sare iyo tan gobolkuba waxay weydiisanyaan dhammaan dadkaku nool Waddanka Maraykanka in ay ka caawiyaan la dagaalanka argaggixisada. Iska eeg hareeraha, gaar ahaan markaad raacaysid basaska dadweynaha, tareenada iyodiyaaradaha. Haddii aad aragtid shay shaki leh oo laga tegey, sida shendada gacanta,ama kolay xashi ka sameysan, si degdeg ah ugu soo sheeg booliska ama xukuumada kale. Ha isku deyin in aad furto ama shayga meesha ka qaado! Macluumaad dheeri ah, booqo **www.dhs.gov**.



# Baro Waxyaalaha ku Saabsan Dowlada Maraykanka

Mareykanka waa wakiilka dimoqaraadiyadda, muwaadiniintana waxay ka ciyaarayaan kaalin aad muhiim u ah maamulidda waddanka. Qeybtani, waxaad ku baran doontaa sida ay muwaadiniinta u qaabeeyeen dowladda mareykanka, sida lagu abuuray midowga Dowladaha una kortay, iyo sida dowladaha u hawl galaan.

# Anaga dadka: Kaalinta Muwaadinka Midowga Dowladaha Dhexdeeda

Waddanka Maraykanka, awooda dowladu wax ku maamusho waxay ka heshaa shicibka ama dadka. Waxanu leenahay dowlad dadka ah, dadka ka timi oo dada u shaqaysa. Shicibka Maraykanku iyagaa siyaasada dowladooda wax ka bedela, sidaa daraadeed waa in ay bartaan waxayaabaha ku saabasan arrimaha dadweynaha oo muhiimka ah iyo ka qayb qaadashada beeelahooda. Shicibku iyagaa u codeeyadoorasho xor ah oo ay ku doortaan madaxda dowladda, sida madaxweynhaha, madaxweyne-kuxigeenka,xildhibaanada iyo wakiilada. Shicibka oo dhan waxay wici karaan madaxda la doortay si ay u dhiibtaanra'yigooda ama u weydiiyaan macluudaadka, ama laga caawiyo arrimo gaar ah.

Dowladeenu waxay ku dhisan tahay dhawr dhaqan oo muhiim ah: xoriyad, fursad, sinaan iyo cadaalad. Ameerikaanku waxay wadaagaan dhaqamo, oo dhaqamadan ayaa ina wada siiya taariikh bulshadeed iyoaqoonta wadanka aanu wadaagno.

Dowladda Maraykanku way difaacdaa qof kasta xuquudiisa. Waddanka Maraykanku wuxuu ka abuurmay dad meelo kala duwan ka soo jeeda, dhaqamo iyo diin kala jaad ah. Dowladayada iyo sharcigayagu waa agaasiman yahay si shicibkayaga kala duwan oo aaminsanaan kala duwan haysta dhammaan xuquuq isku mid ah u helaan. Qofna laguma ciqaabi karo ama waxyeelayn karo ra'yi ama aaminsanaan ka duwan kan dadka kale badidiisa.

## Ka Mid ah, Ka Kooban, Loogu Talagalay Shicbka: Waa Maxay Dimuqraadiyaddu?

Kelmeda "democracy" micneheedu waa "dawlad ka kooban dadka". Waddamada kala duwan dimuqraadiyadoodu waxay yeelan kartaa qaab kala duwan. Waddanka Maraykanka, waxaanu haysanaa wax loogu yeedho "representative democracy". Oo micneheedu yahay dadka yaa soo doorta madaxdooda wakiilada ugu ah dowladda.

# Sideey ku Bilaabatay Midowga Dowladaha




Muhaajiriintii ugu horeeyey oo Waddanka Maraykanka degey waxay waddamadey u dhasheen uga soo carareen cadaalad darro, gaar ahaan xagga diinta. Waxay raadinayeen xoriyad iyo fursado nolol cusub ah. Maanta, dad badan ayaa Waddanka Maraykanka u yimaada sababahaas oo kale.

Ka hor intaanu ka go'in ama noqon qaran madaxbanaan, Waddanka Maraykanku wuxuu u kala qaybsanaa 13 deegaan oo Ingiriisku dusha ka xukumo. Dadku waxay u kala deganaayeen deegaano aan ka hadli karin sharciyada iyo sida dowladu ayaga u maamushu. Gaar ahaan way ka soo horjeeddeen "canshuur bixinta aaney lahayn xildhibaanada iyo wakiilada". Tan waxa weeye in dadweynuhu canshuur bixiyaan, laakiin aaney ka hadli karin xagga maamulka dowladooda.


Sannadkii 1776, dad badani waxay dareemeen in cadaalad darro jirto oo iyagu iskood isu maamulaan. Wakiilada degaanada ka soo jeedda ayaa soo saaray waraaqihii Baaqa Madaxbanaadida (Declaration of Independence). Waraaqahan muhiimka ah ayaa caddaynaya in degaanadu xornimo iyo madaxbanaani ku dhawaaqeen oo aanay xiriir danbe la lahayn Waddanka Ingiriiska. Thomas Jefferson ayaa qoray waraaqihii Baaqi Madaxbanaadida. Isagu markii danbe wuxuu noqoday Madaxweynhii saddexaad ee Waddanka Maraykanka.

Baaqii Madaxbanaanida waxaa la ansixiyey taariikhdu markay ahayd Juulaay 4, 1776. Sidaa darted ayey Ameerikaanku ugu dabaaldegaan 4-ta bisha Juulaayo sannad kasta oo ah Maalintii Madaxbanaadida. Waadhalashadii qarankeena.

Waddanka Maraykanku wuxuu soo maray dagaal ay kaga xoroobeen Waddanka Ingiriiska kaas oo ahaa Dagaalkii Kacdoonka. Janankii George Washington ayaa abbaanduule u ahaa ciidamadii KacdoonkaAmeerikaanka. Isaga waxaa loo yaqaanaa "Aabbihii Waddankeena". Markii danbena wuxuu noqday Madaxweynihii ugu horeeyey Waddanka Maraykanka.

Ka dib markii deegaanada dagaalkii ku guuleysteen waxay noqdeen gobolo. Gobol kasta wuxuu leeyahay maamul dowladeed oo u gooni ah. Dadka goboladan ayaa rabey in la abuuro qaab cusub ee dowladeed si ay u midoobaan goboladu oo u noqdaan hal wadan. Maanta, dowladan dhexe iyo dowladda qarankeena waxaa la isku yiraahdaa dowladda fedaraaliga ah. Hadda Waddanka Maraykanku wuxuu ka koobban yahay 50 gobol, Degmada Colombia oo ah meel gaar ah oo dowladda fedaraaliga ah degan tahay iyo waddamadahoos yimaada ama Maraykanku xukumo oo); ay ka mid yihiin waddanka Guam, American Samoa, U.S. Virgin Islands, barwaqosooryada Northern Mariana Islands iyo Puerto Rico. Jasiiradaha Virgin; iyo midowga dhaqaalaha ee waqooyiga Jasiiradaha Mariana iyo Puerto Rico.

## Waddanka Maraykanka iyo Aasaaskii Saddex-iyo-tobankii degaan ee U Horeeyey



Saddex-iyo-tobankii degaan oo la helay waxay ahaayeen sidan soo socota ama meelihii markii ugu horeysey la degey: Virginia, Massachusetts, Maryland, Connecticut, Rhode Island, Delaware, New Hampshire, North Carolina, South Carolina, New Jersey, New York, Pennsylvania, iyo Georgia.

### "Nimanka oo Dhan Waa Siman Yihiin"

Ameerikanka intooda badan dushay ayey ka xafidsan yihiin ereyadan ku qoran Baaqi Madaxbaannida.


"Waxanu u haysanaa tan in ay tahay runta xaqiiqdeeda, taas oo ah in ay nimanka oodhan siman yihiin, taas oo Khalqahoodu siiyey xuquuq u gaar ah, oo ay ka mid yihiinJirtaan, Xoriyad iyo farxad raadin".

Tan micneheedu waxa weeye in dadka oo dhan ku dhasheen xuquuqo isku mid ah. Dowladu ma abuurto xuquuqdan, mana kaa qaadi karto xuquuqan.

# Abuuridda "Urur Aad Sax u ah"

Dhawr sanno ka dib Kacdoonkii Ameerikaanka, goboladu waxay isku dayeen siyaabo kala duwan si ay umidoobaan oo dowlad dhexe u sameystaan, laakiin dowladan waxay ahayd mid awoodeedu jilicsan tahay. Sidaa awgeed waxaa bilaabmay kulankii wakiilada gobol kasta oo isugu yimi magaalada Philadelphiaee ku taal gobolka Pennsylvania taariikhdu markay ahayd 1787 si ay u sameeyaan dowlad dhexe ooawood leh. Kulankani wuxuu ahaa Shirkii Dastuurka. Markii doodo badan la is dhaafsaday ka dib, ayaa hogaamiyeyaashii goboladu isku raaceen in ay sameeyaan qoraal ama dukumenti sharraxaya qaabkadowladan cusub. Dukumentigaan waxaa la yiraahdaa Dastuurka Midowga dowladaha. Dastuurku wuxuu sharaxaya sida dowladan cusub loo agaassimayo, sida madaxda dowladda loo dooranayo iyo xuquuqaha dowladan dhexe ee cusub ugu ballan qaadayso shicibkeeda. Qoraalkan ama Dukumentigan waa Dastuurka Waddanka Maraykanka, waana mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan taariikhda Ameerika.

### Waddanka Maraykanka ee Maanta (Qariidada)*



Calanka Waddanka Maraykanku wuu badalmay inta taariikhdeena Jirtay. Hadda wuxuu leeyahay 13 daliigood oo metelaya ama u taagan 13 degaan ee Ameerika ugu horeeyey. Wuxuu leeyahay 50 xiddigood oo midiiba gobol u taagan tahay. Heesta qaranka ee Ameerikanka waxaa loo tiriyey calanka, waxaana la yiraahdaa "The Star-Spangled Banner" ("Calanka Xiddigaha Dhalaaya leh"). Calanka sido kale waxaa la yiraahdaa "Quruxdii Da'da" ama "Xidigaha iyo Diilmooyinka".

Shirkii xubnaha Dastuurku waxay ansixiyeen Dastuurku markay taariikhdu ahayd bishii Sibtambar 17, 1787. Dadka qaarkood waxay dareemeen in aan Dastuurkusameyn difaac ku filan ilaalinta xuquuqaha shakhsiyada. Goboladu way ku raaceen in ay ansixinayaan Dastuurka haddii lagu daro liiska xuquuqaha shakhsiyada. Dowladda waxay ansixisay Dastuurka 1788 wuxuuse dhaqan galay 1789. Qaynuunka bedelista Dastuurka waxaala yiraahdaa qaynuunka bedelaada. 10 kii ugu horeeyay ee lagu noqdo ee dastuurka waxaa lagu daray 1791. 10 kani ku kordhin ee dastuurka waxaa lagu taxay xuquuq shaqsiyeedka. Waxaa la yiraahdaa Mooshinka Xuquuqaha.



Waddanka Maraykanku waa umad sharci lagu maamulo. Madaxda dowladda ayaa ka taliya iyagoo raacayasharciga waddanka u yaal. Dastuurka waxaa loo yaqaanaa “sharciga ugu sarreeya dhulkan” maxaa yeelay qof kasta, marka lagu daro dhamman madaxda dowladda iyo sharci kasta oo la sameeyo waa in ay raacaanmabaadii’da Dastuurka. Sharciga waa loo wada siman yahay qof kastana waa lagu qaadi karaa. Dowladdasare awoodeedu waa wax xaddeysan. Dowladda sare awood buuxda u ma laha Dastuurka ay goboladuhaystaan.

## “Annakoo Dadweynaha ah”

“Annakoo Dadweynaha ah” waa saddexda erey ee ugu horeeya Dastuurka Waddanka Maraykanka. Dastuurka bilawgiisu wuxuu sharraxayaa sababta loo qoray iyo ujeeddada lagaleeyahay. Qaybtan waxaa loogu yeedhaa “hordhaca”. Waa kan hordhaca Dastuurku:

“Annakoo Dadweynaha ah Waddanka Maraykanka, si loo dhiso Midnimo fiican, Caddaaladnajirto, la hubiyo amniga gudaha waddanka, la sameeyo difaac guud, la taageero arrimahaguud ee bulshada, in la sugo ilaalinta xoriyadeena iyo tan caruurteena, waa in la sameeyoansixinta iyo hergelinta Dastuurka Waddanka Maraykanka”.

## Sharciyada Xuquuqaha: 10ka Bedel ee ugu Horeeya

Bedelada ugu horeysey oo Dastuurka lagu sameeyey waxay ahaayeen xaqdhawrida shicibka iyo xaddeynta awooda dowladda. Liiska codka xuquuqahu waa xoriyada muhiimka ah oo loogu ballan qaaday dadka Ameerikaanka ah. Xuquuqahan waxaa ka mid ah:




- **Xoriyada Hadalka:** Waxaad xor u tahay fekerka iyo u hadalka sidaad doonto.
- **Xoriyada Diinta:** Waxaad xor u tahay inaad lahaato diin ama aadan lahaanin.
- **Xoriyada Saxaafada:** Dowladda ma go'aamineyso waxa la daabacaayo ama laga tabinaayo idaacadaha.
- **Xoriyada Kulanka ama Isu imaatinka meelaha Dadweynaha:** Waxaad xor u tahay inaad la kulanto dadka kale qaab nabadgeliyo ku dheehan.
- **Xoriyada Ku-baannaanbixida Waxyaabaha Dowladu sameyso iyoCodsashada in Wax Laga Bedelo:** Waxaad xor u tahay inaad la dodo ficiladda dowladda kuwa aadan ku raacsaneyn.

Dhacdooyinkaa badankooda, mooshinka xuquuqaha waxay difaacayaan xaqaaga gacanna kugu siinayaa. Sidoo kale Sharciyada Xuquuqaha wuxuu ballan qaadayaa wax la yiraahdo "due process". Due process waa qaybo sharciga saxda ah oo la raacayo marka qof denbi lagu soo eedeeyo. Saraakiisha booliska iyo askartu sabab la'aan qofka uma joojin karaan mana baadhi karaan, dadka guryahoodana ma baadhi karaan haddi aanay haysan amar maxakamadeed. Qofka denbi lagu soo eedeeyo waxaa hubaal ah in loo qabanayo maxkamad degdeg ah, oo leh xeerbeeg laga soo xulay dad isaga la mid ah. Waxaa ballan ah in qofkaas loo qabto qareen iyo in uu u yeerto markhaantiyo isaga u hadla. Sido kale waxaa lagaa daafacaayaa ciqaanta xaasidnimadda ee aan caadiga aheyn.

### Bedelidda Dastuurka

Dastuurka Waddanka Maraykanka waxaa loogu yeeraa dukumentii nool ("living document") maxaa yeelay dadka Maraykanku iyaga oo la kaashanaya wakiilada gobolka iyo kuwa qaranka ayey bedeli karaan dastuurka markay lagamamaarmaan noqoto. Bedelaadan waxaa loogu yeedhaa ("amendments"). Waa hawlgal adag oo dheer sidii loo bedeli lahaa dastuurka, waxaan la bedelay oo keliya 27 jeer. Qaynuunka bedelaad kuwa ugu muhiimsan oo soo raaca Codka xuquuqaha waxaa ka mid ah Saddex-iyo-toban (Thirteenth amendment), kaas oo mamnuucay is adoonsiga, iyo Afar-iyo-toban (Fourteenth amendment), kaas oo ballan qaadaya in dhammaan dadku simanyahay marka loo eego sharciga.

# Sideey u Shaqeysaa Dowladda Federaalka

13 ka deegaan ee asalka ahaa waxay ku hoos noolaayeen xukumka boqorkii Ingiriiska. Dowladooda cusub ee dhexe, waxay Ameerikaanku rabeen in ay ka hor tagaan in awood buuxda la siiyo hal qof oo dowladda ka mid ah ama xafiis. Dastuurku wuxuu sameeyey saddex laamood dowladda sare ah, si xukunku u miisaanaado. Saddexda laamood waxay hayaan mas'uuliyado kala qaybsan. Waxanu habkan ugu yeernaa hubinta iyo isu dheelitirka checks and balances. Laan qudha oo dowladda ka tirsan ma noqon karto wax awood buuxda leh, maxaa yeelay labada kale ayaa isu dheelitiraya awooda dowladda.

## Dowladda Sare ama Fedaraaliga ah

Saddexda laamood ee dowladda sare waa:



**Laanta Xeer-dejinta**
golaha Mareykanka iyo xafiisyadda la xiriira



**Laanta madaxtooyada**
madaxweyne, madaxweyne-kuxieen, iyo waaxaha dowladda fderaaliga ah



**Laanta garsoorka**
Maxkamada Sare ee Waddanka Maraykanka iyo Maxkamadaha federaaliga ah ee waddanka oo dhan

# Laanta Xeer-dejinta: Golaha

Shicibka Waddanka Maraykanku waxay ku codeeyaan doorasho madaxbannaan oo ay ku soo doortaan wakiiladooda uga qayb gelaya U.S. Koongaraska. Koongarasku waxay ka mas'uul yihiin in ay dejiyaan sharciga qarankeena. Koongarasku waxay u kala baxaa Aqalka Wakiilada iyo Senatka.

## Aqalka Wakiiladda ee Mareykanka

Gobolka kasta dadkiisa ayaa soo doorta xubnaha ka tirsan Aqalka Wakiilada. Waxaa weeye Aqalka Wakiiladu 435 xubnood, oo inta badan loogu yeero Aqalka "the House". Lambarada wakiiladu waxay ku xiran tahay gobol kasta dadka degan inta tiradood dhan tahay. Tdegan inta tiradood dhan tahay. Goboladu waxay u kala baxaa degmooyin. Dadka degmo kasta ku nool ayaa u codeeya doorasha qofka degmadooda wakiil uga noqondoona Aqalka. Wakiil kasta wuxuu shaqada hayaa labo-sanno, markaa ka dib dadku waxay haystaan fursad kale oo ay ku soo doortaan qof kale oo wakiil u noqda. Wakiiladu waxay Koongaraska ku jiri karaan waqti aan xadd lahayn.

Wakiiladan waxa weeye kuwa Degmada Columbia; barwaaqosooranka Puerto Rico, Guam, American Samoa iyo Jasiirrada U.S. Virgin Islands. Jasiiradaha Virgin. Sarkaal degen ayaa ka wakiil ah Puerto Rico.



Wakiilda Aqalka iyagaa sharciga soo saara, laakiin waxaa saaran mas'uuliyad gaar ah. Wakiilda Aqalka ooqudha ayaa sameyn kara:

- Ujeedda sharciga ee ku saabsan cashuuraha.
- Go'aan ka gaari kara haddii madaxda dowladda lagu soo eedeeyo in ay ka galeen denbi waddanka oo la hor keeno Golaha Senetka. Waxaa kan luugu yeedhaa casilaad "impeachment".

## United States Senate

Golaha Senetka Waddanka Maraykanku wuxuu ka kooban yahay boqol 100 Senatar. Gobol walba dadkiisa ayaa soo doorta labo Senatar oo uga qayb gala Koongaraska. Senatarisku waxay xilka sii hayaan lix sanno, markaa dadku waxay leeyihiin fursad kale oo dib ugu soo doortaan Senataradaas ama kuwo kale iyaga metela. Senatarisku waxay xilka hayn karaan waqti aan xad lahayn. Senatarisku waxay sameeyaan sharciyada, laakiin sidoo kale waxaa saaran mas'uuliyad gaar ah.

Gudoonka oo keliaya ayaa awooda

- Dheh "haa" ama "maya" heshiis kasta oo madaxweynnuhu la galo waddamo ama ururo. Kan waxaa loo yaqaan "heshiisyo".
- Dheh "yes" ama "no" qof kasta oo madaxweynnuhu u doorto shaqo heer sare ah, sida Maxkamada Sare ama Madaxada loo magcaabo wasaarada dowladda, sidaWaaxda Waxbarashada ama Wasaarda Caafimaadka iyo Adeegyadda Dadka Maraykanka.
- In la dhegeysto dacwada Madaxda dowladda oo Wakiilada Aqalku "casilayaan".

### Madaxda Dowladu Waxay u Adeegaan Dadka

Waddanka Maraykanka, qof kasta ayaa wici kara wakiilka ay doorteen iyo gololaha senetariska (senators). Booqo **www.house.gov** ama **www.senate.gov** si aad u aqoonsato wakiilkaaga ama xildhibaankaaga. Waxaad wici kartaa lambarka 202-224-3121 oo weydiin kartaa xafiiska wakiilkaaga iyo senetariska. Wicidda taleefonkan bilaash ma aha. Waxaad u qori kartaa wakiilkaaga iyo senetariska si aad u weydiisid su'aalo ama ra'yigaaga ka dhiibatid waxa ku saabsansharciyada, dowladda federaaliga ama haddi dhib kaa haysato oo aad u baahan tahayin lagugu caawiyo kaalmooyinka federaaliga.

**Si aad ugu qortid wakiilkaaga:**

The Honorable (Wakiilka magacisa oo dhan)
U.S. House of Representatives
Washington, DC 20515

**Si aad ugu qortid Senetarkaaga:**

The Honorable (Senetarka magacisa oo buuxa)
United States Senate
Washington, DC 20510

Waxaad booqan kartaa shebekada internetka ee Koongaraska si aad u ogaatidarrimaha ka socda Aqalka iyo senetka, wakiilkaaga iyo senetariska, oo ay ku jiraanciwaanka shebekadooda.

- Aqalka Wakiilada waxaad booqa **www.house.gov**.
- Senetka waxaad, booqa **www.senate.gov**.

### Waxaad Qaban Karto

Baro waxa ku saabsan wakiilkaaga, senetariska iyo waxyaabaha ay ka qabanayaa si ay wakiil kaaga noqdaan Koongaraska. Si aad sidan u sameysid waxaad ka raadin kartaa sheekooyin ku saabsan iyaga oo ku qoran jariirda iyo internetka Koongaraska. Dhamaan senetariska iyo Wakiiladda waxay leeyihii xafiisyo deegaameedbulshadda ay ka soo jeedaan. Waxaad ka heli kartaa liiskan boogga taleefoonadda ama adigoo ku baaraayo magacyadooda barta shabakadda. Haddii aad booqatid Washington, DC, waxaad dalxiis bilaash ah u mari kartaa Aqalka (U.S. Capitol) oo ah meesha Koongaraskeeku ka shaqeenyaan. Capitol, halka ay ka shaqeeyaan kongoreeska.

# Qeybta Go'aan Gaarista: Madaxweynaha

Madaxweynuhu waa hogaamiyaha laanta madaxtooyada, wuxuuna ka ka mas'uul yahay haynta iyohirgelinta sharciga waddanka. Madaxweynuhu wuxu hayaa xilal kale oo badan, sida dejinta siyaasadaqaranka, sharci u soo jeedinta Kongaraska, doorashada golaha madaxda sare iyo xubinta Maxkamada Sare. Sidoo kale Madaxweynuhu waa hogaamiyaha ciidamada milatariga ee Waddanka Maraykan waxana lagayaabaa in loogu yeero Hogaamiye Sare ("Commander in Chief").

Dadka ayaa u codeeya doorashada madaxweynaha iyo madaxweyne-kuxigeenka in ay xilka hayaan muddo afar-sanno ah. Madaxwayna waxaa uu xukhinka uyam karaa labo mar oo isky xiga oo midkiiba yahay afansanno. Madaxweyne-kuxigeenku wuxu noqdaa madaxweyne haddii madaxweynuhu naafoobo ama dhinto.

Waxaad baran kartaa waxyaabaha ku saabsan Madaxweynaha markaad booqatid shebekada intarnet ee Aqalka Cad (White House) oo ah Aqalka Madaxweynaha **www.whitehouse.gov**.

# Qeybta Sharciga: Maxkamadda Sare

Dastuurka ayaa dhisay Maxakamada Sare, waa maxakamada ugu sarreysa Waddanka Maraykanka. Waxaa Maxakamada Sare fadhiya sagaal xaakin. Waxaa loo yaqaan "caddaaladaha". Madaxweynaha ayaa soo doorta xubnaha Maxakamada Sare, waxayna xilka sii hayaan ilaa iyo intay kari karaan. Maxakamada Sare waxay diidi kartaa sharciyada gobolka iyo kuwa dowladaba, haddii ay ka hor yimaadaan Dastuurka. Sido kale waxaa jira maxkamado federaal ah, sida Maxkamadaha degmooyinka U.S. Maxkamadaha Racfaanka Wareegga.

Si dheeraad ah oo ku ssbsan barashadda Maxkammda Sare ee Mareykanka, booqo **www.supremecourt.gov**.

# Dowladda iyo Ismaamul Goboleedka

Marka lagu daro dowladda federaaliga ah, gobol kasta wuxuu iskii u leeyahay dastuur iyo dowladdau gooni ah. Sidoo kale gobol kasta dowladiisu waxay u kala baxdaa saddex laamood: sharcidejinta,madaxtooyada iyo garsoorka.

Hogaamiyaha laanta madaxtooyada gobolka waxa la yiraahdaa “guddoomiye” (“governor”). Dadka gobolkadegan ayaa u codeeya in ay soo doortaan guddoomiyaha iyo wakiiladooda uga qayb gelaya maamulkagobolka. Maamulka gobolka ayaa sameeya sharciyada qabanaya gobol kasta. Sharciyaddaa maka hor imaanayaa U.S. Dastuurkeeda. Dowlad kasta ee qeybta sharciga waxay kor u haysaa sharciyadda dowladaasi.




Sidoo kale gobol kasta wuxuu leeyahay dowlad hoose. Waxaa jira dowladda magaalada ama degmada ama labadaba. Waxay bixiyaan oo dul ahaan ka warhayaan adeegyo badan oo ay u qabtaan beesha, sida iskuulada dadweynaha, maktabadaha, booliska, dab-damiska, biyaha, gaaska iyo adeegyada korontada. Dadka beesha ayaa soo doorta madaxda dowladda hoose, laakiin madaxda dakhliga qaarkood waa la soo magcaabaa. Dowladda hoose waxay leedahay qaab kala duwan. Qaarkood duqa magaalada ayaa u madax ah, magaalooyinka qaarkood waxay leeyihiin golaha ama guddiga degmada. Dadweynaha degmooyinka waxa kale oo ay leeyihiin guddiyada dugsiyada, muwadiniin la doorto ama la magacaabo si ay ugawarhayaan dugsiyada daweynaha.

## Waxaad Qaban Karto

Dhawr dowladaha deegaanka kulannadooda way u furan yihii dadweynaha waxaana la qabtaa habeenkii si ay qofkasta ugu soo qeyb galo. Tusaale: waxaadtegi kartaa shirka guddiga magaalada ama kan guddiga iskuulka si aad u ogaatidwaxyaabaha ka socda beeshaada dhexdeeda. Waqtiyadda kulannada iyo goobaha badanaaba waxaa lagu soo qoraa wargeysyadda deegaanka ama barta shabakada dowlada deegaanaka Qaar ka mid ah dowladaha deegaanka waxaa laga sii dayaa idaacadaha iyo kanaaladda tiifiiyada deegaanka.

# Waayo-aragnimadda Midowga Dowladaha

Waxaad ku barab kartaa in badan oo ku saabsan Mareeykanka booqashooyinka meelaheena lagu nasto ee qaranka, marka la raaciyo baraha taariiqiga iyo meelaha aadka cajiibka u ah. Waxaad cilmi ka qaadan kartaa Mareeykankaaga meelaha lagu nasto ee qaranka sida:

- Yellowstone National Park, oo lehururinta dunida ugu ballaaran ee geysers marka la raaciyo Xaqaaiqda Da'da ah.
- Independence National Historical Park, Hoolka guriga xoriyadda iyo Dawanka Xoriyadda.
- Mammoth Cave National Park, kaasoo leh nidaam godeedka ugu dheer dunidda.
- Denali National Park and Preserve, goobta buuraha ugu dhaadheer ee waqooyiga Ameerika, Buurta McKinley.



Nidaamka Meelaha lagu Nasto ee qaranka, waxaa ka mid ah in ka badan 400 taalooyin qaran, goobo dagaal, baro taariikhi ah, xeebo, iyo in badan. Goobaha lagu nasto ee qaranka waxay ku yaalaan dowlad kasta, Degmadda Columbia, iyo shan meelood ee xuduudaha U.S.

Si aad u barato in badan eek u saabsan meelaha lagu naste ee qaranka, booqo Adeegga Qaranka Ee Meelaha lagu Nasto shabakadoooda oo ah **www.nps.gov**.


BANNER

# Noqoshada Muwaadin Maraykan

Noqoshadda muwaadin maraykan waxay ku siineysaa degenaan joogto ah xuquuq cusub iyo xuquuqul aadaminimo. Muwaadinnimada xittaa waxay leedahay masuuliyaddo cusub. Qeybta waxay ka hadleysaa asbaabaha loo texgelinaayo muwaadannimadda maraykanka qeeyxeeysaana waxa aad baahan tahay in aad sameyso inaad noqoto muwaadin.

# Maxaad u Noqoneysaa Muwaadin Maraykan?

Noqoshadda muwaadin waa in aad diyaar u tahay:

- U dhaarashad daacad u ahaanta Mareykanka;
- Waa in aad ka tanaasushid u adeecsanaanta waddamo; kale
- Waa in aad doonaysid taageerada iyo difaaca Waddanka Maraykanka iyo Dastuurkiisa.

Marka aad noqotid waddani, waxaad oggolaan dhammaan mas'uuliyadahasaaran shicibka Maraykanka. Sido kalena, waxaad heli doonta xuquuq u gaar ah muwaadiniinta. Degenaanta joogtadda waxay leedahay xuquuqda ugu badan ee muwaadanka U.S., laakiin waxaa jira asbaabo badan oo la texgelinaayo noqoshadda muwaadin U.S. sida:

- **Codayn:** Doorasha federaaliga waxaa keliya oocodayn kara dadka ah wadaniyiinta. Dowladaha badankooda, muwaadiniinta U.S. oo keliya ayaa loo ogolyahay inay codeeyaan doorashooyinka.



- **Gudashada Xilka Xeer Beegtida:** Xeer beeggamaxakamadaha sare waxaa ka qeybqaadankara dadka wadaniyiinta ah oo keliya. Dowladaha badankooda, muwaadiniinta U.S. oo keliya ayaa loo ogolyahay inay u shaqeeyaan qareen ahaan. Waanaarrin muhiim ah oo xil badani saran yahaymuwaadinka Maraykanka ah.
- **Ku Sodcaalka Lagu Sodcaalayo Baasabor Maraykanka:** Baasaborka Maraykanku wuxuu kaa caawinkaraa markaad wax uga baahan tahey dawladda wadanka dibadiisa, haddii loo baahdo.
- **Keenidda Ehelada ilaa Maraykanka:** Markaad rabted inaad wadanka keentid ehelkaaga waxaa mudnaanta la siiyaa dadkaheysta dhalashada wadanka.
- **Qaadashada Shahaadada Dhalashada Caruurta Aan Waddanka Gudihiisa ku Dhalan:** Dacwaddaha intoodda badan, waddani Maraykanka ah oo waddanka banaankiisa ilme ugu dhasho wuxuu ilmahaasi noqonayaawaddani Maraykan ah.

- **U Qalmidda Shaqooyinka Dowladda Federaaliga:** Shaqooyinka qaarkood ee dowladda waxaa laysaga baahan yahay shahaadadda dhalashada Waddanka Maraykanka.
- **Noqoshada Madaxa la Doortay:** Waddaniga keliya aay u carari xafiiska dowladda federaaliga (Senetkaama wakiilka Kongresska) iyo kuwo badan oo gobol ama xafiisyada hoose.
- **Haysashada Deganaanshaha:** Waddanigu wuxuu xaq u lee yahay in uu joogo Waddanka Maraykankaoo aan laga kaxayn karin.
- **U Qalmidda Deeqda Lacageed ee Federaaliga iyoDeeqda Waxbarasho:** Gargaar maaliyadeed oo badan oo lagu deeqo, waxaa ka mid ah, deeqda waxbarasho ee kuliyada iyo deeq lacageed dowladu bixiso oo ujeeddooyin kala duwan loogu talagalay ayaa u diyaar ah waddaniyiinta Maraykanka oo keliya.
- **Qaadashada Manfacyada Dowladda:** Manfacyada dowladda qaarkood ayaa u diyaar ah waddaniyiinta Maraykanka oo qudha.



## Helista Macluumaadka Waddaniyaynta

Dadka da'doodu tahay sideed-iyo-toban 18 ama ka weyn oo raba in ay noqodaanwaddani waa in ay buuxiyaan foomka M-476, ee A Guide to Naturalization (Hagaha Waddaniyaynta). Hagahan waxa ku jira macluumaad muhiim ah ooku saabsan waxyaabaha loo baahan yahay. Waxa kale oo ay sharraxaysaa foomamka aad u baahan doontid markaad bilaabaysid habka waddaninoqoshada.

Si aad u aragto in aad mudan tahay inaad codsato dabiici ku noqosho, booqo Xaruunta Keydka Muwaadinnimada ee **www.uscis.gov/citizenship**. Isticmaal foomka N-400, Codsiga dabiici Ku Noqoshada, si aad u codsato dabiic ku noqosasho. Waxaa jirta lacag yar oo lagu xereeyofoomka N-400. Si aad u ogaato kharashka lagu buuxinaayo Foomka N-400 ama foonkastoo USCIS, booqo **www.uscis.gov/fees**.

Si aad u heshid foomka M-476, M-400, iyo N-1-800-870-3676, wac khadka foomamka USCIS-ta oo ah 1-800-870-3676 ama ka qaado **www.uscis.gov**.

Macluumaad dheeri ah oo qaas ah oo ku saabsan qorshooyinka iyo mudnaanta loo baahan yahay daciici ku noqoshada, ka fiiri buug yaraha Qorshaha USCIS ee **www.uscis.gov/policymanual**. Buug yaraha Qorshaha waa USCIS-ta bartamaheeda leynka furan ee keydka qorshooyinka soo galootiga.

# Noqosho Dabeecadeed: Noqoshada Muwaadin Maraykan

Hab-socodka lagu noqdo Muwaadin Maraykan ah waxaa loogu yeeraa waddaniyeynta ("naturalization"). Waxaad dalban kartaa waddaninimada mar keli haddii aad buuxiso rabitaanada soo socda:

## Waxa Waddaniyaynta looga Baahanyahay

1. Sii wadid Degaanshaha Rasmiga ah In aad ku noolaatid waqti gaar ah Waddanka Maraykanka degaanaade rasmiya ahaan (si wadidDegaanshaha Rasmiga ah).
2. Qof ahaan aad joogtid Tusi in aad qof ahaan u joogtay Mareykanka muddooyin waqtiyeed qaas ah.
3. Waqtiga aad ku sugneyd Dowlad ama degmada USCIS: Tusi in aad ku nooleyd dowladdaada ama degmada USCIS caddad waqti qaas ah.
4. Dadnimo wanaagsan tahay Tusi in aad anshax laheyd si sharciyeed iyo dabci la qaadan karo.
5. Ingiriisida iyo Aqoonta Waddanka In aad taqaanaa Af-ingiriisida iyo macluumaadka ku saabsan taariikhda Waddanka Maraykanka iyodowladda (Ingiriisida iyo Aqoonta Waddanka).
6. Ku xirnaanta Dastuurka Fahmidda iyo ogolaanshaha mowqifyadda U.S. Dastuurkeeda.

Waxaad lahaan kartaa mudnaanta filashooyin qaar iyo la qabsiyooyin haddii:

- Waxaad tahay Maraykan asal ah;
- Waxaa ku shaqaaleynaayo gudi heerarka kasbasho;
- Waxaad kasbaneysaa adeegyadda ciidanka; ama
- Waxaa tahay xaas, ilmo, ama waalid la hubo muwaadin U.S.

Weydii foomka M-476, Hage Dabiici ku noqosho, macluumaad dheeri ah **www.uscis.gov/natzguide**. Sidoo kale waxaad la tashan kartaa qareen socdaalka ah ama kuwo kale oo xirfad u leh arrimahaas. Macluumaadka bogga 21 intaa ka badan:

### 1. Sii Wadid Degaanshaha Rasmiga ah

Sii waditaanka degaanshaha rasmiga ah ("Continuous residence") Micnaheedin waa in aad waqti gaar ah aad ku Nooshahay Waddanka Maraykanka deganaade rasmiya ahaan. Dadka intoodda badani waa in ay sii wataan deganaanshaha rasmiga ah ilaa shan sanno (ama saddex sanno haddii ay guursadaan waddani Maraykanka ah) ka hor intaanay bilaabin habka lagu helo waddanimada.

Maalinta aad noqoto deegaanle joogto ah (badanaaba taariikhda Kaarka Degenaanta Joogtada ah) waa taariikh aya bilaabaneyso shantaada sanno. Haddii aad ka maqnayd muddo waddanka Maraykanka, badiyaa lix bilood ama in ka badan, waxaa laga yaabaa inaad "jebisay" sii wadashadii deganaanshaha.

Haddii aad ka maqantahay Waddanka Maraykanka hal sanno ama ka badan, waxaa laga yaabaa in aad soo noqon kartid haddii aad haysatid oggolaanshaha dib oo soo gelida. Waa in aad dalbatid oggolaanshaha dib oo soo gelida inta aadan Waddanka Maraykanka ka dhoofin ka hor. Eeg bogga17 macluumaadka kuu sheegaysa sida loo dalbado oggolaanshaha dib oo soo gelida. Kiisaska intooda badan, waxba lagama soo qaadayo waqtigii aad joogtay Waddanka Maraykanka ka hor intii aadan waddanka ka tegin oo loo xisaabin lahaa waqtigii sii wadida deganaanshaha waddaniyaynta. Tan micneheedu waxa weeye in aad u baahan doontid bilaabida sii deganaanshaha **mar** kale ka dib markaad ku soo noqotay Waddanka Maraykanka, ama laga yaabo in aad sugtid afar sanno iyo hal maalin ka hor intaadan dalban waddaniyaynta.

Taa waxaa raacsan, haddii ay qasab tahay inaad ka tagto U.S. ujeedooyin gaar ahoo shaqo, waxaad u baahaneysaa inaad buuxiso Foomka N-470, Codsiga lagu Ilaalinaayo Degenaanta ee soo jeedinta Daciici ku noqoshada, si loo ilaaliyo xaaadaada sidii deegaanle joogto ah si aad horay ugu sii wadato dabiici ku noqoshadda.

La soco in ka maqnaanshaha Waddanka Maraykanka inta arjiga waddaniyaynta kuu xeraysan yahay oo keeni karo dhibaato xagga qaadashada ama u qalmida, gaar ahaan haddii aad aqbashay in aad ka shaqaysid waddanka dibadiisa.

| IN AAD SII WADATID KU NOOLAANSHAHA DEGANAADE RASMIYA AHAAN | | |
|---|---|---|
| Haddii aad ka ugu tagto United States: | Degaanshahaaga rasmiga waxa weeye: | Si aad u haystid sharcigaaga waa in aad: |
| In ka badan Lex bilood | Laga yaabee in uu Khasaaroobey | Caddaysid in aad halkan siideganaanayd, ka shaqaynsidiyo/ama sii wadid xidhiidhkaWaddanka Maraykanka(sida, bixinta cashuuraha) intaad ka sii maqan tahay. |
| In ka badan hal sanno | Khasaaroobey | Dacwaddaha intoodda badan, waa in aad dib u biloowdid sii wadida degaanshahaaga. Dalbo oggolaanshaha dib u soo gelida ka hor intaadan dhoofin haddii qorshahaagu yahay in aad ku soo noqotid Waddanka Maraykanka si deganaade rasmiya ahaan. 470 ama weydii foomka N-470, Arjiga Dhawrista Deganaanshaha rasmiga ah (Application to Preserve Residence for Naturalization Purposes) oo ujeeddadiisu tahay waddaniyaynta. |

## Dhawrista Deganaanshahaaga ee ujeedada Waddaniyaynta: Marka Laga Reebo Hal Sanno oo Maqaansho ah

Haddii aad u shaqaysid dowladda Maraykanka machad cilmi baadhis ah oo laga yaqaano Waddanka Maraykanka, sharikado Maraykan ah, ama haddi aad ka tirsan tahay urur diineedoo adeegyo ka bixiya waddanka dibadiisa waxaa laga yaabaa in aad dhawri kartid siiwadashada deganaanshaha haddii aad:

1. Qof ahaan joogtey oo ku noolayd waddanka Maraykanka adigoon dhoofin ugu yaraan halsanna ka dib markaad noqotay deganaade rasmi ah.
2. Xereysid foomka N-470, Arjiga dhawrista deganaanshaha rasmiga oo ujeeddadiisu tahaywaddaniyaynta (Application to Preserve Residence for Naturalization Purposes), intii aadanwaddanka Maraykanka soo gelin hal sanno ka hor. Waxaa jirta lacag yar oo lagu xereeyofoomka N-470. Fiiri qiimaha buuxinta ee oomka N-470 ama foom kastoo USCIS, booqo **www.uscis.gov/fees**.

Warbixinta intaa ka badan, la xidhiidh khadka foomamka USCIS-at oo lambarkoodu yahay Sidoo kale waxaad ka heli kartaa foomamka USCIS-at shebekada internetkaoo ah **www.uscis.gov**.

**TALO**




Foomka oggolaanshaha dib oo soo gelida (foomka I-131, Application for a Travel Document) iyo Arija Dhawrista Deganaanshaha rasmiga ah oo ujeeddadiisu tahay Waddaniyaynta (foomka N-470, Application to Preserve Residence for Naturalization Purposes) isku mid maaha. Waxaa laga yaabaa in aad tustid oggolaanshaha dib oo soo gelida intaad tusi lahayd Kaadhka Deganaanshahaaga Rasmiga ah (haddii aad maqnayd muddo ka yar 12 bilood) ama tus fiise (haddii aad maqnayd muddo ka badan 12 bilood) ka dib markaad maqnaansha kumeelgaadhka ah ka soo noqotid oo soo gashid Waddanka Maraykanka. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad dooneyso inaad codsato dabci ku noqoshadda oo aadna ka maqneyd in ka badn 12 bilood, sido kale waxaad u baahaneysaa feyla foomka N-470 si aad u ilaaliso asbaabaha degenaashahaaga.

## Marka Laga Reebo Shaqaalaha Milatariga

Haddii aad Ciidamada ku jirtid ama dhowaan lagaa saaray Ciidamada xooga dalka Maraykanka, sii haysashada deganaanshaha rasmiga ah iyo joogista gudaha waddanka waxaa laga yaabaa in aanay adiga ku khusayn. Waxaad warbixin dheeraad ah ka heli kartaa booga M-599 Macluumaadka Waddaniyaynta Shaqaalaha Milatariga (Naturalization Information for Military Personnel). Saldhig kastoo milatari ah, waa in uu leeyahay hab loola xidhhidhi karo oo ku saabsan arjigaaga waddaniyaynta iyo foormka caddaynta (foormka N-426, Request for Certification of Military or Naval Service), ee codsiga soo kala xaqijinta adeega milatariga ama Ciidamda badda. Waa in aad isku dirtid foomka N-426 iyo arjigaaga. Si aad u heshid foomka aad u baahan tahay, wac lambarka lacag la'aanta USCIS-ta ee khadka caawimaada Milatariga Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa internetka **www.uscis.gov/military** ama wac lambarka Adeega Macmiilka oo ah 1-800-375-5283.

### 2. Qof Ahaan aad Joogtid

Qof ahaan aad joogtid micneheedu waa inaad xaqiiq ahaantii joogtid Waddanka Maraykanka gudihiisa. Haddii aad tahay deganaade rasmi ah oo da'diisu tahay ugu yaraan 30 jir, waa in aad joogtid Waddanka Maraykanka gudihiisa ugu yaraan 18 bilood shantii sanno ee ina soo dhaaftay (ama 18 bilood ee ina soo dhaaftay, haddii uu xaas Maraykan ah lahaa) ka hor intaadan dalban arjiga waddaniyaynta.

## Farqiga udhaxeeya Joogi Qof Ahaaneed iyo Si-wadid Degaanshaha Rasmiga ah

Qof ahaan aad joogtid waa intii maalmood oo aad Waddanka Maraykanka gudihiisa ku noolayd oo dhan marka laga reebo waqtiiga aad Maraykanka ka maqnayd. Maalin kasta oo aad Waddanka Maraykanka bannaankiisa ku maqnayd waxay kaa jaramaysaa joogitaangaagii qof ahaaneed oo dhan. Maalin kastood aad ku qaadato dibadda U.S. waxay kaa qaadeysaa guud ahaan muuqaal joogistaada. Haddii aad Waddanka Maraykanka muddo dheer ka maqnaatid ama haddii safaro gaaban u baxday waxaa laga yaabaa in aadan ka soo bixin joogitaangaagii qof ahaan qof ahaan aad joogtid ee lagaaga baahnaa. Si aad u tirsatid waqtigii joogitaangaaga gudaha qof ahaan aad joogtid waa in aad isu dartid kuli waqtigii aad waddanka gudihiisa joogtey oo dhan. Ka dib ka jar dhammaan safaradii aad Waddanka Maraykanka dibadda uga dhooftay. Kan waxaa ku jira safarada gaaban oo aad ku tagtay waddanka Canada iyo Mexico. Tusaale, haddii aad Mexico u dhooftay Sabti iyo Axad, waa in aad ku dartid safada aad xisaabinaysey, inta maalmood, waddanka dibadda kaga maqnayd.

Sii wadid Degaanshaha Rasmiga ah waa intii casho ee deganaade rasmiya ahaan Waddanka Maraykanka gudihiisa aad ku noolayd oo dhan ka hor intaadan dalban waddaninimada. Haddii aad waqti badan Waddanka Maraykanka dibadda kaga maqnayd muddo hal safar oo keli ah, waxaa laga yaabaa in aad jebesay si wadid Degaanshaha Rasmiga ah.

### 3. Waqtiga aad ku Sugneyd Dowladda ama Degmadda USCIS

Dadka intoodda badan waa in ay ku noolaadaan gobol ama degmada USCIS ee ay ka dalban karaan waddaniyaynta ugu yaraan saddex bilood. Ardaydu waxay dalban karaan waddaniyaynta meeshay iskuul ka dhigtaan ama reerkoodu degan yahay (haddii ay ku tiirsan yihiin waalidkoodu).

### 4. Dadnimo Wanaagsan Tahay

Si aad ugu qalantid waddanimada, waa in aad tahay qof asluub ama anshax fiican leh. Qofku ma yeelan karo "Dadnimo wanaagsantahay" haddii uu denbiyada qaarkood galo intii lagu dhex jirey shantii sanno ee la soo dhaafay ka hor intaanu dalban waddanimada ama haddii uu been ka sheegay su'aalaha waddaniyaynta la weydiinayey.

## Dabeecadaha Laga Yaabo inay Muujiyaan Asluub La'aan

- Wadista adigoo saqraansan ama saraansanaan waqti kasta
- Khamaarka sharci darrada ah
- Dhileysiga
- Been ka sheegida si aad u heshid manfacyada emigerayshanka
- Inaad bixinweydid lacagta maxkamadu kugu amartay ee masruufka caruurta
- Qof meelkaga dhicid sababtoo ah jinsiyadiisa, diintiisa, asalka qolodiisa, ra'yi siyaasadeed ama beel gaar ah

Haddii aad gashay denbiyo gaar ah qaarkood, weligaa ma noqonaysid waddani Maraykan ah, waxana suurtuubi kara in waddanka lagaa masaafuriyo. Denbiyadan waxaa loogu yeedhaa laga xayuubiyey ("bars") waddanimadii. Denbiyada la yiraahdo xaddgud daran "aggravated felonies" (haddii aad gashay denbiyadan ama ka dib bishii Noofambar 29. 1990), sida dil, kufsad, faraxumaynta caruurta, farasaar xaddgudub ah, khaayinnimo, sharci-darro ku qaadista doroogada, hub, iyo dadka sharci darro lagu qaado waxay ka mid tahay waxyaabaha waddanimada laysugu diido. Kiisaska intoodda badan, muhaajiriinta laga reebay ama laga eryey Ciidamada Maraykanka sababtuna tahay in ay yihiin muhaajiriinta ama ka baxsaday ciidanka Waddanka Maraykanka sidoo kale waa laga mamnuucay in ay qaataan dhalashada Waddanka Maraykanka

Sidoo kale waxaa laga yaabaa in laguu diido dhalashada haddaad ku dhaqantid waxyaabo muujinaya asluub ama akhlaaq la'aan.

Denbiyada kale waa kumeelgaadh ka mamnuucida qaadashada dhalashada. Mamnuucida kumeelgaadhka ah waxay kaa hor joogsanysaa qaadashada dhalashada ilaa shan sanno ka dib makaad gashay denbiga. Waxaa kuwaas ka mid ah:

- Denbi kasta oo ah in qof si ulakac ah wax lagu yeelo;
- Denbi kasta oo ah in wax lagu gaadhsiiyo hanti ama khaayinnimo xagga dowladda oo maxkamad kuguxukuntay;
- Labo ama denbiyo ka badan oo isugu jira shan sanno ama ka badan oo maxkamad kugu xukuntay;
- Meel kaga dhac sharciga haysashada mukhaadaraadka (sida isticmaalida ama iibinta maandooriyeyaashasharci darro ah);
- Xabsi ku jirid ilaa 180 maalmood ama ka badan shantii sanno ee la soo dhaafay.

Waa inaad soo sheegtid denbiyadii aad gashay markii aad dalbatay waddanimada. Waxaa denbiyadaa ka mid ah kuwii laga tirtiray xogtaada ama aad gashay ka hor inta aadan 18 jir gaadhin. Haddii aadan u sheegin USCIS-at denbiyadan, waxaa laga yaabaa in laguu diido qaadashada dhalashada oo dacwad lagugu soo oogo.

**5. Ingiriisida iyo Aqoonta Waddanka**



Guud ahaan, waa in aad muujin kartid wax akhriska, qorida iyo ku hadalka Af-ingiriisida asaasiga ah. Sidoo kale waa in aad aqoon guud u leedahay taariikhda iyo dowladda Waddanka Maraykanka oo (loo yaqaan "Aqoonta Waddanka"). Waxaa lagaa doonayaa inaad ku gudubto Ingiriiska iyo tijaabooyinka bulshada si aad u xaqiijiso cilmigaaga.

Iskuulo iyo ururo badan ayaa caawiya dadka u diyaar garoobaya imtixaanka dhalashada waddaninimada. Waxaad ka heli kartaa su'aalaha tijaabadda **www.uscis.gov/citizenship** and **www.uscis.gov/teststudymaterials**. USCIS waxay bixineysaa qalab waxbarasho lacag la'aan ah oo kala duwan, sida Buug-yareyaal, kaararka Flashka, leyliyo tijaabo, iyo fiidiyooyaal. Waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan muwaadinnimadda iyo fasalladda Ingiriiska **www.uscis.gov/citizenship**.

**6. Ku Xirnaanta Dastuurka**

Waa in aad doonaysid taageerada iyo difaaca Waddanka Maraykanka iyo Dastuurkiisa. Waxaad muuijsay"ku xirnaan" iyo daacadnimo aad u haysid Waddanka Maraykanka iyo dastuurkiisa markaad ku *Dhaaratay Daacadnimada*. Waxaad noqonaysaa waddani Maraykan ah markaad ku *Dhaaratid Daacad u Ahaanta*.

Xaaladaha qaar, waa la bedeli karaa *Axdiga Daacadnimada*. Haddii aad tusti in aad leedahay jir ahaan ama kugu soo kordheyso curyaannimo taasoo kaa dhigeysa inaadan fahmin micnaha *Axdi*, waa laguu saamaxaa.

Haddii arjiga dhalashdu kuu xeraysan yahay oo aad guurtid, waa in aad ogeysiisaa Adeega shahaadada dhalashada iyo Imigareyshan/socdaalka (USCIS) ciwaankaaga cusub. Xareey Foomka AR-11 Bedelka Cinwaanka, 10 maalmood gudaheeda laga bilaabo goorta aad guurtey. Macluumaad dheeri ama bedelidda cinwaankaaga leynka furan booqo, **www.uscis.gov/addresschange** ama wac Adeegga Macaamiisha 1-800-375-5283. Waa inaad u sheegto USCIS **mar walba** aad cinwaankaaga beddesho.

## La Dhaqanka, Filashooyinka, iyo Martigelinta

**Luqadda Ingiriiska iyo Bulsho la Dhaqanka**

Dadka qaarkood oo dalbada dhalashada waddanimada waxay qaataan imtixaan waxyaabaha looga baahan yahay ka duwan yihiin sababtuna tahay xagga da'dooda iyo intay tahay muddadii ay Waddanka Maraykanka ku noolaayeen.

| LAGA REEBAY AF-INGIRRISIDA IYO CILMIGA BULSHADA EE LOOGA BAAHAN YAHAY | | | |
|---|---|---|---|
| Haddaad tahay: | Oo aad Waddanka Maraykanka ku noolayd ilaa United States Senate: | Ma aad qaadan: | Waa in aad ku qaadataa: |
| 50 jir ama ka weyntahay | 20 sanno | Imtixaanka Af-ingiriisida | Imtixaanka cilmiga bulshada oo ah luqadaada |
| 55 jir ama ka weyntahay | 15 sanno | Imtixaanka Af-ingiriisida | Imtixaanka cilmiga bulshada oo ah luqadaada |
| 65 jir ama ka weyntahay | 20 sanno | Imtixaanka Af-ingiriisida | Imtixaanka cilmiga bulshada oo La Sahlay ee luqadaada |

Haddii aadan rabin in aad qaadatid Imtixaanka Af-ingiriisida, waa in aad keensatid tujumaan kuu sheega imtixaanka cilmiga bulshada.

### Caafimaadka aad Leedahay

Haddii aad leedahay jir ahaa ama curyaannimo soo kordheysa ama maanka aan wanaagsaneyn(s), waxaad codsan kartaa cafin Ingiriisiga iyo/ama waxyaabaha lagaaga baahan yahay. Warbixinta intaa ka badan la xidhiidh laynka foomamka ee USCIS-ta 1-800-870-3676 ama weydii foomaka N-648 ama kala soo bax koobi internetka USCIS-da **www.uscis.gov/n-648**.

### Martigelinta Curyaamiinta

USCIS waxay sameyneysaa awood kastoo macquul ah si ay ugu caawiso codsadaha curyaamiinta kaamilista hawlgalka dabci ku noqoshada muwaadin. Tusaale ahaan, haddii aad isticmaaleyso kursiga la riixo, USCIS waxay xaqiijineysaa in lagaa qaado daabacaada faraha, wareysi, iyo laguu habeeyo meel aad ku sugnaan karto gaarigaaga la riixaayo. Haddii aad dhagool tahay amaba maqalka xun yahay ee aad u baahato turjumid luqadda calaamadaha, USCIS waxay kuu diyaarineysaa inaad hesho mid waqtiga wareysigaaga. Haddii aad u baahato marti gelin asbaab curyaannimo awgeed, fadlan wac Adeega Macmiisha ee 1-800-375-5283 or 1-800-767-1833 (maqalka xumaado) si aad u codsato marti gelin.

## Damaashaadka Waddanimada

Hey'adda Adeegyadda Muwaadinka iyo Socdaalka (USCIS) ay arjigaaga waddanimada oggolaato waa in aad ka qayb gashid xaflada u dabaaldega warqada *dalashada iyo dhaarinta*. USCIS-tu waxay kuu soo diraysaa foomka N-445 (Notice of Naturalization Oath Ceremony), iyo ogeysiiska xaflada waddanimada iyo dhaarinta si ay kuugu sheegaan waqtiga iyo taariikhda la qabanayo. aa inaad foomka dhammaystirtaa oo hore u soo qaadataa markaa imanysid xaflada.

Haddii aadan tegi karin xafladaada, dib baad u dhigan kartaa xafladaada. Ballan dib u dhigashada, waa in aad ku soo celisid foomka N-445 xafiiska USCIS-ta oo ay la scoto warqad sharraxaysa sababta aad u iman kari weydey xaflada.

Waxaad u soo celin doontaa kaadhkaaga degaanshaha rasmiga ah USCIS-ta markaad lagu dhaarinayo. Mardanbe u baahnid kaadhka Giriin Kaadhka sababtoo ah waxaad meesha xaflada ka qaadan doontaa shahaadadda dhalashada.

Weli waddani ma noqonaysid *Ilaa lagu Ahaariyo*. Sarkaalka ayaa si tartiib ah u akhriyi doona qayb kasta oo ka mid ah dhaarta idina weydiin in Aad ka daba dhahdiin. Marka lagu *dhaariyo* kadib, waxaa helaysaa ama lagu siin Shahaadaddaadii dhalashada waddanimada. Shahaadaddani waxay caddaynaysaa in aad tahay qof haysta dhalashada Maraykanka.

Xaflada *Dhaarintu* waa mid Aadweyne u dhexaysa. Beelo badan ayaa u dabaaldega Maalinta Xornimada ee 4 bisha Juuliyo, sannad kasta. Eeg in beeshaadu u dabaaldegto 4 bisha Juuliyo iyo xaflada dhalashada si aad ugu gayb geli kartid. Dad badan ayaa keena qoysaskooda oo damaashaada xaflada ka dib.

# Waa Kugu Kaligaa



Waxaan ku rajo weynahay in aad hagahani kaheshid caawiyo faa'iido leh. Waxaa loo qoray inuu ku caawiyo markaad noloshaada ka bilodidWaddanka Maraykanka, iyo si aad u fahantidwaxyaabaha aad xaq u leedahay iyo mas'uuliyadaku saran. Hagahanwuxuu kuu sharraxayaa siyaabaha aad beeshaadau la shaqayn kartid. Sidoo kale wuxuu kuusharraxayaa waxyaabaha aad u baahan tahay inaadbaratid haddii aad rabtid in aad noqoto waddanimaraykan ah. Booqo shebekada internetka Hey'adda Adeegyadda Muwaadinka iyo Socdaalka (USCIS) oo **www.uscis.gov** ciwaankeedu yahay. Waxaad ka heleysaa qalab kalooku caawinaaya **www.welcometousa.gov.**

Hadda maadaana aad inta ku sugan tahay, waxaad lhaysataa fursad aan ku ogaato wax waliba ee ay noloshu ahaan karto wadankaan gudiiisa. Waxaan kugu soo dhoweynaynaa deganaade rasmiya ahaan, waxaanuna ku rejeynaynaa guul iyo nolol wanaagsan in aad kala kulantid waddankan.